AKADEEMIYAHA DHAQANKA
WASAARADDA HIDDAHA
IYO TACLIINTA SARE

# « NAXWAHA AF SOOMAALIGA »

waxaa qoray
Jaalle Shire Jaamac Axmed

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA
XAMAR, 1976.

# MAHADNAQ

Buuggan waxaa iga soo gaaray dhibo badan oo aan la soo koobi karin. Aruurintiisuna waxay igu qaadatay sanooyin badan oo aan ula kaashaday wixii buugag ahaa oo ay Af Soomaaliga ka qoreen qorayaal shisheeye. Inkastoo aan isku dayey inaan wax ka qabto arrimaha u waaweyn dhismaha Afkeenna hooyo, haddana hawsha Naxwaha Af Soomaalig weli fari kama qodna oo way dihin tahay.

Si kastaba ha ahaatee, waxaan filayaa in wax weyn laga faa'iideysto buuggan. Waxaan mahad u naqayaa intii igu kaalisay buuggan, siiba madaxda Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

Jaalle Shire Jaamac Axmed

## TUSMADA


| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Hadal . . . . . . . . . . . . | Bogga | 1 |
| 2. | Af Soomaaliga . . . . . . . . . . | » | 1 |
| 3. | Xuruufta . . . . . . . . . . | » | 2 |
| 4. | Dhawaaq iyo Astaamaha Afka . . . . . . | » | 3 |
| 5. | Erayada, Xubnaha iyo Xuruufa . . . . . | » | 3 |
| 6. | Kala qaybiska xubnaha . . . . . . . | » | 4 |
| 7. | Shaqallada . . . . . . . . . . . | » | 4 |
| 8. | Magac . . . . . . . . . . . . | » | 4-6 |
| 9. | Magac Dheddig, Magac Lab . . . . . . | » | 6-8 |
| 10. | Kooxaha Af Soomaaliga . . . . . . . | » | 8-14 |
| 11. | Ku Celis . . . . . . . . . . . . | » | 14-15 |
| 12. | Magacyada Afafka Shisheeyaha . . . . . | » | 15-16 |
| 13. | Magac Kadin ah (kadinley) . . . . . . | | |
| 14. | Qaybaha Magacyada . . . . . . . . | » | 17-18 |
| 15. | Jaangooyo Xaaladley . . . . . . . . | » | 19-20 |
| 16. | Caynta Magacyada iyo Jaangooyo Xaaladleyda Habayntooda . . . . . . | » | 21-22 |
| 17. | Tilmaamayaasha Af Soomaaliga . . . . . | » | 22-24 |
| 18. | Magacuyaallada . . . . . . . . . | » | 24-25 |
| 19. | Managaadeyaalka . . . . . . . . | » | 26 |
| 20. | Nagaadeyaalka . . . . . . . . . . | » | 26-27 |
| 21. | Salka iyo Laanta Falidda . . . . . . . | » | 28 |
| 22. | Falidda iyo Qaybahooda . . . . . . . | » | 28 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 23. | Gooraynta Falidaha . . . . . . . . | » | 29 |
| 24. | Joogto Dareerto . . . . . . . . | » | 29 |
| 25. | Astaanta Joogto Dareerto . . . . . . | » | 30-32 |
| 26. | Astaanta Diiddooleyda oo Joogto Dareerto . . | » | 32 |
| 27. | Astaanta Weyddiinleyda iyo Sugidleyda . . | » | 32-33 |
| 28. | Astaanta Diiddo Weyddiinleyda oo Joogto Dareerto . . . . . . . . | » | 33 |
| 29. | Ku Celis . . . . . . . . . . | » | 33-35 |
| 30. | Lihiga Af Soomaaliga . . . . . . . . | » | 36-37 |
| 31. | Gadaalraaceyaalka Lihiga ee Magacuyaallada oo tixo ku jira . . . . . . . . | » | 37-38 |
| 32. | Joogto taagan . . . . . . . . . | » | 39-43 |
| 33. | Joogto taagan iyo Falidaha Qaabmaqabeyaalka . | » | 44-45 |
| 34. | Joogto taagan iyo Habka Falidaheeda . . . | » | 45-47 |
| 35. | Joogto taagan iyo hawsheeda . . . . . . | » | 47-49 |
| 36. | Sifaynta . . . . . . . . . . . | » | 50-53 |
| 37. | Labanlaabidda Erayada Sifaynta . . . . . | » | 53-56 |
| 38. | Erayada Weyddiinleyda . . . . . . . | » | 56-60 |
| 39. | Ku Celis . . . . . . . . . . . | » | 60-65 |
| 40. | Tagto . . . . . . . . . . . | » | 66 |
| 41. | Astaamaha Tagtada . . . . . . . . | » | 66 |
| 42. | Tagto iyo Qaybaheeda . . . . . . . | » | 66-69 |
| 43. | Tagto iyo Hawlaheeda . . . . . . . . | » | 69-71 |
| 44. | Tagto Dareerto . . . . . . . . . | » | 71 |
| 45. | Tagto Dareerto iyo Hawlaheeda . . . . . | » | 72-73 |
| 46. | Jimaynta . . . . . . . . . . | » | 74-75 |
| 47. | Xiriiriyeyaalka . . . . . . . . . | » | 75-79 |
| 48. | Timaaddo Dhowey (Timaaddo Dhowidley) . . | » | 79-80 |

49. Timaaddo Fogey (Timaaddo Fogidley) . . . » 80-83
50. Timaaddo Fogey iyo Hawlaheeda . . . . . » 83-85
51. F a l e . . . . . . . . . . . » 86-87
52. La-Fale . . . . . . . . . . . » 87
53. Falaha Qofmaqabaha (La, Loo) . . . . . » 88
54. Qaab Ereyeedka Af Soomaaliga . . . . . » 88
55. Dhismaha Tixaha . . . . . . . . » 89-91
56. La Falaha Qofqabeyaalka . . . . . . . » 92-94
57. Jago Horjoogeyaasha Af Soomaaliga . . . » 95-97
58. Qofmaqabaha Qudhaalaha (is) . . . . . » 98
59. Ku dhufashada Erayada . . . . . . . » 98-99
60. Qofmaqabaha (La, Loo) iyo Hawlahooda . . » 99-101
61. Ku Celis . . . . . . . . . . . » 102-104
62. Shardiley iyo Xiriiriyeyaalkeeda . . . . . » 107-112
63. Falkaab . . . . . . . . . . . » 113-117
64. Abuuridda Magacyada Cuscusub . . . . » 117-118
65. Ku dhufashada Falidda . . . . . . . » 119-120
66. Labanlaabka Falidda . . . . . . . . » 120-121
67. Tirada aan qaabka lahayn . . . . . . . » 122-123
68. Magacuyaallada Af Soomaaliga . . . . . » 124-127
69. Gadaalraacyada Magacyada Af Soomaaliga . . » 128-130
70. Shaqallada (,O A) oo orda . . . . . . » 131-132
71. Sugeyaalka (waa, baa, ayaa, yaa) . . . . . » 132
72. Farriinley . . . . . . . . . . . » 132-136
73. Xisleyda . . . . . . . . . . . » 137-141
74. Hadal toos ah iyo hadal maldahan . . . . . » 141-142
75. Joogto Dareerto iyo tagto goyso . . . . » 142-143

76. Ku Celis . . . . . . . . . . . » 144-146
77. Kala dhigidda . . . . . . . . . . » 147
78. Labaynta iyo dheddigaynta magacyada magaalooyinka, tuulooyinka, xaafadaha, degmooyinka, iyo gobollada . . . . . . . . . . » 147-149
79. Salaynta magacyada . . . . . . . . . . » 149-152
80. Magacyada Falidaysan . . . . . . . . » 152-154
81. Murtida iyo Bibliyograafiga Af Soomaaliga alaabtiisa buugageed . . . . . . . . » 155-156

QAYBTA I.

# H A D A L

Hadal waxaa la yiraahdaa, wixii aad markii dhegtaadu maqasho, ay garato; amaba ay dareento. Hadal, afka ayuu ka soo baxaa, dhegtuna way maqashaa. Hadalku xubno ayuu leeyahay. Waa sida dadka oo kale, ama sida makiinadda. Xubnuhu sida ay isugu xirxirran yihiin, amaba sida ay hawsha u wada qabanayaan waa inaan fiirinnaa, ee ma aha sida macnuhu yahay oo keliya. Haddaan iraahdo; «Anigu, waan dhaliin yarahay». Hadalkaas waxaa xira ama fura, erayga la yiraahdo «aniga». Maxaa yeelay, haddaan meesha ka bixinno (aniga) erayga la yiraahdo, hadalkii oo dhammi wuu baddelmayaa. Sidaas daraaddeed, waxaan ogaannay, eraygaasi, inuu yahay furihii ama xirihii hadalka. Haddaad isaga meesha ka bixisid, hadalkii oo dhammi kuu furfuranayaa macno laga kororsanayaana ma jiraan. **Sidaas daraaddeed, maantada aannu joogno, dhisayaalka Naxwuhu ma fiiriyaan hadalku sida uu isu wada haysto,** ama sida uu isugu rakiban yahay hadal kasta. Middaas iyada ah, waxaa lagu magacaabaa, **«Makaanikada hadalka».**

## AF SOOMAALIGA

Inta lagu qiyaaso, Af Soomaaliga, waxaa ku hadla 4-5 malyuun oo qof. Dadka Soomaalida ahi, dhammaantood, waxay ku hadlaan Af Soomaali. Af Soomaaligu wuxuu leeyahay murti weyn oo qiimo dunida oo dhan ku leh, inkastoo uunan hadda ka hor dhignayn. Gumeysigu, wuxuu ku dadaalay, inaan sina Af Soomaaligu marna ku dhigmin. Dhibaatooyin badan ayuu Gumeysigu hor dhigay sidii uunan dadka Soomaalidu marna kaga gaarin horukac iyo xornimo, dhinaca aqoonta iyo dhaqanka. **Dadka Soomaalida ah waxaa laga qabsaday dhinaca fekarka iyo hindisaha. Taasina, waa gumeysiga maskxda iyo aqoonta. Gobonnimo ma jirteen haddaan aqooni jirin, aqoonina ma jirteen haddaan af la lahayn, dadnimana ma jirteen haddii aan dhaqan jirin.** Afka Soomaaligu Bahnimo wuxuu ku raacaa afafka kale oon weli dhignayn. Afafkaasi, waa afafka Qoromaha (Galla), Denkeliga iyo Siidaamaha iyo kuwo kale. Intaas oo afaf ah, waxaa lagu magacaabaa **«Bahda Kuushiitigga».** Murtidu way ku weyn tahay Bahda Kuushiitigga: Qoromaha, Denkeliga iyo Siidaamaha iwm.

Dhibaatada ina hor taagan, waxaan keliya oo aynnu kaga bixi karnaa waxa weeye inaynu Afkeenna xoojinnaa, sidii Reer-Guraaga, Beeraleyda, Shaqaalaha iyo dadkoo idili wax lagu bari lahaa. Aqoon-xumada iyo jaahilnimada, afka Soomaaliga oo keliya ayaa wax looga qaban karaa. Taas keliya ma ahee, isaga ayaan dawladnimo run ah ku dhisan karnaa; aqoon kacaan lehna, ku abuuran karnaa, Farta iyo furaheeda in la barto, waa lagama maarmaan.

(Qoraha)

## XURUUFTA

Wax waliba waxay leeyihiin fure. Furaha fartu, waa hikaadda farta. Sidii dadku si degdeg ah, wax ugu baran lahaa waxay u baahan tahay, in dadku wax akhriska iyo qoridda si wanaagsan u barto.

| Xarafka | Erayga |
|---|---|
| A | Waa ariga, waa aniga, waa askar |
| AA | Waa aalo, waa aabbe, waa aas |
| B-baa | Waa bir, waa bal, waa bad |
| D-daa | Waa duub, waa dab, waa dad |
| DH-dhaa | Waa dhir, waa dhul, waa dhal |
| E-ee | Waa edeb, waa ebyan, waa ehel |
| EE- | Waa eel, waa eedid, waa eebo |
| F-faa | Waa faras, waa fal, waa fallaar |
| G-gaa | Waa guddi, waa gal, waa guri |
| H-haa | Waa hooyo, waa hal, waa hadal |
| X-aa | Waa xas, waa xil, waa xishood |
| I-i | Waa il, waa ibo, waa idil |
| II-ii | Waa ciin, waa ciir, waa siin |
| J-jaa | Waa jiis, waa jid, waa jaad |
| KH-khaa | Waa khamro, waa khad, waa khayr |
| K-kaa | Waa kab, waa kulayl, waa koob |
| L-laa | Waa laan, waa luqun, waa labo |
| M-maa | Waa maro, waa miis, waa maal |
| N-naa | Waa nabar, waa nal, waa naag |
| O-oo | Waa olol, waa omos, waa orod |
| OO-oo | Waa oon, waa ood, waa xoolo |
| Q-qaa | Waa qab, waa quud, waa qool |
| R-raa | Waa run, waa rabi, waa raxan |
| S-saa | Waa san, waa sun, waa sin |

| | |
|---|---|
| SH-shaa | Waa shan, waa shar, waa shib |
| T-taa | tin, waa tog, waa takar |
| U-uu | Waa ul, waa ur, waa udug |
| UU-uu | Waa uun, waa uus, waa suun |
| W-waa | Waa wan, waa war, waa waxar |
| Y-yaa | Waa yar, waa yaxaas, waa yey |
| C-caa | Waa caro, waa culay, waa can. |

Ogeysiin:

Shaqallada, waa in dadku dhawaaqooda si wanaagsan u bartaa. Macallinku waa inuu u kala saaraa ardada dhawaaqay ku kala geddisan yihiin shaqallada gaagaaban iyo kuwa dhaadheeri!

## DHAWAAAQ IYO ASTAAMO AFKA

Barashada Af Soomaaliga iyo xeerkiisu, waxay leeyhiin dhawaaqyo iyo astaamo ku saabsan isaga. Dhawaaqa, waxaa lagu aqoonsadaa summado. Barashada Afkana waxaa la yiraahdaa amaba lagu magacaabaa **fonooloojiya**; barashada summaddana waxaa lagu magacaaba qoraalka (ortografiyada).

## ERAYADA, XUBNAHA IYO XURUUFTA

Haddii aan hadlaynno, ama aan wax qoraynno, innagu, waxaannu ku isticmaalnaa tixo. **Tixdu waxay ka abuurantaa erayo laysu wada geeyey. Erayuhu waxay ka abuurmaan xubnaha, xubnuhuna waxay ka koobmaan xarfo.** Bal aan soo qaadanno tix sahlan oo faallaynno, «hal-kaan seexo». Tixdaani, waxay ka abuurantaa laba eray. Eray walbana, wuxuu leeyahay macno. Sidaas oo kale, ayaa waxaa loo heli karaa, amaba loo abuuri karaa tixoyaal kale.

«Seexo halkaan», haddaan qaybinno, waxaannu ogaanaynaa inay u qaybsamayso xubno. **See-xo hal-kaan.** Erayga la yiraahdo **seexo,** wuxuu u qaybsamaa laba xibin. Sidoo kale erayga la yiraahdo **hal-kaan** isna, wuxuu u qaybsamaa laba xubin. **«Sheekooyinka akhri».** Tixdaasna, waxaan u kala qaybin karnaa xubno. Shee-koo-yin-ka, waa afar xubnood. Akh-ri, waa laba xubnood. Kala barashada xubnaha erayadu waxay kuu sahashaa intuu eraygu xubin yahay, hikaadduna ka bilaabataa.

## KALA QAYBISKA XUBNAHA

Waxaan aragnay sidii erayga, loogu qaybin karo xubno. Taasina waa hal xubinle, laba xubinle, saddex xubinle afar xubinle, shan xubinle iyo intii tiradu kaga dhammaato, hadba, sidii uu eraygu yahay xubnuhu waxay ka abuurmaan shibbaneyaal iyo shaqallo laysku daray.

**Shibbanayaasha Af Soomaaliga:**

b, t, j, x, kh, d, r, sh, s, dh, c, g, q, k, l, m, n, w, h, y,dhammaantood waa 21 Shibbane.

## SHAQALLADA

| **Dhawaaq gaaban** | **Dhawaaq dheer.** |
| --- | --- |
| a, i, e, o, u, | aa, ii, ee, oo, uu, |

Markii laysku daro hal xubin iyo labo shaqaallo waxaa ka soo baxa hal xubinle, sida **shan - nin - gub - mas - miis - wan - yar - wiil - geed - laan - cun.** Laba xubinleyaalkuna waa: **gabar, walaal, asxaan, geelal, guri, arday, hiiyo.** Saddex xubinleyaalkuna waa: **askari, geeljire, beeraley, makiinad, xafiiska.**

## M A G A C

Magac, waxaa la yiraahdaa wixii wax lagu magacaabo, amaba wax loo yaqaan.

**Warsame**, wuxuu u dhoofay **Berbera.**
**Libaaxii**, wuxuu dilay **hal.**
**Shinbirtii**, waxay ka duushay **geedkii.**
**Qalinka miiska** saar.
**Yaanbada beerta** ku fal.
**Cirku**, wuu hillaacayaa.
**Anigu, shaah** iyo **kafee, waxaan** ka soo cabbay baarka.
**Dayuuraddii**, shalay, **waxay** ka duushay **Hargeysa.**

Magacu wuxuu u kala baxaa labo waxyaalood:

1. Magac gaar (magac wax u gooni ah).

2. Magac guud (magac la wada wadaago).

Magaca, wax u gooni ahi waa magac aan laysla wadaagin, ee wax u gooni ah. Waxaa ka mid ah:

**Guleed, wuxuu** deggan yahay **Soomaaliya.**
Afgooye, waa beled wanaagsan.
**Habboon,** waxay aadday **Marka.**
**Seylac,** waa magaalo duqowday.
**Webi Shabeelle,** wuxuu ka soo dhashaa buuraha **Iimay.**
**London,** waa xarunta dalka **Ingriiska.**
**Ashkir,** wuxuu ka yimid shalay **Jabuuti.**
**Cabdi,** wuxuu la joogaa aabihiis.

Magaca la wada wadaago, waa magac aan waxna u gaar ahayn:

**Nin** weyn, ayaa yimid **xalay.**
**Buug cusub,** ayay Xaliimo soo gadatay.
**Jid dheer,** baan qaaday.
**Miis korki,** ayuu fuulay **wiilkii.**
**Kalluun** baan ku cashaynnay **xalay.**
**Ceel,** baa **arigii** ka cabbay.
**Makaaniggu,** wuxuu sameeyaa **biraha.**

Magacu haddana wuxuu u kala baxaa laba waxyaalood:

1. **Magac keli** (Magac midaysan).

2. **Magac koox** (Magac kooxaysan).

Magac keli, waa magac qur ah. Wixii ka badan laba waxyaalood, waxaa la yiraahdaa magac koox.

| Magac (keli) | **Magac koox.** |
|---|---|
| **Ey** baa ciyay. | **Eyo** baa ciday. |
| **Faras** ayaa orday. | **Fardo** ayaa orday. |
| **Wiil** ayaan leeyahay. | **Wiilal** ayaan leeyahay. |
| Magac (keli). | Magac koox. |
| **Naag dheer,** ayaan shalay arkay. | **Naago dhaadheer,** ayaan shalay arkay. |

| | |
|---|---|
| **Geedku** wuxuu leeyahay laan. | **Geeduhu**, waxay leeyihiin laamo. |
| **Anigu**, waxaan leeyahay dameer. | **Annaku**, waxaannu leeyahay dameerro. |
| **Kab**, ayuu **wiilkii** soo toshay. | **Kabo**, ayay **wiilashii** soo tosheen. |
| **Ardaygii**, **dugsigii** soo toshay. | **Ardaydii**, **waxay** aadday dugsiyadii. |

## MAGAC DHEDDIG, MAGAC LAB

Af Soomaaliga magacu haddana wuxuu u kala baxaa labo jaad: magac dheddig iyo magac lab.

**Magac Dheddig:**

1. **Caasho** way toostay.
2. **Geelo** waxay akhriyaysaa buug.
3. **Cambaro** waxay keenaysaa shaah.
4. **Hargeysa** way qabowdahay.
5. **Baydhabo** waxay leedahay beero.
6. **Ashkiro** way qurux badan tahay.

Magaca dheddigga ahi, wuxuu leeyahay astaan u gaar ah oo loo yaqaan.

1. Gadaal Raacaha (-o) **Magaca dheddig ee wax u gaar ah.**

Gadaal Raacaha (-o) magaca dheddig ee wax u gaar ah, wuxuu gadaal dhammaadka ka raacaa magaca dheddigga ah.

Waxaa ka mid ah: **Caash-o**, **Geel-o**, **Nuur-o**, Ashkir-o, **Xaliim-o**, **Faadum-o**. Hase yeeshee, markii Af Soomaaligu uu magacyo badan ka amaahday afka Carabiga, xeerkii dhismaha Af Soomaaligu wuu jabay. Magacyada dheddig ee wax u gaar ah, ee laga soo amaahday afka Carabiga qaar way oggolaan waayeen xeerkii u degganaa dhismaha Af Soomaaliga. Magacyada dheddig ee wax u gooni ah way badan yihiin, waxaana ka mid ah:

**Luul**, **Jawaahir**, Qamar, **Shamsa**, **Khadar** iyo kuwo kale oo badan.

**War-san, Hod-an, Eby-an, Bax-san, Cabb-an, Shaql-an** iyo kuwa **Cadaal Raacaha** magaca dheddig (-an) (-san) magacyada dheddig, wuxuu ka galaa gadaal. Waxaa ka mid ah:

**War-san, Hod-an, Eby-an, Bax-san, Cabb-an, Shaql-an** iyo kuwa kale oo badan.

**Gadaal Raacaha magaca dheddig** (-to) **ee wax u gaar ah.**

Magacani aad iyo aad ayuu ugu yar yahay Af Soomaaliga, waana magacyada cusub ee hadda ku abuurmaya Af Soomaaliga, inkastoo uu oggol yahay xeerkii dhismaha Af Soomaaliga.

Waxaa ka mid ah: **Nuur-to Khayr-to, Shoob-to** iyo kuwa kale oo aad ugu yar Af Soomaaliga. Waxaa iyana jira, magacyo kale oo dheddig ee wax u gaar ah, oo aan qaab loo raaco lahayn.

Waxaa ka mid ah: **Cadar, Asli, Ubax, Weris, Cosob** iyo kuwo kale oo badan.

**Gadaal Raacaha magaca dheddig** (-là) **ee wax u gaar ah.**

**Gadaal Raacaha:** magaca dheddig (-la) ee wax u gaar ah.
Waxaa ka mid ah: **Ceeb-la, Cawra-la, Hagar-la, Calaw-la,** iyo kuwa kale oo ku yar Af Soomaaliga.

**Magac Lab.**

— **Ceelle** wuu orday.
— **Abshir** wuxuu u dhoofay Gaalkacyo.
— **Kaahiye** waa wiil fahmo badan.
— **Cali** wuxuu ka shaqeeyaa xafiiska wargeyska.
— **Nuur** wuxuu wadaa baabuur.
— **Samatar** waa nin dul xun.

Sida magaca dheddig oo kale, magaca labi oo gaarka ahi oo keliga ah wuxuu leeyahay astaamo loo yaqaan. Hase yeeshee, magacyada gaarka ah oo keliga ah dhammaantood ma wada laha astaamo la wada yaqaan, siiba kuwa amaahda nooga yimid Afka Carabiga, sida, Maxamed, Axmed, Cabdi Iwm.

## 2. Gadaal Raacyada Magaca lab ee wax u gaar ah.

Afka Soomaaligu wuxuu leeyahay gadaal raacyo lab ee magaca wax u gaar ah ku jira. Magacyada lab oo wax u gaar ahi ee salka ku haya xeerkii dhismaha Af Soomaaliga, way ku yar yihiin Af Soomaaliga. Taasina, waxay ku dhacday, in magacyada lab ee wax u gaar ahi, la soo amaahday, ee laga soo amaahday Af Carabiga. Middaas waxaa ugu wacan diinta Islaamka iyo aqoonta Muslinimada.

**Gadaal Raacaha magaca lab** (-ye -e) **ee wax u gaar ah.**

Gadaal Raacahaasi wuu ku badan yahay Af Soomaaliga.
Waxaa ka mid ah: **Warsam-e, Khayrr-e, Raag-e, Caynaansh-e, Sharmaark-e, Guullan-e, Barr-e, Dhawr-e, Quman-e, Shir-e, Kullan-e,** Faahihi-ye, iyo kuwa kale oo badan.

**Gadaal Raacaha magaca lab** (-le) **ee wax u gaar ah:**

Gadaal Raacaha (-le) wuu ku badan yahay magacyada lab ee wax u gaar ah Af Soomaaliga. Waxaa ka mid ah: **Geel-le, Shoob-le, Guutaa-le, Diin-le, Deeb-le, Huur-le,** iyo kuwa kale oo badan.

Waxaa ku jira Af Soomaaliga, magacyo badan oo laga soo amaahday Af Carabiga, ee aan oggolayn xeerkii dhismaha Af Soomaaliga. Waxaa ka mid ah: **Cabdi, Nuur, Cabdullaahi, Cabdiraxmaan, Cabdulqaadir, Cabdirisaaq, Cabdulkariim, Cabdulfataax, Xasan, Xuseen, Daahir, Khaliif, Jaamac, Axmed, Maxamuud, Maxamad, Xaamud** iyo kuwa kale oo aad iyo aad ugu badan Af Soomaaliga. Magacyada amaahda ahi, waxay u badan yihiin ragga. Haweenka uma badna, magacyada amaahda ahi sida ragga. Afka Soomaaliga, haddana, waxaa ku jira magacyo lab oo aan lahayn qaab dhismood oo loo raaco. Kuwaas waxaa ka mid ah: **Qawdhan, Liibaan, Qamaan, Bulxan, Guhaad, Cahayr,** Gooni iyo kuwa kale oo badan.

## KOOXAHA AF SOOMAALIGA

Sida Afafka qaarkood, Af Soomaaligu wuxuu leeyahay kooxo badan kooxaha tiradoodu: waa toddoba. Magac kasta oo ku dhammaada gadaal raacyada halkaan ka imanaya wuxuu noqonayaa koox- [illegible] Af Soomaaliga waxay ku tahay lab iyo dheddig laba-

daba. Kooxda dheddigga ama labka u go'ani kuma jirto Af Soomaaliga murtida leh.

Waayahan danbe, waxaa dhacday inay Af Soomaaliga soo gashay kooxo jajaban. Taasi waxay ka soo gashay Af Carabiga. Kooxahaas waxaa ka mid ah: Macallin (keli) Macallimiin (koox) Muslin (keli) Muslimiin (koox) Buug (keli) Bawaag (koox) Shiikh (keli) Mashaa'ikh (koox)) Shariif (keli) Ashraaf (koox) Munaafaq (keli) Munaafiqiin (koox) Namiim (keli) Namiimiin (koox) Wakiil (keli) Wakiillo (koox) Naaib (keli) Naaibiin (koox) tawri (keli) tawriyiin (koox) Mushtar (keli) Mushtariin (koox) Khaddiib (keli) Khaddiibiin (koox) Mufti (keli) Muftiyiin (koox) Xaaji (keli) xujey (koox) Weli (keli) Awliyiin (koox). Intaas iyo boqollaal eray, ayaa Af Carabiga ka soo gashay Af Soomaaliga. Erayadaasi waxay oggolaan waayeen xeerka dhismaha Af Soomaaliga, sidaas daraaddeed, waxay ku hareen Af Carabiga. Qof walba oo Soomaali ahi, wuu yaqaanna iyaga, hase yeeshee muu yaqaan inay Af Carabi inooga yimaadeen. Gadaal Raacaha (-iin) oo koox ahi, waa mid ku siyaado ah xeerka dhismaha Af Soomaaliga.

Sidaas darraaddeed, qofka Soomaaliga ahi, wuxuu kala kulmaa dhib weyn, markii uu iyaga kooxaynayo.

## 2. Gadaal Raacaha ee Kooxaha Magacyada (-yo-).

| **Keli** | **Koox** |
|---|---|
| **Qori** i sii. | **Qoryo** i sii. |
| **Kursi** qaado. | **Kursiyo** qaado. |
| **Guri** dhiso. | **Guryo** dhiso. |
| **Ubax** u gad gabadha. | **Ubaxyo** u gad gabadha. |
| **Dibi** qalo. | **Dibiyo** qalo. |
| **Yaxaas** weligaa ma aragtay? | **Yaxaasyo** weligaa ma aragtay? |
| **Gabay** baro. | **Gabayo** baro. |
| **Meeris** dhigo. | **Meerisyo** dhigo. |
| Wuxuu i siiyay **toorrey**. | Wuxuu i siiyay **toorreeyo**. |
| **Digsi** baan wax ku karsaday. | **Digsiyo** baan wax ku karsaday. |

Gadaal Raacaha kooxeed (-yo) wuxuu magaca ka galaa dhexda iyo gadaal, wuxuuna qaataa qodobka (-da, -ha).

## 2. Gadaal Raacaha ee Kooxaha Magacyada (-yaal-).

| Keli | Koox |
|---|---|
| **Oday** baan maanta arkay. | Odayaal baan maanta arkay. |
| Ardaygu waa **geesi.** | Ardaydu waa geesiyaal. |
| Isagu wuxuu ku dabaashay balli. | Iyagu waxay ku dabaasheen balli-yaal. |
| Asli, waxay iibsatay **girgire.** | Asli, waxay iibsatay girgireyaal. |
| Anigu waxaan qaaday dhabbe. | Anigu, waxaan qaaday dhabbeyaal. |
| Isagu wuxuu iibsaday shaati. | Isagu wuxuu iibsaday shaatiyaal. |
| Ugaartuhu wuxuu dilay waraabe. | Ugaartuhu, wuxuu dilay waraabe-yaal. |
| Iyadu waxay heshay buste. | Iyadu, waxay heshay busteyaal. |
| Gabadhu waxay ka hadashay gole. | Gabadhu waxay ka hadashay gole-**yaal.** |

**Ogeysiis:**

Magacyada qaata gadaal raacaha kooxda (-yaal), way ku badan yihiin Af Soomaaliga, waxayna badnida ku raacaan magacyada qaata gadaal raacaha kooxda kooxdeeda (-yow).

Gadaal raacaha kooxda kooxdeeda: waxaa aalaaba, raaca erayga yool gaaridda, muunaynta (badan). Waxaa ka mid ah: **gabadhu waxay ka hadashay goleyow.** Tixdaas waxaa loo geyn karaa erayga yool gaaridda **«badan» «gabadhu waxay ka hadashay goleyow badan».**

Qodobka kooxdani qaadato waa (-ga), qodobkase kooxda gadaal raacaha (-yaal-) waa (-ka) labka, dheddiggana (-sha).

## 3. Gadaal Raacaha ee Magacyada Kooxaha ah (-oyin-).

Magacyada qaata gadaal raacaha magacyada kooxda (-oyin), waxay ku badan yihiin Af Soomaaliga. Gadaal raacaha magacyada kooxda (-oyin) waxaa raaca qodobka ah (-ka). Waxaa ka mid ah: **«Dadku wuxuu ku dhaqmaa magaalooyinka».**

| Keli | Koox |
|---|---|
| Waxaan deggannahay tuulo. | Waxaan deggannahay tuulooyin. |

| | |
|---|---|
| Dadku wuxuu ku dhaqmaa magaalo. | Dadku wuxuu ku dhaqmaa magaalooyin. |
| Hodan waxay jeceshahay heello. | Hodan waxay jeceshahay heellooyin. |
| Qaanso fiican iga gado. | Qaansooyin fiicfiican iga gado. |
| Ayeeyaday waxay ii sheegtay Sheeko. | Ayeeyaday waxay ii sheegtay sheekooyin. |
| Wuxuu cayriyay dawaco. | Wuxuu cariyay dawocooyin. |
| Yaanyuurtu, waa quruxsan tahay. | Yaanyuurooyinku way qurqurxan yihiin. |
| Baqalyo ayaa geed ka duushay. | Baqalyooyin ayaa geed ka **duulay.** |
| Shanlada wiilka sii. | Shalooyinka wiilasha sii. |
| Waaxaan soo maray qabiil meel deggan. | Waxaan soo maray qabiilooyin meel deggan. |

4. **Gadaal Raacaha ee Magacyada Kooxaha** (-an)-).

Gadaal Raacaha magacayada kooxda (-an-) Afka Soomaaliga aad iyo aad ayuu ugu yar yahay. Gadaal raacahani wuxuu u dhow yahay, inuu ka dhintay af Soomaaliga. Afka Soomaaliga waxaa laga helaa erayo tirsan, ee qaata gadaal raacaha magacyada kooxda (-an-). Maantada la joogo dadku aalaaba kuma dhaqmo gadaal raacaha kooxda (-an-), inkastoo dadka ku hadla afka murtida leh, uu weli ku hadlo.

| **Keli** | **Koox** |
|---|---|
| Guriga **dhagax** ku dhis. | Guriga dhagx**an** ku dhis. |
| Ugax iga iibi. | Ugx**an** iga iibi. |

Haddana waxaa suurtowda, in la yiraahdo «guriga dhagaxyo ku dhis». Qodobka raaca gadaal raacaha magacyada kooxda waa (-ta), sida **(dhagxan-ta) (Ugxan-ta).**

5. **Gadaal Raacaha ee Magacyada Kooxaha** (-o-).

Gadaal raacaha magacyada kooxda (-o-) way ku badan yihiin Af Soomaaliga. Gadaal raacahaas waxaa raaca labo qodbood (-da) ama (-ha). Qodobka (-da) waa atsaan dheddigeed, astaanta (-ha)na waa midda kooxda magacyada lab. Afka Soomaaliga, waxaa lagu yaqaannaa inay kooxdu noqoto dheddig iyo lab labadaba, magacii keli ku ah dheddig, kooxda wuxuu ku noqdaa lab. Sida **fallaarta** (keli dheddig) **fallaaraha** (kooxda) lab. Waxaase jira, magac keli ku

ah lab, inuu ku haro labnimadiisa kooxda. Sida Laabka (keli) (lab) Laababka (kooxda) (lab).

| Keli | Koox |
|---|---|
| Caasha waxay aragtay **xiddig.** | Caasha waxay aragtay **xiddigo.** |
| Shalay Cumar wuxuu gatay **aqal.** | Shalay Cumar wuxuu gatay **aqallo.** |
| Anigu fallaaar ganay. | Anigu **fallaaro** ayaan ganay. |
| **Qalin** wanaagsan soo gado. | **Qalimmo** wanwanaagsan soo gado. |
| **Daruur** baa ku da'day Beled Weyne | **Daruuro** baa ku da'ay Beled Weyne |
| Waxaan soo maray **dameer** biyo sida. | Waxaan soo maray **dameero** biyo sida. |
| Shalay **Shabeel** ayaa ri cunay. | Shalay **Shabeello** ayaa cunay ri. |
| Arigii **il-biya** ah ayuu ka cabbay. | Arigii wuxuu ka cabbay **ilo-biya** ah. |
| **Ul** toosan buu wataa inanku. | **Ulo** toostoosan buu wataa inanku. |

6. **Gadaal Raacyada Magacyada ee Kooxaha Labanlaabma.**

(-ab, -ad, -al, -ar, -as, -ag, -aq, -af Gadaal raacyada magcyada ee kooxda labanlaabanta waxay ka abuurmaan xarfaha magaca u danbeeya. Magacyada ku dhammaada shibbaneyaasha halkaan ka iman doona, (-b, -d, -l, -r, -g, -s, -q, -f) ayaa loo geeyaa gadaal raacyadaas sida **dab**—**ab**, **jid**—**ad**, nal+al, war—ar, buug—ag, **af**+fa, **miis**+**as**, **diiq**+**aq**.

Qodobka gadaal ka raaca magacyadaas, laba magac mooyee waa (-ka), sida dababk**a**, jidk**a**, nalalk**a**, wararka afafka miisaska. Labada magac oo kale waxay qaataan qodbaha (-a, iyo -ga) sida buugag**ga**, suuqaqa.

| Keli | Koox |
|---|---|
| **Dab** i sii. | **Dabab** i sii. |
| Isagu wuu **qab** weyn yahay. | Iyagu way qabab waaweyn yihiin. |
| **Raad** libaax baan arkay. | **Raadad** libaax baan arkay. |
| **Jid** dheer baan qaaday. | **Jidad** dhaadheer baan qaaday. |
| **Wiil** yar ayaan leeyahay. | **Wiilal** yaryar ayaan leeyahay. |
| **Nal** ayaa la shiday (daaray). | **Nalal** ayaa la shiday. |
| Baabuurku **boor** ayuu igu kiciyay. | Baabuurradu **boorar** ayay igu kiciyeen. |

| | |
|---|---|
| Gabadhu beerar ayay cuntay. | Gabadhu beer ayay cuntay. |
| Muus ayaan ku xiirtay. | Muusas ayaan ku xirannay. |
| Moos ayuu cunay. | Moosas ayuu cunay. |
| Buug ayaad akhrisatay. | Buugag ayaad akhrisateen. |
| Naag dhuug qabta ayaa timid. | Naago dhuugag qaba ayaa yimid. |
| Diiq ayaa aroortii ciyay. | Diiqaq ayaa aroortii ciyay. |
| Hooyaday suuqa ayay ka timid. | Hooyooyinkeen suuqaq ayey ka ymaadeen. |
| Isagu wuxuu bartaa Af shisheeye. | Iyagu waxay bartaan afaf shisheeye. |
| Ninku wuxuu leeyahay shaf weyn. | Nimanku waxay leeyihiin shafaf waaweyn. |

7. **Gadaal Raacaha Magacyada Kooxda Kooxdeeda** (-ow-yow).

Kooxda la sii kooxiyey waxay ka abuurantaa magac kadin ah. Sidaas daraaddeed, kooxda kooxdeedu ka mid tahay kooxaha Af Soomaaliga. Gadaal raacaha kooxda kooxdeeda, waxaa raaca qodobka (-ga); sida geelalyowga, geedoyowga, dhulalyowga.

| Kooxda | Kooxda Kooxdeeda |
|---|---|
| Geelal badan baan leennahay. | Geelalyow baan leennahay. |
| Naago ayaa yimid. | Naagayow ayaa yimid. |
| Roobkii wuxuu dumiyey guryo. | Roobkii wuxuu dumiyey guryoyow. |
| Roobab baa da'ay. | Roobabbow ayaa da'ay. |
| Cido badan ayaa guuray. | Cidoyow badan (badbadan) ayaa guuray. |
| Dhulal badan ayuu soo maray. | Dhulalyow badan ayuu soo maray. |
| Wiilku wuxuu raacay ari. | Wiilku wuxuu raacay ariyow. |
| Wax degmo ah ma aragtay? | Wax dagmayow ah ma aragtay? |
| Geedo badan baan dhex jiiray. | Geedayow badan baan dhex jiiray. |
| Ido badan baan ku siiyay. | Idayow badan baan ku siiyay. |

Af Soomaaligu wuxuu leeyahay magacyo aan qaab lahayn. Sida keliya oo lagu barta waxa weeye, inaad sidooda isaga qaybtaa. Inkastaba haddana waxaa jira magacyo sabab dhawaaqeed ku baddelmaya. Magacyadaasi waa: nin (keli) niman (koox) wan (keli) wanan (koox) san (keli) sanan (koox) haan keli) haamo (koox) laan (keli) laamo (koox) inan (keli dh.) inamo (koox dh.) inan (keli l.) inamada (koox l.) Waxaa iyana jira magacyo kale oo iyana aan qaab loo raaco lahayn,

in sidooda laysaga barto mooyee. Kuwaas waxa ka mid ah: faras (keli l.) fardo (koox l.) haweeney (keli dh.) haween (koox dh.). Qayb kale oo iyana aan qaab lahayn ayaa jirta. Waa qaybta: hablo (koox dh.) rag (koox l.) qaybtaasi waxay ka mid tahay qaybta kadinleyda ah.

## KU CELIS

**Ka jawaab weydiimahaan:**

1. Sheeg intay magacyadu u kala qaybsamaan?
2. Magaca labka ku ahi keli, markuu qaadan karo qodobka dheddigga kooxda?
3. Sheeg gadaal raacaha magacyada kooxda (-yow-) iyo meeshuu magacyada ka galo? Gadaalraacaha magacyada kooxda (-yaal-), qodobkee raacaa?
4. Maxaa saddex xubinle la yiraahdaa? Keen eray saddex xubinle ah.
5. Eray afar xubinle ah keen, mid kale oo shan xubinle ah keen.
6. Tix maxaa la yiraahdaa? Ma kala taqaannaa waxa ku kala jira dhawaaqa iyo farta? Dhawaaq maxaa la yiraahdaa, maxaase qodob la yiraahdaa?
7. Tixahaan, waxaad u baddashaa kuwo kooxo leh:

   a) Waxaan arkay shalay wiil.
   b) Gabadhu waxay ka timid Baydhaba.
   d) Ardaygu wuxuu dhigtaa meeriska.
   e) Macallinku wuxuu u soo raacaa dugsiga taksi.
   f) Anigu waxaan jeclahay bushkuleeti.
   g) Saaxiibkay Samantar wuxuu dhigtaa galaaska labaad oo dugsiga sare.

8. Tixahaan waxaad u baddashaa tixo kooxo ku jiraan.
   Wiil baa ymid.
   Yaxaas ma aragtay?
   Naag ayaa timid ristoorantiga.
   Nin baa ka qadaynaya Huteelka Shabeelle.
   Dadku wuxuu degaa magaalada.
   Shanlada wiilka sii.
   Ukunta goroyadau waxay leedahay waxtarmo weyn.

Jid toosan baan qaaday.
Nalka qawladdu wuu densan yahay.
Mas iyo abeeso ayuu dilay ninku.
Injiyeerku wuxuu dhisaa guri.
Anigu waxaan soo maray maroodi ka cabbaya war.
Beeriuhu wuxuu beerta ku falayaa taraktar.
Makaaniggu wuxuu ka shaqeeyaa warshadda.
Saaxiibkay wuxuu ka shaqeeya beeraha.
Farmashistuhu wuxuu ii qoray daawo.

**BARO TIXAHAN KUNA CELCELI INTII AAD KA BARATID.**

Geelle, lo' fadhiya ayuu raacay.
Colkii gumeysiga waa laga adkaaday.
Cid baa meel degtay.
Rag ayaa shir u fariistay.
Raxan biciid ah ayaa iga didday.
Kooshin illin-geel ah ayuu ceelka ka fuliyay.
Tiro-ariya ayay Xaliimo leedahay.
Cid-duddo ah ayay iyagu la deggan yihiin.

9. Qodobka ku habboon geli tixahaan, kaddibna, akhri.
Libaax ayaa ciyay.

Laan geed ku taalla ayuu jabsaday.
Shinbir ayaa ka duushay geedkaas weyn.
Wiilashii waxay aadeen dugsi.
Macallinku wuxuu wax ku dhigaa looxa (sabuuradda).
Fatuuraddu waxay ku jirtaa garaashka.
Xaliimo waxay ka soo gadatay buug cusub biblioteekada.
Raadiyuhu wuxuu sheegay warkii dunida.

## MAGACYADA AFAFKA SHISHEEYAHA

Afafka Shisheeyuhu, siiba afka Talyaaniga iyo kan Ingiriiska iyo Carabiga waxay soo geliyeen afka Soomaaliga erayo badan oo hodan ka dhigay. Erayadaas waxay la yimaadeen gadaal raacyo ku cusub Af Soomaaliga. Waxaa dhacday in lagu qaatay sidoodii ay ku yimaadeen. Taasi markii ay dhacday kaddib, ayaa erayadii isku qaateen gadaal raacihii Soomaaliga iyo kii shisheeyaha. Sida Elektrij**istaha,** makaan**istaha,** sooshaal**istaha,** maroor**istaha,** biolooj**istaha,** kiim**istaha,** matamaat**igga,** dat**oorka,** istaat**istaha,** agronoom**istaha,**

telegraafistaha, ministarka, biblioteekarka, makiinistaha, jeloojistaha, filosofka, falkolooristaha, fisikistaha, sayntistaha, geografistaha, jeofiikaha, fannaanka, (carabiga), muusikistaha, aktoorka, shiinimatografistaha, ekonoomistaha iyo kuwo kale oo badan, gadaal raacaha magacyada keli (-ist-) wuxuu ka mid noqday sidaas daraaddeed gadaal raacyada Af Soomaaliga, sidoo kale gadaal raacaha (tor-tar) iyo (-ar-) aktoorka, bibliyoteekaarka.

Afka Soomaaliga haddana waxaa soo galay magacyada ku tusa xiddigiska ee nooga yimid Af Carabiga iyo Talyaaniga iyo Ingiriiska, kuwa Af Carabiga ka yimid waa: Axad, Isniin, Talaada, Arbaca, Khamiis, jamce, Sabti. Kuwa Talyaaniga iyo Ingiriiska nooga yimid waa: Jannaayo, Febraayo, Maarso, Abriil, Maajo, Juunyo, Luulyo, Agoosto, Sebtembar, Oktoobar, Nofembar, Disembar.

**Gadaal raacaha keli oo shisheeyaha (dh. I.).**

Gadaal raacaha keli oo shisheeyaha oo dheddig, wuxuu inooga yimid Af Carabiga. Si weynna wuu u saameeyey Afka Soomaaliga.

| **Keli Dheddig** | **Keli Lab** |
|---|---|
| Makaanik-ad-da | Makaanigga |
| Macallimadda | Macallinka |
| Dhaktaradda | Dhaktarka |
| Injiyeeradda | Injiyeerka |
| Fannaanadda | Fannaanka |

Gadaal raacahaasi markiisii hore, wuxuu nooga yimid Af Carabiga, kaddibna waxaa Soomaalidu ugu isticmaashay erayada Afafka shisheeye nooga yimid ee aan maanta qofka Soomaaliga ah, shisheeye ka ahayn, inkastoo ay erayadaasi salkoodu ahaa shisheeye. Afkii dadku maanta ku hadlo, erayada ku jira oo shisheeyaha ahi shisheeye nagama aha.

## MAGAC KADIN AH (Kadinley ah)

Magaca kadinka ahi, waa magac isku guntan oo kooxaysan. Kooxdii isku guntani amaba isu geysani waa koox kadin ah. Kooxda kadinka ahi, tiradeeda lama yaqaan, waase koox. Sidaas daraadded, waxaa lagu magacaabay **Koox kadinley ah.**

| Koox | Koox kadinley |
|---|---|
| Maroodi ayaan arkay. | **Raxan-maroodi ah** ayaan arkay. |
| Ninku libaax ayuu dilay. | **Raxan-libaax ah** ayay nimankii dileen. |
| Ceelka waxaa ka cabbaya geel. | Ceelka waxaa ka cabbaya kadin geel ah. |
| Warsame wuxuu soo gatay ari. | Warsame wuxuu soo gatay tiro-ari ah. |
| Geelle walaalkiis wuxuu siiyay lo'. | Geelle walaalkiis wuxuu siiyay fadhi lo' ah. |
| Rag ayaa maanta shir u fariistay. | Rag guuto ah ayaa maanta shir u fariistay. |
| Wiilku (lo', ari, geel) ayuu raacay. | Wiilku (lo', ari, geel) horin ah ayuu raacay. |
| Ari ayaan maanta suuqa ka iibsaday. | Ari-xayn ah ayaan maanta suuqa ka iibsaday. |
| Aqallo ayaa maanta gubtay. | Tuulo ayaa maanta gubatay. |
| Rag baa maanta duulay. | Col (ciidan), ayaa maanta duulay. |
| Rag baa shalay yimid. | Guuto-camarrey, ayaa shalay timid. |
| Cid ayaa shalay meel degtay. | Duddo-cid ah ayaa shalay meel degtay. |

Erayda koox kadinleyda ku tustaa way ku badan yihiin Af Soomaaliga. Waxaa ka mid ah: raxan, kadin, illin, tiro, fadhi, guuto, horin xayn, ciidan, madax, tuulo, duddo, dhawr, qaar. Erayada koox kadinleyda waxaa gadaal ka raaca taageeraha falidda (ah) ee isagu muujinayo guntinta koox kadinleyda, waxaa ka mid ah: **«ari xayn ah», «ciidan lug ah», «madax col ah».**

## QODBAHA MAGACYADA

Qodbuhu magacyada waxay ka raacaan gadaal, hawsha ay iyagu magacyada ka qabtaanna waxa weeye, in ay caddeeyaan cayntiisa. Qodbaha keliya ayaa muujin kara magaca cayntiisu in ay tahay dheddig iyo lab.

**Qodbuhu markay magaca wataan:**

Qodbuhu waxay magaca ka raacaan gadaal, sida: laan**ta**, nin**ka**, illowse, niman**ka**, ra**ha**, daa**ha**, laama**ha**, qodbaha: (-ka) iyo (-ha) oo

ku jira magacyada kooxda ah, keli iyo koox midna kuma tusaane, waxa wax naga tusayaa magaca waa macnihiisa siimaantiga ah, ee ah **waxa wax naga tusayaa magaca waa macnihiisa siimaantiga ah, ee ah caynta macnaheeda. Qodobka keli ku jira, isana waa wax doodi ka furan tahay in qodobku uu muujinayo magaca cayntiisa iyo macnaha siimaantikadu uu muujinayo magaca cayntiisa.**

Inkastaba maantada la joogo, waxaa dunida caan ku ah uu yahay dhismaha Naxwaha oo caadada ku dureersaday xeerka Naxwaha reer yurub. Aniga oon taas ka tegayn, ayaan waxaan u qaybinayaa qodbaha laba qaybood. Qaybta dheddigga ah iyo qayba labka ah.

I. **Dheddig:**

(-t-, -sh-, -d-), **laanta, hasha, goroyada.**

II. **Lab:**

(-k-, -g-, -h-, iyo qodob eber ah) **ninka,** curraha, guriga, qodobka eberka ahi, waa (**suuqa, shiikha, looxa, kuraca**).

Xusuus:

Cayn Labeebshe ahi ma ku jirtaa af Soomaaliga?
Arrintaasi waa mid u baahan dood iyo baaris.
Anigase waxay ila tahay inaysan ku jirin.

## QAYBTA II.

## JAANGOOYO XAALADLEY

Jaangooyada xaaladdu waa maxay? Waa xaalad jaangooya leh. Waa magacu hadba xaaladdii uu noqonayo. Magac kasta oo tix ku jira, wuxuu qaataa xaalad. Afka Soomaaligu wuxuu leeyahay saddex jaangooyo xaaladley:

1. **Jaangooyo xaaladleyda falaha** (-ii, ninkii, ninku). Jaangooyo xaaladleyda falaha oo ku jira tixo: «Ninkii wuu tegay, ama Ninku wuu tegay».

Labada xubnoodba ninku, wuu jaango'an yahay. Waa nin aan isla ogeyn. Ninkii, ninku, waa mid aan wada naqaanno amaba aan isla ogeyn. Sidaas daraaddeed, xaaladda ninku way jaango'an tahay. Erayga (ninkii) waa looga aqoon badan yahay (ninku).

Jaangooyo xaaladleyda falaha, waxay na tustaa qofkii wax falay. Yaa tegay? Waxaa tegay ninkii aan isla ogeyn. **Jaangooyo xaaladleyda falaha, waxaa raaca faliddii uu falay faluhu.** (1)

2. **Jaangooyo xaaladleyda la falaha** (-ii, gurigii -a, guriga). Jaangooyo xaaladleyda la faluhu, waxay ku tustaa qofkii amaba wixii faliddu ku dhacday. Falidda faluhu waxay ku dhacaysaa la falaha. Wixii wax falay, waa inay wax ku faleen. Sidaas daraaddeed, faluhu wuxuu ku xiran yahay falidda, la faluhuna wuxuu ku xiran yahay falidda falaha. Af Soomaaliga falaha iyo la faluhuba waxay ka galaan tixda horey ama gadaal amaba dhexda. **Sida Ninkii wuu yimid.** Faluhu tixda wuxuu ka galay horay. Illowse, **wuu yimid ninkii.** Faluhu wuxuu tixda ka galay gadaal. «**Aniga, ninku, wuxuu igu yiri iska tag**». Tixdaan faluhu wuxuu kaga jiraa dhexda.

Jaangooyo xaaladley waa xaaladda magaca jaangoyneysa. Magac kasta oo aan jaangooyo lahayn waxa weeye magac jaangooyo ma qabto ah. Waxaa ka mid ah: «**Nin ayaa yimid**». «**Buug ayuu soo gatay**».

**«Wiil ayaa dhashay». «Dad ayaa shalay diriray».** Markii aan leennahay (nin ayaa yimid). Ma naqaanno (ninkii) yimid. (Buug ayuu soo gatay). Ma naqaanno (buuggee) buu soo gatay.

3. **Jaangooyo xaaladley.**

---

(1) Ninkii wuu tegay. Waa nin aan isla ognahay amaba aan wada niqiin mar hore, ee lagama maarmaan ma aha inaan wada ogeyn amaba aan mar hore wada niqiin, inkastoo xaaladdiisu jaan go'an tahay.

## CAYNTA MAGACYADA IYO JAANGOOYO XAALADLEYDA HABAYNTOODA

| Magaca | Caynta Qodbaha magaca | Jaangooyo Xaaladleyda magaca | Tixda |
|---|---|---|---|
| ul - | - sh - | - ii | way qalloocatay. |
| mindi - | - d - | - u | way afbeeshay. |
| cir - | - k - | - ii | wuu da'ay maanta. |
| kursi - | - g - | - u | wuu jabay. |
| xareed - | - d - | - ii | way gurtay. |
| nin - | - k - | - a | waan arkay. |
| macallin - | - k - | - ii | dersi ayuu dhigay. |
| aqal - | - k - | - a | waan soo maray. |
| goroya - | - d - | - u | ilmo ayay leedahay. |
| libaax - | —— | - ii | waan dilay. |
| suuq - | —— | - ii | waan ka imid. |
| buug - | - g - | - a | waan akhristay. |
| lacag - | - t - | - a | wuu lumiyaa. |
| dad - | - k - | - a | wuu caayaa isagu. |
| curri - | - h - | - ii | wuu iga dhintay. |
| arday - | - d - | - u | waxay ku cayaartaa kubbad. |

Magacyada aan jaangooyo xaaladley u baahnayn way ku jiraan Af Soomaaliga. Magacyadaas waxaa ka mid ah: Sonkor, hilib, cusbo, biyo, caano, abti, hooyo, aabbe, awoowe, adeer, ayeeyo, walaal, roob, daruur, subag, xalay, shalay, berri, iyo kuwa kale.

Magacyadaasi inkastoo ay qaadan karaan jaangooyo xaaladley, haddana uma baahna in la jaangooyo. Magacyada ku dhammaadaa shibbaneyaasha: (q, c, x, dh, kh, h) ma ay qaataan qodobbo ee waxay qaataan jaangooyo xaaladley (-ii, -u, -a).

**Ogeysiis:**

Jaangaayo eeaaladley, (u, ii,) waxay gashaa falaha iyo la falaha labadoodaba. Waxaa ka mid ah: Nink(ii, u,) wuu dhoofay. Shalay waxaan arkay macallink(-ii, -a). Marna ma suurtowdo, inaad

tirraahdid: **«Shalay, waxaan arkay macallinku»**. Taasi, waxay ku tahay Af Soomaaliga qalad iyo gaf aan la qaadan karin.

**Tixahaan akhri, oo jaangooyo xaaladlayda falaha, lagu falaha, ka soo saar. Qodobbada dheddigta ah iyo kuwa labkana ka soo saar.**

Laanta ii soo goo. Laan ii soo goo. Laamaha ii soo goo. Ceebla, xalay ayay ka timid Hargeysa. Naago badan, ayaa Ceebla la socday.

Shiikhii, wuxuu ka addimay masaajidka Xamar weyne. Ardadu, waxay akhrisatay joornaallo. Buugaggii cuscusbaa dadkii wuu akhristay. Isagu wuxuu u sheegay iyada hadalkii. Iyadu waxay fuushay Fatuuraddii. Isagu wuxuu u sheegay hadalkii. Iyagu way neceb yihiin agaasimaha. Gabdhihii waxay ku cayaareen Pingpong. Shinbirtu waxay ka duushay geed dhamas ah.

## TILMAAMAYAASHA AF SOOMAALIGA

Tilmaanu waa maxay? Waa wixii wax lagu tilmaamo. Qofka hadlayaa markii uu wax tilmaamayo, farta ayuu raaciyaa tilmaantiisa. Markaasuu haddana erayga tilmaanta ku hadlaa. Tilmaamayaashu waa dhowr. Iyaga wax ayaa lagu tilmaansadaa. Sidaas daraadded, waxaa lagu magacaabay **tilmaamaamayaal**. Tilmaamayaashu waxay u kala baxaan dheddig iyo lab, keli iyo koox.

| Keli lab | Keli dheddig |
|---|---|
| Kan | Tan |
| Kaas | Taas |
| Keer | Teer |
| Koo | Too |

| Koox lab | Koox dheddig |
|---|---|
| Kuwaan | Kuwaan |
| Kuwaas | Kuwaas |
| Kuweer | Kuweer |
| Kuwoo | Kuwoo |

Tilmaamayaashaan waxaa kaloo soo raaca tilmaan kale. **«Kuwakan»** Kuwakan = **Kuwaan + kan = Kuwakan.**

Tilmaamayaashu hadba, waxay gadaal ka raacaan qodobba-

da magacyada iyo jaangooyo xaaladleyda. Sidaan oo kale ayay tilmaamayaashu u hawl galaan.

| **Keli lab** | **Keli dheddig** |
|---|---|
| Guriga+aan = Gurigaan | Ulsha+aan = ushaan |
| Guriga+aas = Gurigaas | Ulsha+aas = ushaas |
| Guriga+eer = Gurigeer | Ulsha+eer = usheer |

Magacyadoo idil sidaas oo kale ayay tilmaamayaashu uga hawl galaan. Sida **sanduuqan, sanduuqaas, sanduuqeer, gabadhan, gabadhaas, gabadheer, currahan, currahaas, curraheer, currahoo, yaanbadan, yaanbadaas, yaanbadeer, looxan, looxaas, looxeer, looxoo, jeertan, jeertaas, jeerteer.**

Tilmaamayaasha runta ahi waa: **-aan, -aas, -eer, -oo.**

Tilmaamaaayaasha runta ahi, waxay galaan magac keli ah iyo magac koox ah. Weligood, tilmaamayaashu, qodbaha magacyada iyo jaangooyo xaaladleyda waxay ka raacaan gadaal, sida:

| **Keli** | **Koox** |
|---|---|
| Gurigaan | Guryahaan |
| Gurigaas | Guryahaas |
| Gurigeer | Guryaheer |

Ogeysiis:

**Kan**, tan, kuwaan, guryahaan, dugsiyadan. Waa tilmaan dhow. Kaas, taas, kuwaas, guryahaas, dugsiyadaas. Waa tilmaan fog. Keer, teer, kuweer, guryaheer, dugsiyadeer. Waa tilmaan aan fogeyn oo dhoweyn. Tilmaanta too, koo, kuwoo, aalaaba, gobolladoo dhan loogama wada hadlo ee aad waxaa looga hadlaa Gobolka Banaadir iyo Shabeellada Hoose iyo tan kore.

Tilmaamayaashu keligoodna way istoogi karaan, waxna way la xiriiri karaan:

| **Keli ahaantood** | **La xiriirkood** |
|---|---|
| **Kanu** waa wiil wanaagsan. | Wiil**kaanu**, wuu wanaagsan yahay. |
| **Tani** waa gabar qurxan. | Gabad**haani** way qurxan tahay. |

**Kaasi** waa wiil xun.
**Kuwaani** waa wiilal wanwanaansan.
**Kuweeru** waa buugag xunxun.
Kuw**aasu** waa jidad dhaadheer.

Wiil**kaasi** wuu xun yahay.
Wiila**shaasi** way wanwanaagsan yihiin.
Buugag**geeru** way xunxun yihiin.
**Jidadkaasu** way dhaadheer yihiin.

Tilmaamayaasha oo ku jiro tixo weydiinley, sugidly iyo diiddaley ah:

| Weydiinley | Sugidley |
|---|---|
| Ninku, waa **kee**? | ninku waa **kan**! |
| Ninku waa **kee**? | ninku waa **kaas**! |
| Ninku waa **kee**? | ninku waa **keer**! |
| Naagtu waa **tee**? | naagtu waa **tan**! |
| Naagtu waa **tee**? | naagtu waa **taas**! |
| Naagtu waa **tee**? | naagtu waa **teer**! |
| Nimanku waa **kuwee**? | nimanku waa **kuwaan**! |
| Nimanku waa **kuwee**? | nimanku waa **kuwaas**! |
| Nimanku waa **kuwee**? | nimanku waa **kuwakan**! |

**Diiddaley**

ninku **kan** ma aha.
ninku kaas ma aha.
ninku **keer** ma aha.
naagtu **tan** ma aha.
naagtu **taas** ma aha.
naagtu **teer** ma aha.
nimanku **kuwaan** ma aha.
nimanku **kuwaas** ma aha.
nimanku **kuwakan** ma aha.

## MAGACUYAALLADA

Magacuyaalladu waa magac kasta oo wax ka jooga. Magacuyaalladu waxay ka joogaan magacyada **dadka** iyo **nafleyda** iyo **nafmaqabtoleyda** dunida ku nool. Af Soomaaligu ma leh cayn labeebshe ah (neuter gender) sida afafka kale oo reer Yurub. Magacuyaalladu waxay ka joogi karaan qof, ama **neef** amaba **dhagax.** Sidaas daraaddeed, magacuyaalladu uma go'na dadka keliya sida ay ugu go'an yihiin dadka, markii laga hadlayo dhismaha naxwaha afafka reer Yurub.

Taasina waxay ku tusaysaa, in xeerka u degsan afafka reer Yurub iyo loojikada afafkooda inayan Af Soomaaligu qaadan karin. Hase yeeshee, haddana afafkoo idili meelo badan ayay isaga imaanayaan. **Qofna ma inkiri karo loojikada xeerka afafka reer Yurub u degsani inay wax weyn ka qabatay afafka horumarintooda. Xeerse af u degsani, af waliba ma qaadan karo.** Magacuyaalladu waxay u qaybsamaan labo qaybood:

1. **Nagaadeyaal.**

2. **Managaadeyaal.**

Nagaadeyaalka magacuyaalaadu waa toddoba (waan, waad, wuu, way). **Waan** waxaa loogu isticmaalaa dheddigga iyo labka, keli iyo kooxba. **Waad** waxaa loogu isticmaalaa dheddigga iyo labka, keli iyo kooxda. **Wuu** waxaa loogu isticmaalaa keli lab keliya. **Way** waxaa loogu isticmaalaa keli dheddig keliya.

Magacuyaallada iyana waa toddoba (aniga, adiga, isaga, iyada, annaga ama (innaka), idinka, iyaga). **Aniga** waxaa loogu isticmaalaa dheddigga iyo labka iyo keli keliya qofka hadlaya. **Adiga** waxaa loogu isticmaalaa dheddigga iyo lab keli keliya qofka lala hadlayo. **Isaga** waxaa loogu isticmaalaa lab keli oo keliya qofka laga hadlayo. **Iyada** waxaa loogu isticmaalaa dheddig keli oo keliya qofka laga hadlayo. **Innaga,** iyo **Innaka,** waxaa loogu isticmaalaa dheddig iyo lab koox oo ah kuwa iyagu iska hadlaya. **Idinku** waxaa loogu isticmaalaa dheddig iyo lab koox oo ah kuwa lala hadlayo. **Iyagu** waxaa loogu isticmaalaa dheddig iyo lab koox oo ah kuwa lala hadlayo.

Managaadeyaalku — sida nagaadeyaalka — ma aha magacuyaallada neg. Iyagu hadba rugtooda way baddelaan. Sidaas daraaddeed, ayaa waxaa loogu magacaabay **Managaadeyaal.** Managaadeyaalku tixda waxay ka galaan gadaal ama horay amaba dhexda. Iyagu goobna kuma negaadaan sida nagaadeyaalka. Waxaa ka mid ah: «**Isagu**» wuxuu la kulmay «**isaga**». Tixdaan managaadaha «**isaga**», wuxuu kaga jiraa horay iyo gadaal. Tixdaan kale wuxuu la kulmay **isagu isaga**, managaadaha «isaga», wuxuu kaga jiraa dhexda iyo gadaasha. Managaadaha hore waa fale, managaadaha danbana waa la falaha.

## MANAGAADEYAALKA

| Keli | Koox |
|---|---|
| aniga | innaga (annaga) |
| adiga | idinka |
| isaga | iyaga |
| iyada | |

## NAGAADEYAALKA

| | |
|---|---|
| waan | waan — waannu (wadajir) / waynnu (kelijir) |
| waad | waad (waydin) |
| wuu | way |
| way | |

**Managaadeyaalka iyo nagaadeyaalka**

**magacuyaallada oo tixo ku jira**

| | |
|---|---|
| Anigu waan tegayaa maanta. | Innagu waan tegaynnaa maanta. |
| Adigu waad tegaysaa maanta. | Idinku waad tegaysaan maanta. |
| Isagu wuu tegayaa maanta. | Iyagu way tegayaan maanta. |

**Nagaadeyaalku waxay abuurmaan laba eray oo laysu geeyay**

| | |
|---|---|
| Waa+aan = waan (ke. dh. l.). | Waa+aan = waan (ko.dh. l.) |
| Waa+aad = waad (ke. dh. l.). | Waa+aad = waad (ko. dh. l.). |
| Waa+ay = (ke. dh.). | Waa+ay = way (ko. dh. l.). |
| Waa+uu = wuu (ke. l.). | |

Sida aad halkaan ku aragto, nagaadeyaalka marna waa la ballaarin karaa, marna waa laysu geyn karaa iyadoon macnuhu waxba ka beddelmin. «**Anigu, waa+aan = waan tegayaa maanta**». Halkaan managaadaha (aniga) iyo nagaadaha (waan) way isla jiraan. **Markii ay isla jiraanna hawsha ayay adkeeyaan.**

**Keli**

1d (qofka koowaad = dh).
(qofka dheddig = dh. l.).
2d adiga (qofka lab = l.).
3d isaga (qofka ke. l.).

**Koox**

1d innaga (annaga) qofka koowaad oo kooxda ah oo dh. l.).
2d idinka (qofka kooxda ah dh. l).
3d qofka labaad=ko. dh. l. sidaas, ayaa lagu aqoonsadaa magacu-yaallada oo dhan.

## QAYBTA III.

## SALKA IYO LAANTA FALIDAHA

Xaggee bay faliduhu ka abuurmaan? Faliduhu waxay ka soo dhashaan salka erayga, kaddibna waxay sii maraan laanta. Inkastaba Af Soomaaligu wuxuu leeyahay qaab u go'an. Afka Soomaaligu ma laha waxa la yiraahdo xadlaawe **(infinitives)** sida afafka kale oo Yurub.

Wuxuuse leeyahay **laan.** Laantaas ayaa faliduhu ka abuurmaan. Salkii ku dhammaada shaqalladan, shaqal ka mid ah, ayaa waxaa lagu daraa shibbanaha « - n».

Shaqalladu waa (e, o, i) sida:

| **Salka** | **Laanta** |
| --- | --- |
| Samee, kaxee, gee, soco, noqo, eri, ilaali, jebi. | Samayn, kaxayn, geyn, socon, noqon, goyn, erin, ilaalin, jebin. |

## FALIDAHA IYO QAYBAHOODA

Faliduhu Af Soomaaliga, waxay u qaybsamaan lix falidood. Hawsha ay ka qabtaan Af Soomaaliga waa isku mid. **Falidda waxaa lagu yaqaannaa hawl iyo goor iyo dhaqdhaqaaq.** Hawl kasta oo la qabto, waxay **leedahay goor iyo dhaqdhaqaaq.** Sidaas daraaddeed, ayaa hawsha goorta iyo dhaqdhaqaaqu ay caan ugu yihiin falidaha. Goorraynta iyo hawsha iyo dhaqdhaqaaqa, faliduhu kuma kala duwana, ee waxay **ku kala duwan yihiin summadaha.** Summad kastaa, waxay ku tustaa goorraynta falidda. Goor waliba sidaas daraaddeed waxay leedahay summad.

**Qaybaha Faliduhu waa:**

I. Falidaha ku dhammaada shibbaneyaasha (c, sooc, q, liq, x, tax, d, wad, w, bilow, h, taah, y, (ee laba xubnood ah), kaalay, kh, tookh).

II. Falidaha ku dhammaada shibbaneyaasha (-e, samee, -a, daa, -i, sii, -y, hay (ee hal xubinlaha ah ama labaalaha ah)).

III. Falidaha ku dhammaada shaqalka (-o, soco, sheego iyo fallar falideedka-so, dhegayso, shaqayso, kaxayso).

IV. Falidaha ku dhammaada shibbanaha (-l ee labada xubin leh sida hadal, maqal, iyo kuwa hal xubin laha ah sida fal, tol).

V. Falidaha ku dhammaada shibbaneyaasha (-g, sheeg, **-sh**, shiish, -s, miis, -n, cun, -r, qor, sar, -b, nab, sasab, kab, (isku-kab), -f, gef (f.) dhoof, faf.

VI. Falidaha qaab maqabeyaalka ah (**oollow, aqood, imow, ahow, dheh**).

## GOORAYNTA FALIDAHA

Goorayntа faliduhu waxay u kala baxaan siddeed goorood.

1. Joogto dareerto.
2. Jooto taagan.
3. Tagto.
4. Tagto dareerto.
5. Timaaddo dhowey ama timaaddo dhowidley.
6. Timaaddo fogey ama imaaddo fogidley.
7. Shardiley.
8. Farriinley.

## JOOGTO DAREERTO

Joogto dareerto, waa falid joogta, ee hawsheedu dareersan tahay. Hawshii hadda faraha lagu hayo waa hawl dareersan oo aan weli dhammaan. Sidaas daraaddeed, ayaa waxaa lagu magacaabay joogtadaan **joogto dareerto**. Falidda joogto dareerto, waa falid aan weli dhammaan ee lagu guda jiro.

**Joogto dareerto oo ku jirta tixo:**

Tixahaan bal akhri oo ka soo saar falidaha joogto dareerto.

1. Yuusuf, hilib ayuu cunayaa.
2. Daanyeerku, geed ayuu fuulayaa.
3. Diiriye, dugsiga sare ayuu u soconayaa.
4. Gabadhu, way heeseysaa.
5. Habartu, ul ayay ku tukubaysaa.

6. Macallinku ardada ayuu wax barayaa.
7. Wiilku, kubbad ayuu ku cayaarayaa.
8. Gorayadu, ugxan ayay ku fariisanaysaa.
9. Makaaniggu, wuxuu ka shaqaynayaa garaashka.

## ASTAANTA JOOGTO DAREERTO

### FALIDDA CUN

| **Keli** | **Koox** |
|---|---|
| Anigu waan cun-**ayaa** hilibka. | Innagu waan cun-**aynnaa** hilibka. |
| Adigu waad cun-**aysaa** hilibka. | Idinku waad cun-aysaan hilibka. |
| Isagu wuu cun-**ayaa** hilibka. | Iyagu way cun-ayaan hilibka. |

### FALIDDA KEEN

| | |
|---|---|
| Anigu waan keen-**ayaa** joornaal. | Innagu waan keen-**aynnaa** joornaal. |
| Adigu waad kee-**aysaa** joornaal. | Idinku waad keen-**aysaan** joornaal. |
| Isagu wuu keen-**ayaa** joornaal. | Iyagu way keen-**ayaan** joornaal. |
| Iyadu way keen-**aysaa** joornaal. | |

### FALIDDA CAB

| | |
|---|---|
| Anigu waan cabb-**ayaa** shaah. | Innagu waan **cabb-aynnaa** shaah. |
| Idigu waad cabb-**aysaa** shaah. | Idinku waad cabb-**aysaan** shaah. |
| Isagu wuu cabb-**ayaa** shaah. | Iyagu way cabb-**ayaan** shaan. |
| Iyadu way cabb-**aysaa** shaah. | |

### FALIDDA HADAL

| | |
|---|---|
| Anigu waan hadl-**ayaa**. | Innagu waan hadl-**aynnaa**. |
| Idinku waad hadl-**aysaa**. | Idinku waad hadl-**aysaan**. |
| Isagu wuu hadl-**ayaa**. | Iyagu way hadl-**ayaan**. |
| Iyadu way hal-**aysaa**. | |

### FALIDDA SOCO

| | |
|---|---|
| Anigu waan socon-**ayaa** saaka. | Innagu waan socon-aynnaa saaka. |
| Adigu wuu socon-**ayaa** saaka. | Idinku waad socon-**aysaan** saaka. |
| Isagu wuu socon-**ayaa** saaka. | **Iyagu way socon-ayaan** saaka. |
| Iyadu way socon-**aysaa** saaka. | |

## FALIDDA SAMEE

Anigu waan samayn-ayaa hawsha.
Adigu waad samayn-aysaa hawsha.
Isagu wuu samayn-ayaa hawsha.
Iyadu way samayn-aysaa hawsha.

Innagu waan samayn-aynnaa hawsha.
Idinku waad samayn-aysaan hawsha.
Iyagu way samayn-ayaan hawsha.

## FALIDDA AKHRI

Anigu waan akhrin-ayaa buugga.
Adigu waa akhrin-aysaa buugga.
Isagu wuu akhrin-ayaa buugga.
Iyadu way akhrin-aysaa buugga.

Innagu waan akhrin-aynnaa buugga.
Idinku waad akhrin-aysaan buugga.
Iyagu way akhrin-ayaan buugga.

Markii la abuurayo joogto dareerto salka waxaa lagu daraa astaamaha joogto dareerto:

**Keli**

-ayaa (ke. dh. l.).
-aysaa (ke. dh. l.).
-ayaa (ke. l.).
-ayaa (ke. dh.).

**Koox**

-aynnaa (ko. dh. l.).
-aysaan (ko. dh. l.).
-ayaan ko. dh. l.).

**1. Weyddiinley**

Ma waxaan keen-ayaa lacag?
Ma waxaad keen-aysaa lacag?
Ma wuxuu keen-ayaa lacag?
Ma waxay keen-aysaa lacag?

Ma waxaan keen-aynnaa lacag?
Ma waxaad keen-aysaan lacag?
Ma waxay keen-ayaan lacag?

Ma waxaan cabb-ayaa biyo?
Ma waxaad cabb-aysaa biyo?
Ma wuxuu cabb-ayaa biyo?
Ma waxay cabb-aysaa biyo?

**2. Sugidley**

Waxaan keen-ayaa lacag
Waxaad keen-ayaa lacag
Wuxuu keen-ayaa lacag
Waxay keen-aysaa lacag

Waxaan keen-aynnaa lacag
Waxaad keen-aysaan lacag
Waxay keen-ayaan lacag

Waxaan cabb-ayaa biyo
Waxaad cabb-aysaa biyo
Wuxuu cabb-ayaa biyo
Waxay cabb-aysaa biyo

Ma waxaan cabb-**aynnaa** biyo?
Ma waxaad cabb-**aysaan** biyo?
Ma waxay cabb-**ayaan** biyo?

Waxaan cabb-**aynnaa** biyo
Waxaad cabb-**aysaan** biyo
Waxay cabb-**ayaan** biyo

### 3. Diiddoley

Ma **aan** keen-**ayo** lacag
Ma **aad** keen-**aysid** lacag
Ma **uu** keen-**ayo** lacag
Ma **ay** keen-**ayso** lacag

Ma **aan** keen-**aynno** lacag
Ma **aad** keen-**aysaan** lacag
Ma **ay** keen-**ayaan** lacag

Ma **aan** cabb-**ayo** biyo
Ma **aad** cabb-**aysid** biyo
Ma **uu** cabb-**ayo** biyo
Ma **ay** cabb-**ayso** biyo

Ma **aan** cabb-**aynno** biyo
Ma **aad** cabb-**aysaan** biyo
Ma **ay** cabb-**ayaan** biyo

### 4. Diiddo weydiinley

Miyaan-**an** keen-**ayn** lacag?
Miyaad-**an** keen-**ayn** lacag?
Miyuu-**nan** keen-**ayn** lacag?
Miyay-**nan** keen-**ayn** lacag?

Miyaan-**naan** keen-**ayn** lacag?
Miyaad-**naan** keen-**ayn** lacag?
Miyay-**nan** keen-**ayn** lacag?

Miyaan-**an** cabb-**ayn** biyo?
Miyaad-**an** cabb-**ayn** biyo?
Miyuu-**nan** cabb-**ayn** biyo?
Miyay-**nan** cabb-**ayn** biyo?

Miyaan-**naan** cabb-**ayn** biyo?
Miyaad-**naan** cabb-**ayn** biyo?
Miyay-**nan** cabb-**ayn** biyo?

## ASTAANTA DIIDDOLEYDA OO JOOGTO DAREERTO

Sida aad sharaxaan ku aragtay astaanta weydiinleyda iyo sugidleyda joogto dareero, waa isku mid, waana:

-ayaa
-aysaa
-ayaa
-aysaa

-aynnaa
-aysaan
-ayaan

## ASTAANTA WEYDDIINLEYDA IYO SUGIDLEYDA

1d ma+aan keen-ayo
2d ma+aad keen-ayso (sid)
3d ma+uu keen-ayo
3d ma+ay keen-ayso

1d ma+aan keen-aynno
2d ma+aad keen-aysaan
3d ma+ay keen-ayaan

| | |
|---|---|
| -ayo | -aynno |
| -aysid (ayso) | -aysaan |
| -ayo | -ayaan |
| -ayso | |

## ASTAANTA DIIDDO WEYDDIINLEYDA OO JOOGTO DAREERTO

| | |
|---|---|
| 1d miy + aan + an = miyaanan keen-ayn. | 1d miy + aan + naan = keen-ayn. |
| 2d miy + aad + an = miyaadan keen-ayn. | 2d miy + aad + naan = miyaad-naan keen-ayn. |
| 3d miy + uu + nan = miyuunan keen-ayn. | 3d miy + ay + nan = miyaynan keen-ayn. |
| 3d miy + ay + nan = miyaynan keen-ayn. | |

**Ogeysiin:**

Ogow, in erayga weydiinluhu (ma) uu raaco nagaadeyaalka (**-aan, -aad, -uu, -ay**, (ke.). Sidoo kale, erayga diiddo weydiinluru (miy-) inuu raaco nagaadeyaalka kaddibna, markaas, waxaa gadaal ka raaca nagaadeyaalka fallar diiddoweydiinleyda (**-an, -nan, -naan**). Markaas kaddib, ayaa falidaha waxaa raaca fallar falideedka (-ayn) sida keen-ayn), ee isagu aan marna beddelmayn.

(ma) waa erayga weydiinlaha.
(miy-) waa erayga diiddo weydiinlaha.
((-an), -nan, -naan)) waa fallar diiddo weydiinleyda nagaadeyaalka
(-ayn) waa fallar falideed.

Weydiinleyda iyo sugidleyda iyo diiddoleydu, dhammaantoodu waxay isaga mid yihiin qofka labaad (2d.) iyo qofka saddexaad (3d.) oo kooxaysan (k) astaamahooda (-aysaan, -ayaan).

## KU-CELISKA

I. **Ka jawaab weydiinleydaan.**

Tilmaamayaashu immisay u kala baxaan?
Tilmaamayaasha tiradoodu waa intee?

Tilmaan maxaa la yiraahdaa?
Tilmaanu maxay adiga ku tustaa?
Tilmaamahaan tixo ka samee?

Kan........................ Taas........................ Teer........................ Kuwaan........................

Kuweer............ ................ Kuwaas............................ Kuwakan............................

Tilmaanta dheddigu maxay kaga duwan tahay tilmaanta labka ah? Maxaa laga abuuraa tilmaanta? Ma sheegi kartaa tilmaanta runta ah? Ma ii sheegi karta tilmaamaha keligood meel istaagi kara iyo kuwa aan meel istaagi karin, inay wax la xiriiraan mooyee?

II. **Tilmaamaha ku qoro buuggaaga, kaddibna waxaad ka dhigtaa tilmaamo weydiinley.**

a) aqalku waa kan ..........................................................................................
b) geedku waa kan dheer ...............................................................................
d) naagtu waa tan taagan ...............................................................................
dh) buuggu waa kan guduudan .........................................................................
e) gurigu, waa keer cad .....................................................................................
f) gabadha yari waa teer gabdhaha waaweyn la socota ................

III. **Tilmaamahaan, waxaad u beddashaa diiddoley.**

a) nimanku waa kuwaan halkaan fadhiya ............................................
b) baabuurtu waa kuwaan halkaa xiimaya ............................................
d) carruurtu waa kuweer cararaya halkaas ........................................
dh) macallinku waa kan wax dhigaya ....................................................
e) gurigu waa keer cad ......................................................................................
f) gabadha yari waa teer gabdhaha waaweyn la socota ................

IV. **Magacuyaalladu intee u kala baxaan? Magacuyaal maxaa la yiraahdaa? Magacuyaalldu maxay ka joogaan?**

Magacuyaallada halkaan ku qoro oo tixo ka samee ...........................
anigu waxaan ahay macallin ............................................................................
iyadu waxay tahay karraaniyad .....................................................................
isagu wuxuu yahay makaanig ..........................................................................
adigu waxaad tahay jeoloojiste ......................................................................
ninku wuxuu yahay arday .................................................................................

V. **Faliddu maxay ka abuurantaa? Sheeg intay falidubu u qaybsamaan? Tixahaan dhammaystir, adiga oo ku daraya summadaha joogto dareerto.**

1. anigu waxaan cun ........................................ hilib.
2. macallinku wuxuu wax bar........................................ ardada.
3. naagtu waxay dhaq ........................................ maro.
4. adigu waxaad akhri ........................................ buug.
5. nimanku waxay kaxayn ........................................ geel.
6. idinku waxaad teg ........................................ maanta.
7. saaxiibkay wuxuu dhig ........................................ warqad.
8. Nuurre jidka dhexdiisa ayuu ord........................................
9. askerigu wuxuu ilaalin ........................................ bankiga dadka.
10. Hobboon waxay waraabin ........................................ ariga.
11. Raage shir ayuu ka qaybgal ........................................
12. Cosoble wuxuu dir ........................................ warqad.

VI. **Tixahaan waxaad u beddashaa sugidley, oo markaas kaddib dhammaystir.**

a) anigu ma waxaan cabbayaa ........................................
b) adigu ma waxaad fuulaysaa ........................................
d) ardaydu ma waxay aadaysaa ........................................
dh) macallimiintu ma waxay qaadayaan ........................................
e) naagtu ma beer bay ........................................
f) ilmihu ma waxay ka cararayaan ........................................
g) geelashu ma waxay ka fulayaan ........................................
h) geeduhu ma waxay ubxinayaan ........................................

VII. **Tixahaan waxaad u baddashaa diiddoley.**

1. xaaskaygu wuxuu dhoofayaa berri.
2. wiilku baas ayuu u raacayaa Hargeysa.
3. Sharmarke wuxuu noqonayaa injiyeer.
4. idinku waxaad baranaysaan af Ingiriis.
5. ninku wuxuu ka shaqaynayaa Muqdisho.
6. Hooyaday waxay raadinaysaa walaalkay.
7. Aabbahay wuxuu maanta ii soo iibinayaa joornaalka carruurta.
8. Abshir wuxuu dhegaysanayaa raadiyaha Muqdisho.

## QAYBTA IV.

## LIHIGA AF SOOMAALIGA

Lihigu Af Soomaaliga wuxuu u qaybsamaa saddex lihi. Lihigu wuxuu ku tusaa wax **hanasho iyo wax lahaan.** Qofku markii uu lee-yahay, waxaan anaa iska leh, wuxuu ku isticmaalayaa erayo uu ku muujinayo lihiga. Saddexda qaybood oo lihigu waa:

I. **Lihiga magacyo la isu keenay.**

II. **Lihiga magacuyaalka.**

III. **Magacyada lihiga oo wata gadaal raacayaasha lihiga** (- ood, - eed).

I. Lihiga magacyo laysu geeyay, wuxuu ka abuurmaa laba magac oo laysu keenay sida **wiilkii Geelle, dukaankii Abshir, dugsiga Macallin Jaamac, Jaamacadda Muqdisho.** Lihigu haddana, wuxuu ka abuurmaa saddex magac oo laysu keenay. Sida, **reer Cali wiilkiisa, roobkii degmada woqooyi, xarunta degmada Hiiraan.**

A. **Lihigu markii uu ka abuurmo laba magac.**

1. Halkaas ayay deggan tahay **gabadhii Geelle.**
2. Degmada Hiiran, ayay ku nooshahay **Ina-Cumar.**
3. Shalay waxaan la kulmay **ilmihii Samantar.**
4. Ma aad aragtay **Ina-Xasan?**
5. **Ciidankii Soomaalidu** wuxuu ka adkaaday **ciidanka cadawga.**
6. **Fatuuraddii Sharmaarke** waxay ku gaddoontay **jidka Afgooye.**
7. **Markab Talyaaniya** ayaa wuxuu ku shiiday **badda Hindiya.**
8. Waxaan soo maray **reer Kulmiye.**

B. **Lihigu markii uu ka abuurmo saddex magac.**

1. Gabayadii **Ina-Cabdille Xasan,** way i saameeyaan.
2. **Walaalihii haweeneyda Warsame,** way maqan yihiin.
3. **Waalidyadii haweeneyda aabbahay,** way maqan yihiin.

4. **Ilmihii reer Ibrahim** way nabad qabaan.
5. **Biyihii roobkii shalay** da'ay waxay burburiyeen aqallo.
6. **Dabayshii xalay fiidkii** kacday aad ayay u kululayd.
7. **Makhaayaddii reer Cartan** way gubatay.
8. **Shaqaalihii beeraha Jamaame** way dhan yihiin.

II. **Magacuyaallada lihiga.**

Magacuyaalka lihigu, iyaguna waxay caddeeyaan lihi. Gadaalraacayaalka lihiga, ee magacuyaallada qaarkood waxay erayga kala xiriiraan gadaal iyo hore, keligoodna meel ma istaagi karaan. Iyagu waxay ku tusaan lihi, gadaalraacyada gadaal iyo horay magaca kala xiriiraa, waa gadaalraacayaalka keli qofka koowaad iyo kan labaad, inta soo hartayna waxay ka raacaan horay keliya. Waxaa ka mid ah.

| **Keli** | **Koox** |
| --- | --- |
| 1d - ay - | - eenna (wadajir) ama -aya (kelijir). |
| 2d - aa - | - iinna (kelijir). |
| 3d - iisa | - ooda (kelijir). |
| 3d - ooda | |

GADAALRAACEYAALKA LIHIGA EE MAGACUYAALLADA OO TIXO KU JIRA

| Keli | Koox |
| --- | --- |
| aqalk-**ay-ga** ma gashay? | aqalk-**eenna** ama aqalk-**aya-ga** ma gashay? |
| wiilk-**ay-ga** ma aragtay? | wiilk-**eenna** ama wiilk-**aya-ga** ma aragtay? |
| buug-**ay-ga** ma akhisatay? | buugg-**eenna** ama buugg-**aya-ga** ma akhrisatay? |
| beert-**ay-da** ma gashay? | beert-**aya-da** ma gashay? |
| sanduuq-**ay-gii** baa jabay. | sanduuq-**aya-ga** baa jabay. |
| carruurt-**ay-dii** ayaa timid. | carruurt-**ayadii** ayaa timid. |
| lacagt-**aa-da** hayso. | lacagt-**iinna** haysta. |
| beert-**aa-da** falo. | beert-**iinna** fasha. |
| xoolah-**aa-ga** dhaqaalayso. | xoolih-**iinna** dhaqaalaysta. |
| mirah-**aa-ga** guro. | mirih-**iinna** gurta. |
| dugsig-**aa-ga** baro. | dugsig-**iinna** barta. |
| qalink-**iisa** wax ku qoro. | qalimad-**ooda** wax ku qoro. |

| | |
|---|---|
| farask-**iisa** fuul. | fardah-**ooda** fuula. |
| gurig-**iisa** gal. | guryah-**ooda** gala. |
| hilibk-**eeda** cun. | hilibah-**ooda** cuna. |
| kafeed-**eeda** cab. | kafeeyad-**ooda** cabba. |
| marad-**eeda** qaado. | maryah-**ooda** qaata. |

**Ogeysiin:**

Gadaalraaceyaalka lihiga ee Magacuyaalladu hor iyo gadaal ayay wax kala xiriiraan.

1. kuwa hore iyo gadaal wax kala xiriiraa, waxa weeye:
   - ay -, - aa -, - aya -.
2. kuwa horay keliya wax kala xiriiraana waxa weeye:
   -iis, -eeda, -eenna, -iinna, -ooda.
3. Lihiga magacyada laysu keenay, magaca hore ayaa la leeyahay kan danbana wax ayuu leeyahay. Sida «**Ciidankii Soomaalidu wuxuu ka adkaaday ciidankii cadawga**».

III. Magacyada lihiga oo wata gadaalraacaha lihiga (-ood, eed), iyaguna waxay ku tusaan lihii. Lihigu wuxuu ka abuurmaa laba magac oo laysu keenay iyo gadaalraacaha lihiga oo horay ka raaca. Sida **Caqli-naag-ood** ama **Caqli-naag-eed**.

**Magacyada lihiga oo wata gadaalraacaha lihiga (-ood, -yeed, -eed) oo tixo ku jira.**

1. Caqli naag-**ood**, wuu dheer yahay.
2. Muruq rag-**eed**, wax ayuu soo dhalin karaa.
3. Maskax dad-**eed**, wax weyn ayay qaban kartaa.
4. Xirsi maal agoon-**eed**, ayuu dhacay.
5. Geelle dugsi gabdh-**eed**, ayuu galay.
6. Xaliimo, waxay leedahay xoog rag-**eed**.
7. Daanyeerku, wuxuu leeyahay aragti qof-**eed**.
8. Elektroonigu, wuxuu leeyahay maskax dad-**eed**.
9. Warsame, wuxuu ii keenay gogol carb-**eed**.
10. Mayran, waxay leedahay midab hindi-**yeed**.
11. Ninku, wuxuu leeyahay xoog dameer-**eed**.
12. Geeddi, wuxuu leeyahay dabeecad bakhayl-**eed**.

## QAYBTA V.

## JOOGTO TAAGAN

Joogto taagan, waa falid maalin walba la falayo oo hawsheedu taagan tahay. Qofku maalin walba hawl ayuu qabtaa. Qofku wuu **kallahaa** oroor walba, wuu **qubeystaa,** wuu **quraacdaa,** hawl ayuu **aadaa,** wuu **hawshoodaa,** wuu **qadeeyaa,** wuu **seexdaa,** maadeysyada ayuu **tegaa.** Falidahaas oo idilu, waxay ku tusaan joogto taagan. Joogto taagan waa falid taagan **had** iyo **goor.**

### JOOGTO TAAGAN OO TIXO KU JIRTA

**Keli**

Anigu waan dhis-**aa** aqalka.
Adigu waad dhis-**taa** aqalka.
Isagu wuu dhis-**aa** aqalka.
Iyadu way dhis-**taa** aqalka.

**Koox**

Annagu waan dhis-**naa** aqalka.
Idinku waad dhis-**taan** aqalka.
Iyagu way dhis-**aan** aqalka.

### FUR

Anigu waan fur-**aa** iridda.
Adigu waad fur-**taa** iridda.
Isagu wuu fur-**aa** iridda.
Iyadu way dhis-**taa** aqalka.

Annagu waan fur-**naa** iridda.
Idinku waad fur-**taan** iridda.
Iyagu way fur-**aan** aqalka.

Ogeysiin:

Qaybta faliddaha joogto taagan ee ku dhammaada shibbaneyaasha (-g, -sh, -s, -n, -r, -b, -f) waxay qaataan summad falideedda keli (-aa, -taa, -aa, -taa) iyo koox (-naa, -taan, -aan).

### SAMEE

**Keli**

Anigu waan samee-**yaa** qado.
Adigu waad samey-**saa** qado.
Isagu wuu samee-**yaa** qado.
Iyadu way samey-**saa** qado.

**Kooda**

Innagu waan samay-**naa** qado.
Idinku waad samay-**saan** qado.
Iyagu way samee-**yaan** qado.

## KEXEE

Anigu waxaan kexee-**yaa** lò.
Adigu waxaad kaxay-**saa** lò.
Isagu wuxuu kexee-yaa lò.
Iyadu waxay kaxay-**saa** lò.

Innagu waxaan kaxay-**naa** lò.
Idinku waxaad kaxay-**saan** lò.
Iyagu waxay kexee-**yaan** lò.

## U DAA

Anigu carruurta cayaarta u daa-**yaa.**
Adigu carruurta cayaarta waad u dey-**saa.**
Isagu carruurta cayaarta wuu u daa-**yaa.**
Iyadu carruurta cayaarta way u dey-**saa.**
Innagu carruurta cayaarta waan u dey-**naa.**
Idinku carrurta cayaarta waad u dey-**saan.**
Iyagu carruurta cayaarta way u daa-**yaan.**

## ILAALI

Anigu waxaan ilaali-**yaa** hawsha.
Adigu waxaad ilaali-**saa** hawsha.
Isagu wuxuu ilaali-**yaa** hawsha.
Iyadu waxay ilaali-**saa** hawsha.

Innagu waxaan ilaali-**inaa** hawsha.
Idinku waxaad ilaali-**saan** hawsha.
Iyagu waxay ilaali-**yaan** hawsha.

## SII

Anigu, isaga lacag ayaan sii-yaa.
Adigu, isaga lacag ayaad sii-saa.
Isagu, isaga lacag ayuud sii-yaa.

Innagu, isaga lacag ayaan sii-**nnaa.**
Idinku isaga lacag ayaad sii-**saan.**
Iyagu, isaga lacag ayay sii-**yaan.**

## HAY

Anigu waxaan hay-**aa** buug wanaagsan.
Adigu waxaad hay-**saa** buug wanaagsan.
Isagu wuxuu hay-**aa** buug wanaagsan.
Iyadu waxay hay-**saa** buug wanaagsan.

Innagu waxaan hay-**naa** buug wanaagsan.
Idinku waxaad hay-**saan** buugag wanwanaagsan.
Iyagu waxay hay-**aan** buugag wanwanaagsan.

**Ogeysiis:**

Joogto taagan oo qaybta falidaha ku dhammaada(**ee**) samee kexee, iyo kuwa ku dhammaada(**-a, -aa, -laa**), iyo kuwa ku dhammaada-(**i**) sii, ilaali, jebi iyo kuwa ku dhammaada(**-y**) ee hal xubinle ah, joogtada taagan, waxay qaataan summad falideedka keli, **(-yaa, -saa, -yaa, -saa)** iyo koox(**-naa, -saan, -yaan, (-aan)).**

SOCO

Anigu riyaha iyo idaha waan kala sooc-**aa.**
Adigu riyaha iyo idaha waad kala sooc-**daa.**
Isagu riyaha iyo idaha wuu kala sooc-**aa.**
Iyadu riyaha iyo idaha way kala sooc-**daa.**
Innagu riyaha iyo idaha waan kala sooc-**naa.**
Idinku riyaha iyo idaha way kala sooc-**aan.**

LIQ

Anigu daawo ayaan liq-**aa.**
Adigu daawo ayaad liq-**daa.**
Isagu daawo ayuu liq-**aa.**
Iyadu daawo ayay liq-**daa.**
Innagu daawo ayaan liq-**naa.**
Idinku daawo ayaad liq-**daan.**
Iyagu daawo ayay liq-**aan.**

U BAX

Anigu Jamce walba waxaan u bax-**aa** Afgooye.
Adigu Jamce walba waxaad u bax-**daa** Afgooye.
Isagu Jamce walba wuxuu u bax-**aa** Afgooye.
Iyadu Jamce walba waxy u bax-**daa** Afgooye.
Iyagu Jamce walba waxay u bax-**aan** Afgooye.

WAD

Anigu waxaan wad-**aa** baabuur.
Adigu waxaad wad-**daa** baabuur.
Isagu wuxuu wad-**daa** baabur.
Iyadu waxay wad-**daa** baabuur.
Innagu waxaan wad-**naa** baabuurro
Idinku waxaad wad-**daan** baabuurro.
Iyagu waxay wad-**aan** baabuurro.

## ILLOW

Anigu waan illow-**aa** magaciisa.
Adigu waad illoow-**daa** magaciisa.
Isagu wuu illow-**aa** magaciisa.
Iyadu way illoow-**daa** magaciisa.
Innagu waan illow-**naa** magacyadooda.
Idinku waad illow-**daan** magacyaooda.
Iyagu way illoow-**aan** magacyadiinna.

## TAAH

Anigu waan taah-**aa** habaynkii.
Adigu waad taah-**daa** habaynkii.
Isagu wuu taah-**aa** habaynkii.
Iyadu waxy taah-**daa** habaynkii.
Innagu waan taah-**naa** habaynkii.
Idinku waad taah-**daan** habaynkii.
Iyagu way taah-**aan** habaynkii.

## LA KAALAY

Anigu waan la kaalay-**aa** shaah.
Adigu waad la kaalay-**daa** shaah.
Isagu wuu la kaalay-**aa** shaah.
Iyadu wax lakaalay-**daa** shaah.
Innagu waan la kaalay-**naa** shaah.
Idinku waad la kaalay-**daan** shaah.
Iyagu way la kaalay-**aan** shaah.

## TOOKH

Anigu waan tookh-**aa** had iyo jeer.
Adigu waad tookh-**daa** had iyo jeer.
Isagu wuu tookh-**aa had** iyo jeer.
Iyadu wax tookh-**daa** had iyo jeer.
Innagu waan tooh-**naa** haa iyo jeer.
Idinku waad tookh-**daan** had iyo jeer.
Iyagu way tookh-**aan** had iyo jeer.

**Ogeysiis:**

Qaybta falidaha joogto taagan oo ku dhammaada shibbaneyaasha (-**c**, soo**c**, dha**c**, -q, liq, baq, -x, tax, bax, -d, wad, sid, -h, taah, daah, -y, la kaalay -kh, tookh waxay qaataan summad falideedda keli (**-aa, -daa, -aa, -daa)** iyo koox **(-naa, -daan, -aan).**

## DHEGEYSO

Anigu waan dhegeys-**taa** hadalka.
Adigu waad dhegeys-**taa** hadalka.
Isagu wuu dhegeys-**taa** hadalka.
Iyadu way dhegeys-**ataa** hadalka.

Innagu waan dhegeys-**anaa** hadalka.
Idinku waad dhegeys-**ataan** hadalka.
Iyagu way dhegeys-**taan** hadalka.

## U SOCO

Anigu waan u soc-**daa** Xafiiska.
Adigu waad u soco-**taa** Xafiiska.
Isagu wuu u soc-**daa** Xafiiska.
Iyadu wax u soco-**taa** Xafiiska.

Innagu waan u socon-**naa** Xafiiska.
Idinku waad u soco-**taan** Xafiiska.
Iyagu way u soc-**daan** Xafiiska.

**Ogeysiis:**

Qaybta falidaha joogto taagan oo ku dhammaada shaqalka: (-o, soco, sheego, qabo) waxay qaataan summad falideedka joogto taagan keli (**-daa, -taa, -daa, -taa**) iyo koox (**-naa, taan, -daan**).

Qaybta falidaha ku dhammaada fallar falideedka (-so,) waxay qaataan summad falideedka keli (**-taa, -ataa, -taa, -ataa**) i yo kooxda (**-naa, -taan, -daan**).

## HADAL

Anigu waan hadl-**aa** mar walba.
Adigu waad hada-**shaa** mar walba.
Isagu wuu hadl-**aa** mar walba.
Iyadu way hada-**shaa** mar walba.

Innagu waan hadal-**naa** mar walba.
Idinku waad hada-**shaan** mar walba.
Iyagu way hadl-**aan** walba.

## FAL

Anigu waan fal-**aa** beerta.
Adigu waad fa-**shaa** beerta.
Isagu wuu fal-**aa** beerta.
Iyadu way fa-**shaa** beerta.

Innagu waan fal-**naa** beerta.
Idinku waad fa-**shaan** beerta.
Iyagu way fal-**aan** beerta.

**Ogelsiin:**

Qaybta falidaha joogto taagan oo ku dhammaada shibbanaha (-l, hadal, maqal, fal) waxay qaataan summad falideedda joogto taagan, keli **(-aa, -shaa),** iyo kooxda **(-naa, -shaan, -aan).**

## JOOGTO TAAGAN IYO FALIDAHA QAABMAQABEYAALKA OOLLOW

Anigu waan aa-llaa
Adigu waad t-aallaa
Isagu wuu y-aallaa
Iyadu way t-aallaa

Innagu waan n-aallaa
Idinku waad- t-aalla-an
Iyagu way y-aalla-an

### AQOOD

Anigu waan a-qaannaa
Adigu waad t-aqaannaa
Isagu wuu y-aqaannaa
Iyadu way t-aqaannaa

Innagu waan n-aqaannaa
Idinku waad t-aqqaanna-an
Iyagu way y-aqaanna-an

### IMOW

Anigu waan i-maadaa
Adigu waad t-imaaddaa
Isagu waa y-imaadaa
Iyadu way t-imaaddaa

Innagu waan n-imaad-naa
Idinku waad t-imaad-daan
Iyagu way y-imaad-aan

### AHOW

Anigu waan a-hay
Adigu waad t-ahay
Isagu wuu y-ahay
Iyadu way t-ahay

Innagu waan n-ahay
Idinku waad t-ihi-in
Iyagu way y-ihi-in

**Ogeysiin:**

Qaybta falidaha qaabmaqabeyaalku waxay leeyihiin qaab dhib badan oo raacistiisu adag tahay. Qofku waa inuu sidooda falidahaas isaga bartaa. Falidaha kale waxay leeyihiin qaab sal leh, shantaan mooyee. Hase yeeshee, astaamaha lagu tilmaami karaa qaabmaqabeyaalku waxay yihiin:

Keli (a-, (aa-), t-, y-,) iyo koox (n-, t- + taan (-aan, -in) y- + -aan (-an, -in)). Waxaa laysku wada raacsan yahay, in falidahaasi ay ka soo jeedaan asal af Saamiitig ah, sida Afka Carabiga oo falidihiisu leeyihiin qaabkan oo kale, (aquumu, taquumu, yaquumu, naquumu, taquumuuna, yaquumuuna iwm).

## DHEH 1.

Anigu waan iraahdaa saas.
Adigu waad tiraahdaa saas.
Isagu wuu yiraahdaa saas.
Iyadu way tiraahdaa saas.

Innagu waan niraahnaa saas.
Idinku waad tiraahdaan saas
Iyagu yiraahdaan saas.

## DHEH 2.

Anigu waan dhah**aa** saas.
Adigu waad dhahd**aa** saas.
Isagu wuu dhah**aa** saas.

Innagu waan dhahn**aa** saas.
Idinku waad dhahd**aan** saas.
Iyagu way dhah**aan** saas.

## JOOGTO TAAGAN IYO HABKA FALIDAHEEDA

1. Qaybta falidaha ku dhammaada shibbanaha: (-c, -q, -x, -d, -h, -y).

waan liq-aa
waad liq-daa
wuu liq-aa
way liq-daa

waan liq-naa
waad liq-daan
way liq-aan

waan wad-aa
waad wad-daa
wuu wad-aa
way wad-daa

waan wad-naa
waad wad-daan
way wad-aan

2. Qaybta falidaha ku dhammaada shibbaneyaasha: (-a, -e, -i).

waan sii-yaa
waad sii-saa
wuu sii-yaa
way sii-saa

waan sii-naa
waad sii-saan
way sii-saa

waan daa-yaa
waad day-saa
wuu daa-yaa
way day-saa

waan dayn-naa
waad day-saan
way daa-yaan

3. Qaybta falidaha ku dhamma-
da shaqalka: (-o).

waan soc-daa
waad soc-taa
waad soc-daa
way soc-daan

waan socon-naa
waad soco-taan
way soc-daan

waan noq-daa
waad noqo-taa
wuu noq-daa
way noqo-taa

waan noqo-naa
waad noqo-taan
way noqo-daan

4. Qaybta falidaha ku dhammaa-
da fallar fali deedka: (-so).

waan hays-taa
waad hays-ataa
wuu hays-taa
way hays-ataa

waan haysan-naa
waad hays-ataan
way rays-taan

waan rays-taa
waad rays-ataa
wuu rays-taa
way hays-taan

waan raysan-naa
waad rays-ataan
way rays-ataa

5. Qaybta falidaha ku dhammaa-
da shibbanaha: (-l).

waan fal-aa
waad fa-shaa
wuu fal-aa
way fa-shaa

waan fal-naa
waad fa-shaan
way fal-aan

waan hel-naa
waad he-shaa
way hel-aan
wuu hel-aa

waan hel-naa
waad he-shaan
way hel-aan

6. Qaybta falidaha ku dhammaa-
daa shibbaneyaasha: (-g, -s, -n,
-r, -b, -f).

waan dhis-aa
waad dhis-taa
wuu dhis-aa
way dhis-taa

waan dhis-naa
waad dhis-taan
wuu dhis-aan

waan keen-aa
waad keen-taa
wuu keen-aa
way keen-taa

waan keen-naa
waad keen-taan
way keen-aan

7. Qaybta falidaha qaab ma qabeyaalka (imow, oollow, aqood, ahow, dheh).

## JOOGTO TAAGAN IYO HAWSHEEDA

### SOCO

| Weydiinley | Sugidley |
|---|---|
| Anigu ma soc-daa? | Anigu waan soc-daa |
| Adigu ma soco-taa? | Adigu waad soco-taa |
| Isagu ma soc-daa? | Isagu wuu soc-daa |
| Iyadu ma soco-taa? | Iyadu way soco-taa |
| Innagu ma socon-naa? | Innagu waan socon-naa |
| Idinku ma soco-taan? | Idinku waad soco-taan |
| Iyagu ma soc-daan? | Iyagu way soc-daan |

### SII

| | |
|---|---|
| Anigu ma sii-yaa? | Anigu waan sii-yaa |
| Adigu ma sii-saa? | Adigu waad sii-saa |
| Isagu ma sii-yaa? | Isagu wuu sii-yaa |
| Iyadu ma sii-saa? | Iyadu way sii-saa |
| Innagu ma siin-naa? | Innagu waan siin-naa |
| Adinku ma sii-saan? | Idinku waad sii-saan |
| Iyagu ma sii-yaan? | Iyagu way sii-yaan |

### FAL

| | |
|---|---|
| Anigu ma fal-aa? | Anigu waan fal-aa |
| Adigu ma fa-shaa? | Adigu waad fa-shaa |
| Isagu ma fal-aa? | Isagu wuu fal-aa |
| Iyadu ma fa-shaa? | Iyadu way fa-shaa |
| Innagu ma fal-naa? | Innagu waan fal-naa |
| Adinku ma fa-shaan? | Idinku waad fa-shaan |
| Iyagu ma fal-aan? | Iyagu way fal-aan |

## SOCO

| Diiddoley | Diiddo weydiinley |
|---|---|
| Anigu ma soc-do | Anigu miy-aan-an socon? |
| Adigu ma soco-tid | Adigu miy-aad-an socon? |
| Isagu ma soc-do | Isagu miy-uu-nan socon? |
| Iyadu ma soco-to | Iyadu miy-ay-nan socon? |
| Innagu ma socon-no | Innagu miy-aan-naan socon? |
| Idinku ma soco-taan | Idinku miy-aad-naan socon? |
| Iyagu ma soc-daan | Iyagu miy-ay-nan socon? |

## SII

| | |
|---|---|
| Anigu ma sii-yo | Anigu miy-aan-an siin? |
| Adigu ma sii-sid | Adigu miy-aad-an siin? |
| Isagu ma sii-yo | Isagu miy-uu-nan siin? |
| Iyadu ma sii-so | Iyadu miy-ay-nan siin? |
| Annagu ma siin-no | Innagu miy-aan-naan siin? |
| Idinku ma sii-saan | Idinku miy-aad-nan siin? |
| Iyagu ma sii-yaan | Iyagu miy-ay-nan siin? |

## FAL

| | |
|---|---|
| Anigu ma fal-o | Anigu miy-aan-an falin? |
| Adigu ma fa-sho | Adigu miy-aad-an falin? |
| Isagu ma fal-o | Isagu miy-uu-nan falin? |
| Iyadu ma fa-sho | Iyadu miy-ay-nan falin? |
| Innagu ma fal-no | Innagu miy-aan-naan talin? |
| Idinku ma fa-shaan | Idinku miy-aad-naan falin? |
| Iyagu ma fal-aan | Innagu miy-aanaan falin? |

**Ogeysiin:**

1. Qaybta falidaha ku dhammaada shibbaneyaasha: (-c, -q, -x, -d, -h, -y) summadda diiddoleyda joogtada taagan, waxay noqotaa keli (**-o**, **-do**, **-o**, **-do**) iyo koox (**-no**, **-daan**, **-aan**).

2. Qaybta falidaha ku dhammaada shaqallada: (-e, -i, -a) summadaha diiddoleyda joogtada taagan, waxay nodaan koox (**-yo**, **-so**, **-yo**, **-so**, **-sid**) iyo koox (**-no**, **-saan**, **-yaan**).

3. Qaybta falidaha ku dhammaada shaqalka (-o) summaadaha diiddoleyda joogtada taagan, waxay noqdaan keli (**-do**, **-to**, **-do**, **-to**) iyo koox (**-no**, **-taan**, **-daan**).

4. Qaybta falidaha ku dhammaada fallar falideedka: (-so), summadaha diiddaleyda joogtada taagan waxay noqdaan keli (**-to**, **-atid** (ato) **-to**, **-ato**) iyo koox (-no, -taan, -aan).

5. Qaybta falidaha ku dhammaada shibbanaha: (-l) summadaha diiddoleyda joogtada taagan, waxay noqdaan keli (**-o**, **-sho**, **-o** **-sho**, iyo koox (**-no**, -sh**aan**, **-aan**).

6. Qaybta falidaha ku dhammaada shibbaneyaasha: (-g, -s, -n, -r, -b, -f) summadaha joogtada taagan keli, waxay noqdaan (-aa, -taa, -aa, -taa) iyo kooxaynta (-no, -taan, -aan).

7. Qaybta falidaha qaab ma-qabeyaalka ah iyaguna, sida kuwa kale ayay noqdaan, keligood waxaa weeye (**-do**, **-ddo**, **-do**, **-ddo**) iyo koox (**-no**, **-daan**, **-aan**).

## QAYBTA VI.

## SIFAYNTA

Sifayn maxaa la yiraahdaa? Sifayn ama tusmo waxaa la yiraahdaa magac sifaysan oo midabaysan. Tusmadu waxay ka mid tahay waxyaalaha aan la taaban karin Af Soomaaliga, tusamadu waxay ka gadaal martaa magaca. Afafka kale, siiba afafka Yurubka, tusmadu waxay ka horreysaa magaca, sida **«good man»**, af Soomaaligase, mar kasta tusmadu waxay ka danbaysaa magaca. Sida **«nin wanaagsan»**. Haddaan iraahdo **«ninku wuu foolxun yahay»** amaba **«ninku wuu gaaban yahay»** taasi waxay ku tustaa tusmo ninka loo yeelayo oo ah foolxumo iyo gaabnaan. Astaamaha tusmadu waa gadaalraacayaalka.

1. Gadaalraacaha tusmada -san sida nin wanaag-**san**
2. Gadaalraacaha tusmada -an sida nin ballaar-**an**
3. Gadaalraacaha tusmada -ah sida nin askari-**ah**
4. Gadaalraacaha sifaynta -leh (-le) sida nin xoolo-**leh**
5. Erayga sifayn -daran sida nin xurma-**daran**
6. Erayga sifayn -badan sida naag qurux-**badan**
7. Erayga sifayn -yar sida nin-**yar**
8. Gadaalraacaha sifaynta -yar sida nin-**yar.**
9. Gadaalraacaha sifaynta -aad u sida nin **aad u** yar.
10. Gadaalraacaha sifaynta -la' sida nin **indha la'.**
11. Gadaalraacaha sifaynta -qab sida nin **ciil-qaba.**

Gadaalraacayaalka tusmadu waa:
Gadaalraacaha oo idilu waxay raacaan falidda **ah.**

### Falidda «ah» iyo sifaynta gadaalraacaha (-san) oo tixo leh

| Keli | Koox |
|---|---|
| Anigu waan degdeg-**san** ahay. | Innagu waan degdeg-**san** nahay. |
| Adigu waad degdeg-**san** tahay. | Idinku waad degdeg-**san** tihiin. |
| Isagu wuu degdeg-**san** yahay. | Iyagu way degdeg-**san** yihiin. |
| Iyadu way degdeg-**san** tahay. | |

### Falidda «ah» iyo gadaalraacaha sifaynta (-an) oo tixo ku jira

| | |
|---|---|
| Anigu waan gaab-**an** ahay. | Innagu waan gaagaab-**an** nahay. |

Adigu waad gaab-**an** tahay.
Isagu wuu gaab-**an** yahay.
Iyadu way gaab-**an** tahay.

Idinku waad gaagaab-**an** tihiin.
Iyagu way gaagaab-**an** yihiin.

## Falidda «ah» iyo gadaalraacaha sifaynta «ah» oo tixo la jira

Anigu waxaan ahay nin miskiin **ah**.
Adigu waxaad tahay nin miskiin **ah**.
Isagu wuxuu yahay nin xoolakiin **ah**.
Iyadu waxay tahay naag miskiin **ah**.

Innagu waan tabar **dardaran** nahay. saakiin **ah**.
Idinku waxaad tihiin niman masaakiin **ah**.
Iyagu waxay yihiin niman masaakiin **ah**.

## Falidda «ah» iyo gadaalraacaha sifaynta «leh» (-le) oo tixo la jira

Anigu waxaan ahay nin xoola **leh**.
Adigu waxaad tahay nin xoola **leh**.
Isagu wuxuu yahay nin xoola **leh**.
Iyadu waxay tahay naag xoola **leh**.

Innagu waxan nahay niman xoola **leh**.
Idinku waxaad tihiin niman xoola **leh**.
Iyagu waxay yihiin niman xoola **leh**.

## Falidda «ah» iyo gadaalraacaha sifaynta «daran» oo tixo ku jira

Anigu waan tabar **daran** ahay.
Adigu waad tabar **daran** tahay.
Isagu wuu tabar **daran** yahay.
Iyadu way tabar **daran** tahay.

Innagu waan abar **dardaran** nahay.
Idinku waad tabar **dardaran** tihiin.
Iyagu way tabar **dardaran** yihiin.

## Falidda «ah» iyo erayga sifaynta «badan» oo ku jira tixo

Anigu waan lugo **là** ahay.
Adigu waad lugo **là** dahay.
Isagu wuu lugo **là** yahay.
Iyagu way lugo **là** dahay.

Innagu waan lugo **là** nahay.
Idinku waad lugo **là** dihiin.
Iyagu way lugo **là** yihiin

### Falidda «ah» iyo erayga sifaynta «badan» oo ku jira tixo

Anigu waan orod **badan** ahay
Adigu waad orod **badan** tahay
Isagu wuu orod **badan** yahay
Iyadu way orod **badan** tahay

Innagu waad ororod **badan** nahay
Idinku waad ororod **badan** tihiin
Iyagu way ororod **badan** yihiin

### Falidda «ah» iyo erayga sifaynta «yar» oo la jira tixo

Anigu waxaan ahay nin dhallin **yar** ama
Anigu waan dhallin **yar** ahay
Adigu waad dhallin **yar** tahay
Isagu wuu dhallin **yar** yahay
Iyadu way dhallin **yar** tahay

Innagu waxaan nahay niman dhallin **yaryar** ama
Innagu waan dhallin **yaryar** nahay
Idinku waad dhallin **yaryar** tihiin
Iyagu way dhallin **yaryar** yihiin

### Falidda «ah» iyo erayga sifaynta (-aad -aad-u) oo ku jira tixo

Anigu waan ahay nin **aad u** jirran
Adigu waad tahay nin **aad u** jirran
Isagu wuxuu yahay nin **aad u** jirran
Iyadu way tahay naag **aad u** jirran

Annagu waan nahay niman **aad u** jirran
Idinku waad tihiin niman **aad u** jirran
Iyagu way yihiin niman **aad u** jirran

### Falidda «ah» iyo erayga «aad-u» oo tixo ku jira

Anigu **aad** baan **u** ladan ahay
Adigu **aad** baad **u** ladan tahay
Isagu **aad** buu **u** ladan yahay
Iyadu **aad** bay **u** ladan tahay

Innagu **aad** baan **u** ladladan nahay
Idinku **aad** baad **u** ladladan tihiin
Iyagu **aad** bay **u** ladladan yihiin

### Falidda «ah» iyo gadaalraacaha «qab + ah = qaba» oo tixo ku jira

Waxaan ahay nin ciil **qaba**
Wuxuu yahay nin ciil **qaba**
Waxaad tahay naag ciil **qabta**
Waxay tahay naag ciil **qabta**

Waxaan nahay niman ciil **qaba**
Waxaad tihiin niman ciil **qaba**
Waxay yihiin niman ciil **qaba**.

**Ogeysiin:**

Erayada sifaynta (badan, yar, daran) haddii lagu daro erayga yoolgaaraha ah (aad-u) sifayntu waxay noqotaa yoolgaarid. Waxaa ka mid ah **«ninku aad uma caqli dheera»**, ama «ninku **aad** buu **u** caqli dheer yahay».

## LABANLAABIDDA ERAYADA SIFAYNTA

Erayada sifaynta (daran - badan - yar), markii ay raacaan magacyada kooxda ah, way labanlaabmaan.

Erayada sifaynta oo kale iyana sidoo kale ayay noqdaan.

| Keli | Koox |
|---|---|
| nin **yar** | niman **yaryar** |
| nin **ladan** | niman **ladladan** |
| nin **dheer** | niman **dheerdheer** (dhaadheer) |

| Keli | Koox |
|---|---|
| nin **gaaban** | niman **gaagaaban** |
| nin **buuran** | niman **buurbuuran** |
| nin **madow** | niman **madmadow** |
| nin **xun** | niman **xunxun** |
| naag **xun** | naago **xunxun** |
| naag **cad** | naago **cadcad** |
| wiil **jirran** | wiilal **jirjirran** |
| qain **jaban** | qalimo **jajaban** (jabjaban) |

Erayada sifaynta (cad, madow, dheer, fog, dhow, cas, iyo kuwa kale) lagama maarmaan ma aha, inay raacaan gadaalraacayaasha sifaynta (-san, -an, -leh, -là) maxaa yeelay iyaga ayaa sifaysan.

**Ogeysiis:**

Ogow in erayga sifaynta (aad-u) uu isla wada jiro tixaha qaarkood, iyo in ereyga sifaynta (-aad-u) uunan isla wada jirin. Erayga (aad-u) markii uu tixaha ku jiro, wuu kala go'aa. Sida **«waxaan ahay nin aadu caqli badan»** iyo **Anigu, aad baan u caqli badan ahay.**

Waayahaan danbe waxaad mooddaa, in dadku uu ka tegayo

labanlaabka erayda sifaynta oo si ka hawl yaraysanayo celceliska erayada sifaynta. Taas waxaa ka mid ah **«ninku wuu yar yahay»** keli iyo **«nimanku way yaryar yihiin»** ama intii la dhihi lahaa **«nimanku way ladladan yihiin»** in la oranayo **«nimankii way ladan yihiin».** Dadka maanta joogaa, wuxuu yiraahdaa **«nimankii way ladan yihiin».** Sidaas daraaddeed, dadkii wuxuu ka tegayaa labanlaabka erayada sifaynta.

Ogow, in erayada sifayntu, ay noqon karaan falido· Faliduhu, waxay ka abuurmi karaan sifaynta. Taas, waxaa ka mid ah haddaan iraahdo, **«ninkii,** wuu **yaraan-ayaa».** Waa j oogto dareerto. **«Ninku wuu yar-aa».** Waa tagto labanlaabka erayada sifayntuna waxaa ka abuurma sidoo kale falido, waxaa ka mid ah, haddaan iraahdo, **«Nimaanku way waaweyn-aan-ayaan». «Iyagu way yaryaraan-ayaan».**

YAR

| **Weydiinleyda** | **Sugidleyda** |
|---|---|
| Anigu ma **yar** ahay? | Anigu waan **yar** ahay |
| Adigu ma **yar** tahay? | Adigu waad **yar** tahay |
| Isagu ma **yar** yahay? | Isagu wuu **yar** yahay |
| Iyadu ma **yar** tahay? | Iyadu way **yar** tahay |

DHEER

| | |
|---|---|
| Anigu ma **dheer** ahay? | Anigu waan **dheer** ahay |
| Adigu ma **dheer** tahay? | Adigu waad **dheer** tahay |
| Isagu ma **dheer** yahay? | Isagu wuu **dheer** yahay |
| Iyadu ma **dheer** tahay? | Iyadu way **dheer** tahay |

YAR

| | |
|---|---|
| Innagu ma **yaryar** nahay? | Innagu waan **yaryar** nahay |
| Idinku ma **yaryar** tihiin? | Idinku waad **yaryar** tihiin |
| Iyagu ma **yaryar** yihiin? | Iyagu way **yaryar** yihiin |

DHEER

| | |
|---|---|
| Innagu ma **dhaadheer** nahay? | Innagu waan **dhaadheer** nahay |
| Idinku ma **dhaadheer** tihiin? | Idinku waad **dhaadheer** tihiin |
| Iyagu ma **dhaadheer** yihiin? | Iyagu way **dhaadheer** yihiin |

## CAS

| | |
|---|---|
| Anigu ma **cas** ahay? | Anigu waan **cas** ahay |
| Adigu ma **cas** tahay? | Adigu waad **cas** tahay |
| Isagu ma **cas** yahay? | Isagu wuu **cas** yahay |
| Iyadu ma **cas** tahay? | Iyadu way **cas** tahay |
| Innagu ma **cascas** nahay? | Innagu waan **cascas** nahay |
| Idinku ma **cascas** tihiin? | Idinku waad **cascas** tihiin |
| Iyagu ma **cascas** yihiin? | Iyagu way **cascas** yihiin |

## YAR

| **Diiddoleyda** | **Diiddo weydiinleyda** |
|---|---|
| Anigu ma **yar-i** | Anigu miy-aan-an **yarayn?** |
| Adigu ma **yar-id** | Adigu miy-aad-an **yarayn?** |
| Isagu ma **yar-a** | Isagu miy-uu-nan **yarayn?** |
| Iyadu ma **yar-a** | Iyadu miy-yay-nan **yarayn?** |
| Innagu ma **yaryar-in** | Innagu miy-aan-naan yaryarayn? |
| Idinku ma **yaryar-idin** | Idinku miy-aad-naan yaryararayn? |
| Iyagu ma **yaryar-a** | Iyagu miy-yay-nan yaryarayn? |

## DHEER

| | |
|---|---|
| Anigu ma **dheer-i** | Anigu miy-aan-an dheerayn? |
| Adigu ma **dheer-id** | Adigu miy-aad-an dheerayn? |
| Isagu ma **dheer-a** | Isagu miy-uu-nan dheerayn? |
| Iyadu ma **dheer-a** | Iyadu miy-ay-nan dheerayn? |
| Innagu ma **dhaadheer-in** | Innagu miy-aan-naan dhaadhee-rayn? |
| Idinku ma **dhaadheer-idin** | Idinku miy-aad-naan dhaadhee-rayn |
| Iyagu ma **dhaadheer-a** | Iyagu miy-ay-nan dhaadheerayn? |

## CAS

| | |
|---|---|
| Anigu ma **cas-i** | Anigu miy-aan-aan casayn? |
| Adigu ma **cas-id** | Adigu miy-aad-an casayn? |
| Isagu ma **cas-a** | Isagu miy-uu-nan casayn? |

| | |
|---|---|
| Iyadu ma **casa** | Iyadu miy-ay-nan casayn? |
| Innagu ma **cascas-in** | Innagu miy-aan-naan cascasayn? |
| Idinku ma **cascas-idin** | Idinku miy-aad-naan cascasayn? |
| Iyagu ma **cascas-a** | Iyagu miy-ay-nan cascasayn? |

## ERAYADA WEYDDIINLEYDA

**Erayada wediinleyda oo tixo kula jira laba falideed «jir iyo ah»**

Erayada weydiinleydu waa shan qaybood:

I. Weydiinleyda magacuyaalka: **max, yaa, kee, tee, kuwee, kuma, tuma, kuwama.**

II. Weydiinleyda goobeed: **xaggee, meeshee, dhinacee, barbarkee, geestee.**

III. Weydiinleyda siyeed: **see, sidee.**

IV. Weydiinleyda ineed: intee, immisaa, meeqa.

V. Weydiinleyda gooreed: goortee, (goorma), markee (marma), waqtigee (waqti ma), saacaddee (saacad ma) sannaddee (sananma), toddobaadkee (toddobaad ma), gu'gee (gu'ma) dayrtee (dayr-ma) jiilaalkee (jiilaal-ma) xagaagee (xagaa-ma) bishee (bilma) maalintee (maalin-ma).

### I. Weydiinleyda Magacuyaalka.

| | |
|---|---|
| Anigu **ma**xaan ahay? | Anigu waxaan ahay wiil |
| Adigu **ma**xaad tahay? | Adigu waxaad tahay wiil |
| Isagu **mu**xuu yahay? | Isagu wuxuu yahay wiil |
| Iyadu **ma**xay tahay? | Iyadu waxay tahay naag |

| | |
|---|---|
| 1. Innagu **ma**xaan nahay? | 2. Innagu waxaan nahay wiilal |
| Idinku **ma**xaad tihiin? | Idinku waxaad tihiin wiilal |
| Iyagu **ma**xay yihiin? | Iyagu waxay yihiin wiilal |

3. Anigu ma ah-i wiil
Adigu ma tih-id wiil
Isagu ma ah-a wiil

Iyadu ma ah-a naag

Innagu ma ah-in wiilal
Idinku ah-idin wiilal
Iyagu ma ah-a wiilal

**Weydiinleyda magacuyaallada (yaa,+aad,+uu,+ay iwm).**

1. Anigu yaan ahay?
Adigu yaad tahay?
Isagu **yuu** yahay?

2. Anigu waxaan ahay wiil
Adigu waxaad tahay wiil
Isagu wuxuu yahay wiil

3. Anigu ma ah-i **wiil**
Adigu ma ah-**id** wiil
Isagu ma ah-**a** wiil

Innagu ma ah-**in** wiilal
Idinku ma ah-**idin** wiilal
Iyagu ma ah-**a** wiilal

**Weydiinleyda magacuyaallada, kee, tee kuwee:**

1. Anigu **kee** ahay?
Adigu (**kee**) (**tee**) tahay?

Isagu **kee** yahay?
Iyadu **tee** tahay?

Innagu **kuwee** nahay?
Idinku **kuwee** tihiin?
Iyagu **kuwee** yihiin?

2. Anigu waxaan ahay wiil
Adigu waxaad tahay wiil
Isagu wuxuu yahay wiil
Innagu waxaan nahay wiilal
Idinku waxaan tihiin wiilal
Iyagu waxay yihiin wiilal

3. Anigu ma ah-i wiil
Adigu ma ah-**id** wiil
Isagu ma ah-a wiil
Iyagu ma ah-a gabar

Innagu ma ah-**in** wiilal
Idinku ma ah-**idin** wiilal
Iyagu ma ah-a wiilal

**Weydiinleyda magacuyaallada: kuma tuma kuwama** (kuma, tuma, kuwama + **aan.**

1. Anigu kum + aan ahay?
   Adigu kum—aad tahay?
   Isagu kum + uu yahay?
   Iyadu tum + ay tahay?

   Innagu kuwam + aan nahay?
   Idinku kuwam + aad tihiin?
   Iyagu kuwam + ay yihiin?

2. Anigu waxaan ahay wiil
   Adigu waxaad tahay wiil
   Isagu wuxuu yahay wiil
   Iyadu waxay tahay gabar.

   Innagu waxaan nahay wiilal
   Idinku waxaad tihiin wiilal
   Iyagu waxay yihiin wiilal

3. Anigu ma ah-**i wiil**
   Adigu ma ah-**id** wiil
   Isagu ma ah-**a** wiil
   Iyadu ma ah-**a** gabar

   Innagu ma ah-**in** wiilal
   Idinku ma ah-**idin** wiilal
   Iyagu ma ah-a wiilal

II. **Weydiinleyda goobeed: xaggee, meeshee, dhinacee, barbarkee, eestee, halkee, iwm).**

Xaggee jiraa Nuur? — Nuur wuxuu jiraa **dugsiga**

Xaggee jirtaa Xaliim? — Xaliima waxay jirtaa **dugsiga**

Xaggee jirtaa iyadu? — Iyadu waxay jirtaa **suuqa**

Meeshee jiraa wiilku? — Wiilku wuxuu jiraa **baarka**

Meeshee jiraan iyagu? — Iyagu waxay jiraan **ristoorantiga**

Barbarkee buu ku yaallaa dukaanku? — Dukaanku wuxuu ku yaallaa **midigta**

Barbarkee buu ku yaallaa bankigu? — Bankigu wuxuu ku yaallaa **bidixda**

Dhinacee bay ku taallaa shineemadu? — Shineemadu waxay ku taallaa **xaafadda koofur woqooyi**

Halkee bay ku taallaa makhaayaddu? — Makhaayaddu waxay ku taallaa **Xamarweyne**

Geestee buu ku yaallaa Barlamaanku? — Barlamaanku wuxuu ku yaallaa **midigta**

III. **Weydiinleyda siyeed: sidee (see).**

| | |
|---|---|
| Anigu sidee ahay? | Anigu waan nabdoon ahay |
| Adigu sidee tahay? | Adigu waad habboon tahay |
| Isagu sidee yahay? | Isagu wuu nabdoon yahay |
| Iyadu sidee tahay? | Iyadu way nabdoon tahay |
| Innagu sidee nahay? | Innagu waan nabdoon nahay |
| Iyagu sidee yihiin | Iyagu way nabdoon yihiin |

Anigu ma nabdoon-**i**
Adigu ma nabdoon-**id**
Isagu ma nabdoon-**a**
Iyadu ma nabdoon-**a.**
Iyagu ma nabdoon-**a**
Innagu ma nabdoon-**in**
Iyagu ma nabadoon-**a**

IV. **Weydiinleyda ineed: immisaa, intee, meeqa.**

| | |
|---|---|
| Intee sano ayaan jiraa? | Anigu waxaa jiraa 20 sano |
| Intee sano ayaad jirtaa? | Adigu waxaad jirtaa 20 sano |
| Immisaa sano ayuu jiraa? | Isagu wuxuu jirranaa 2 sano |
| Immisaa sano ayay jirtaa? | Iyadu waxay jirtaa 20 sano |
| Meeqa sano yaan jirnaa? | Innagu waxaad jirjirnaa 20 sano |
| Meeqa sano ayaad jirtaan? | Idinku waxaad jirjirnaa 20 sano |
| Meeqa sano ayay jiraan? ama (jirjiraan) | Iyagu waxay jirjiraan 20 sano |
| Meeqa sano ayuu jirranaa wiilku? | Wiilku wuxuu jirranaa 20 sano |

V. Weydiinleyda gooreed: **goortee (goorma), markee (marma), waqtigee (waqtima), saacaddee (saacadma), jiilaalkee, sannadee (sanama), toddobaadkee (todoobaadma), gu'gee (gu'ma), dayrtee (dayrma), jiilaalkee (jiilaalma), xagaagee (xagaama), bishee (bilma), maalintee (maalinma), galabtee (galabma), subaxdee (subaxma).**

| | |
|---|---|
| Adigu goorm+aad ii imanaysaa? | Anigu waxaan kuu imanayaa galabta |
| Isagu goormuu imanayaa? | Isagu wuxuu imanayaa aroortii |
| Iyadu markee (bay) imanaysaa? | Iyadu waxay imanaysaa Juunyo |
| Innagu kolkee imanaynnaa? | Innagu waxaan imanaynnaa Axadda |
| Idinku goormaad imanaysaan? | Idinku waxaad imanaysaan 5:00 galabeed |
| Iyagu markee bay imanayaan? | Iyagu waxay imanayaan Caawa |
| Ardadu goormay imanayaan? | Ardadu waxay imanaysaa Gu'gaan |
| Nimankii goormay imanayaan? | Nimankii waxay imanayaan Dayrta |

**Ogeysiin:**

Ogow, in erayga weydiinleyda runta ahi, uu yahay (-ee). Erayga weydiinluhu (ee), wuxuu raacaa erayada, weydiinleyda (**inta, sida, kuwa, kii, tii**) markaasay waxay noqdaan sidaan oo kale (**inta+ee=intee? kuwa+ee=kuwee? kii+ee+kee, tii+ee=tee iyo kuwo kale**).

Ogow in falidda (ah), diiddadeeda keli tahay (**-i, -id, -a**) iyo koox inay tahay (**-in, -idin, -a**). Erayga diiddoleyda ahi, (ma) wuu ka hormaraa falidaha diiddoleyda ah.

## KU CELISKA

1. **Magaeyadaan ka abuur lihiga labada magac oo laysu keenay oo tix ka samee?**

| | |
|---|---|
| Geel ............................ | Abshir |
| Guri ............................ | Qamaan |
| Gabadh ............................ | Axmed |
| Walaal ............................ | Ina-Cabdille Xasan |
| Beer ............................ | Cabdille |
| Gabay ............................ | Cabdille-Guure |
| Shufeer ............................ | Parfasoor |
| Fatuurad ............................ | Cilmi |
| Wey? ............................ | Sac. |

2. **Magacyadaan ka abuur lihiga saddex magac ka koobma?**

Ari ........................ reer ........................ Cilmi
Ilmo ........................ haweeney........................ Ciise
Askar........................ degmo ........................ Hargeysa
Baabuurro ........................ urur........................ shaqaale
Qawlad ........................ wiil ........................ Faarax
Buug ........................ inan ........................ Geelle
Ciid ........................ degmo ........................ Jamhuuriyadda Dimoq. Soomaaliya
Kacaanka ........................ 21 Oktoobar ........................ ........................
Madaxweyn. ........................ Jamhuuriyadda ........................ Demoq........................ Soomaali

3. **Erayada lihiga ah oo magacuyaalka ah sheeg?** Tiradoodu waa immisaa? ........................................................

........................................................

A. Tixahaan waxaad gelisaa eray lihi ah oo ku habboon, kaddibna tifaftir:

a) guuri ........................ gal
b) lacagt ........................ i sii
d) farask ........................ fuul
dh) Xaliimo hilib ........................ cun
e) Fatuurad ........................ wado
f) Beert ........................ ha fasheen.

B. Erayada lihiga ah oo magacuyaalka ah ee gadaal iyo horayba wax kala xiriira ma ii sheegi kartaa?

1. Ma ii sheegi kartaa magacuyaalka lihiga ah ee erayada horay keliya wax kala xiriira?

2. Tirada magacuyaalka lihigu waa immisa?

4. **Tixahaan waxaad ku dartaa summadaha joogto taagan.**

a) Anigu waxaan dhis ........................ guri
b) Iyadu waxay arak ........................ macallin
d) Ninku wuxuu iis........................ sac
dh) Iyadu waxay qor. ........................ warqad

e) Ardadu waxay baro ........................ dersiga
f) Wiilku wuxuu aad ........................ dugsiga
g) Gabadhu waxay akhri ........................ joornaal
h) Cabdi wuxuu samee ........................ kabo
x) Carruurtu waxay ku cayaar ........................ goobta dugsiga
i) Anigu waxaan goo ........................ geedka
j) Askerigu wuxuu ilaaliy ........................ dalka
k) Isagu wuxuu kala sooc ........................ riyaha iyo idaha
kh) Innagu waxaan ka shaqee ........................ beeraha Jamm.
l) Iyadu waxay diid ........................ xumaanta
m) Ninku wuu taah ........................ habaynkii
n) Idinku waad illow ........................ buugaggiinii
o) Iyagu way tookh ........................ mar walba

5. **Summadaha joogto taagani, intay u kala baxdo sheeg?**

Ma ii sheegi kartaa meeshii ay ku kala duwan yihiin?

6. **U beddel weydiinleydaan diiddooley.**

a) Anigu ma seexdaa? ........................
b) Adigu ma maqashaa hadalka? ........................
d) Iyadu ma u dhooftaa Hargeysa? ........................
dh) Isagu ma shaqeeyaa maalin walba? ........................
e) Innagu ma akhrinaa wargeyska? ........................
f) Idinku ma aaddaan fasaxa? ........................
g) Iyagu ma fuulaan fardaha? ........................

7. **U beddel weydiinleydaan sugidley kaddibna diiddo weydiinley.**

a) Anigu ma seexdaa sariirtaan? ........................
b) Isagu ma dhegeystaa raadiyo Muqdishow? ........................
d) Adigu fasax walba ma u dhooftaa Marka? ........................
dh) Iyadu ma ka shaqaysaa bankiga dadweynaha? ........................
e) Innagu ma akhrinaa maalin walba joornaalka Xiddigta Oktoobar? ........................
f) Iyagu ma fuulaan fardaha? ........................

8. **Halkaan waxaad ku dhigtaa astaamaha lagu yaqaanno diiddooleyda joogto taagan?**

1. ............................................................
2. ............................................................
3. ............................................................
4. ............................................................
5. ............................................................
6. ............................................................

A. **Ku dar gadaalraacayaalka sifaynta tixahaan, aadoo gelinaya meesha bannaan, kaddibna labanlaabaya magacyada sifaynta.**

1. Anigu waan degdeg.................................... ahay
2. Naaguhu way qurux .................................... yihiin
3. Gabdhuhu way gaab .................................... yihiin
4. Geedkii wuu qallooc .................................... yahay
5. Dergsui wuu sahal .................................... yahay
6. Walaalahay way yar .................................... yihiin
7. Nimanku way foolxun .................................... yihiin
8. Biyuhu way badan .................................... yihiin
9. Ardaygu wuu buur .................................... yahay
10. Magool way adkeyso .................................... tahay

B. **Dhammaystir tixahaan adigoo ku daraya gadaalraacaha sifaynta ama erayada sifaynta.**

1. Anigu waxaan ahay nin miskiin ....................................
2. Isagu wuxuu yahay nin caqli ....................................
3. Iyadu waxay tahay naag maskax ....................................
4. Ardaygu wuxuu yahay wiil dadaal ....................................
5. Xaliimo waxay tahay gabar dhugmo ....................................
6. Askhir wuxuu yahay caajis ....................................
7. Habboon waxay tahay gabar deeqsi ....................................
8. Kooxda cayaaraha raadiyo Muqdisho waxay tahay koox..........

D. **Geli meelahaan bannaan gadaalraacayaalka sifaynta la', yar, badan ama leh.**

1. Idinku waxaad tihiin niman lacag ....................................
2. Dugsiyadu way macallimiin ....................................

3. Afgooye waa beled geedo ..........
4. Muqdishow waa magaalo baabuur ..........
5. Isagu wuxuu yahay nin xeel ..........
6. Gabadhu waxay tahay gabar tabar ..........
7. Miskiinku wuu lugo .......... yahay
8. Wiilku wuu indho .......... yahay
9. Naaguhu way shaqo .......... yihiin
10. Farasku wuu orod .......... yahay
11. Wiilku wuu caqli .......... yahay
12. Tuugadu way fiiro .......... tahay
13. Iyagu waa niman dhallin ..........
14. Ninkii caqli .......... isaga ayay u roon tahay
15. Haweeneydii shiddo.......... waa la naceb yahay
16. Ardaygii dadaal.......... macallinku wuu jecel yahay.

Dh. **Erayada weydiinleyda intee, immisaa, halkee, xaggee, intee, geli tixahaan.**

a) wiilku .......... jiraa?
b) Isagu .......... jiraa?
d) Caasha .......... jirtaa?
dh) Makaanigyadii .......... jiraan?
e) Iyadu .......... jiraan?
f) Masaajidkii .......... ku yaallaa?
g) macallinkii .......... lekjar ka akhrinayaa?

E. Sifayntu ma leedahay astaamo lagu yaqaanno?
Hadday leedahay ma ii sheegi kartaa? ..........
Sifayn maxaa la yiraahdaa? ..........

**Tixahaan, waxaad u beddashaa, tixo weydiinley ah:**

1. Anigu waxaan ahay dhakhtar ..........
2. Wiilku wuxuu yahay arday ..........
3. Aabbahay wuxuu yahay makaanig yo ellektrijiste ..........
4. Idinku waxaad tihiin beeraley ..........
5. Iyagu waxay yihiin Injiyeerro ..........

**Tixahaan waxaad ka dhigtaa tixo diiddoley ah.**

1. Anigu waxaan ahay Soomaali ..........

2. Idinku waxaad tihiin Talyaani ..........
3. Ninku wuxuu yahay macallin ..........
4. Naagtu waxay tahay shaaqiyad ..........

F. **Meelahaan bannaan waxaad gelisaa weydiinleyda magacuyaallaada, kee, tee, kuwee, kuma tuma amaba kuwama, oo markaas kaddib dhammaystir.**

1. Isagu .......... yahay?
2. Iyadu .......... tahay?
3. Nimanku .......... yihiin?
4. Naaguhu .......... yihiin?
5. Raggu .......... yihiin?
6. Hooyaadaa .......... tahay?
7. Idinku .......... tihiin?
8. Gurigu .......... yahay?
9. Askerigu .......... yahay?
10. Ristoorantingu .......... yahay?

G. **U baddel weydiinley, kaddibna waxaad ka dhigtaa sugidley:**

a) Anigu waxaan hay dhakhtar ..........
b) Ninku wuxuu yahay karraani ..........
d) Iyadu waxay tahay macallimad ..........
dh) Idinku waxaad tihiin reer miyi ..........
e) Innagu waxaan nahay geeljireyaal ..........
f) Iyagu waxay yihiin jeoloojistayaal ..........

H. **Meelahaan bannaan, waxaad gelisaa erayada weydiinleyda ineed (intee, meeqa iyo immisaa).**

1. Anigu .......... sano jira?
2. Isagu .......... bilood jiraa?
3. Idinku .......... galaas dhammayseen?
4. Tiradu .......... tahay?
5. Ariga tiradiisu .......... tahay?
6. Kirada gurigu .......... tahay?

## QAYBTA VII.

## T A G T O

Tagto waa waxa la falay oo tegey mar hore, amaba mar dambe, waxay ku tustaa, wax dhammaaday oo la sameeyey, hal daqiiq oo tagtay, ama hal sano oo tagtay, waa wax tegay. Tagto waa falid dhammaatay.

### Tagto oo tixo la jirta

| Keli | Koox |
|---|---|
| waan teg-**ay** shalay | waan tag-**nay** shalay |
| waad tag-**tay** shalay | waad tag-**teen** shalay |
| wuu teg-**ay** shalay | way tag-**een** shalay |
| way tag-**tay** shalay | |

### Tagto oo misana tixo la wehelisa

1. Guure wuxuu arkay goroyo
2. Asli, waxay aragay shinbir
3. Shinbirihii waxay ka duuleen geedka
4. Libaax ayaa webiga jiinkiisa maray
5. Faras iyo darmaan yar, ayaa ku orday jidka
6. Qarammada Midoobay ayaa shalay shir u fariistay
7. Isbageeti ayaan shalay ku qadeeyey
8. Suleymaan buug cusub ayuu ka soo iibsaday bibliyoteekada
9. Qaylo ayaa dalluun ka yeertay
10. Daad ayaa soo rogmaday.

## ASTAAMAHA TAGTADA

| Keli | Koox |
|---|---|
| 1d (1. dh. ke.) -ay | 1d (ko. dh. 1.) -nay |
| 2d (1. dh. ke.) -tay | 2d (ko. dh. 1.) -teen |
| 3d (1. ke.) -ay | 3d (ko. dh. 1.) -een |
| 3d (dh. ke.) -tay | |

## TAGTO IYO QAYBAHEEDA

1. Qaybta falidaha ku dhammaada shibbaneyaasha (-c, -q, -x, -d, -h, -y, -w)

**Liq**

Waan liq-ay
Waad liq-day
Wuu liq-ay
Way liq-day

Waan liq-nay
Waad liq-deen
Way liq-een

**Wad**

Waan wad-ay
Waad wad-day
Wuu wad-ay
Way wad-day

Waan wad-nay
Waad wad deen
Way wad-een

2. Qaybta falidaha ku dhammaada shaqallada (-o, -i)

**Sii**

Waan sii-yay
Waad sii-say
Wuu sii-yay
Way sii-say

Waan siin-nay
Waad sii-seen
Way sii-yeen

**Daa**

Waan daay-ay
Waad day-say
Wuu daa-yey
Way day-say

Waan dayn-nay
Waad day-seen
Way daa-yeen

3. Qaybta falidaha ku dhammaada shaqalladda (-o)

**Soco**

Waan soc-day
Waad soco-tay
Wuu soc-day
Way soco-tay

Waan socon-nay
Waad soco-teen
Way soc-deen

4. Qaybta falidaha ku dhammaada fallar falideedka (-so)

**Hayso**

Waan hays-tay
Waad hays-atay
Wuu hays-tay
Way hays-atay

Waan haysan-nay
Waad hays-ateen
Way hays-teen

**Noqo**

Waan noq-day
Waad noqo-tay
Wuu noq-day
Way noqo-tay

Waan noqon-nay
Waad noqo-teen
Way noq-deen

**Rayso**

Waan rays-tay
Waad rays-atay
Wuu rays-tay
Way rays-atay

Waan raysan-nay
Waad rays-ateen
Way rays-teen

5. Qaybta falidaha ku dhammaada Shibbanaha (-l)

**Fal**

Waan fal-ay
Waad fa-shay
Wuu fal-ay
Way fa-shay

Waan fal-any
Waad fa-sheen
Way fal-een

**Hel**

Waan hel-ay
Waad he-shay
Wuu hel-ay
Way he-shay

Waan hel-nay
Waad he-sheen
Way hel-een

6. Qaybta falidaha ku dhammaada Shaibbanaha (-g, -s, -n, -r, -b, f)

**Dhis**

Waan dhis-ay
Waad dhis-tay
Wuu dhis-ay
Way dhis-tay

Waan dhis-nay
Waad dhis-teen
Way dhis-een

**Keen**

Waan keen-ay
Waad keen-tay
Wuu keen-ay
Way keen-tay

Waan keen-nay
Waad keen-teen
Way keen-een

7. Qaybta falidaha Qaab-ma qabeyaalka (imow, oollow, aqood, ahow, dheh).

**Imow**

Waan imid
Waad timid

**Dheh**

Waan iri
Waad tiri

Wuu yimid
Way timid

Waan nimid
Waad timaadeen
Way yimaadeen

Wuu yiri
Way tiri

Waan niri
Waad tiraahdeen
Way yiraahdeen

**Ogeysiin:**

Qaybta falidaha tagto iyo joogto taagan, yaynan isaga kaa darmin. Iyagu summadahoodu way isku dhow yihiin, illowse dhammaadka falidaha tagtada, waxaa u danbeeya astaamahan: Sida (-ay, -tay, -nay, -teen, -een). Haddaad aad u fiirsatid kala soocoodu dhib ma laha.

## TAGTO IYO HAWLAHEEDA

### SOCO

**Weydiinley**
Anigu ma soc-day?
Adigu ma soco-tay?
Isagu ma soc-day?
Iyadu ma soco-tay?

Innagu ma soco-nay?
Idinku ma soco-teen?
Iyagu ama soc-deen?

**Sugidley**
Anigu waan soc-day
Adigu waad soco-tay
Isagu wuu soc-day
Iyadu way soco-tay

Innagu waan socon-nay
Idinku waad soco-teen
Iyagu way soc-deen

### SII

Anigu ma sii-yay?
Adigu ma sii-say?
Isagu ma sii-yay?
Iyadu ma siisay?

Innagu ma siin-nay?
Idinku ma sii-seen?
Iyagu ma sii-yeen?

Anigu waan sii-yay
Adigu waad siisay
Isagu wuu sii-yay
Iyadu way sii-say

Innagu waan siin-nay
Idinku waad sii-seen
Iyagu way sii-yeen

Anigu ma fal-ay?
Adigu ma fa-shay?
Isagu ma fal-ay?
Iyadu ma fa-shay?

Innagu ma fal-nay?
Idinku ma fa-sheen?
Iyagu ma fal-een?

Anigu waan fal-ay
Adigu waad fa-shay
Iyadu way fa-shay
Isagu wuu fal-ay

Innagu waan fal-nay
Idinku waad fa-sheen
Iyagu way fal-een

**Diiddoley**

Anigu ma socon (nin)
Adigu ma socon (nin)
Isagu ma socon (nin)
Iyadu ma socon (nin)

Innagu ma socon (nin)
Idinku ma socon (nin)
Iyagu ma socon (nin)

Anigu ma siin (nin)
Adigu ma siin (nin)
Isagu ma siin (nin)
Iyadu ma siin (nin)

Innagu ma siin (nin)
Idinku ma siin (nin)
Iyagu ma siin (nin)

Anigu ma fal-in
Adigu ma fal-in
Isagu ma fal-in
Iyadu ma fal-in

Innagu ma fal-in
Idinku ma fal-in
Iyagu ma fal-in

**Diiddo weldiinley**

Anigu miy-aan-an socon-nin?
Adigu miy-aad-an socon-nin?
Isagu miy-uu-nan socon-nin?
Iyadu miy-ay-nan socon-nin?

Innagu miy-aan-aan socon-nin?
Idinku miy-aad-naan socon-nin?
Iyagu miy-ay-nan socon-nin?

Anigu miy-aan-an siin-nin?
Adigu miy-aad-an siin-nin?
Isagu miy-uu-nan siin-nin?
Iyagu miy-ay-nan siin-nin?

Innagu miy-aan-naan-siin-nin?
Idinku miy-aad-naan siin-nin?
Iyagu miy-ay-nan siin-nin?

Anigu miy-aan-an fal-in?
Adigu miy-aan-an fal-in?
Isagu miy-uu-nan fal-in?
Iyadu miy-ay-nan fal-in?

Innagu miy-aan-naan fal-in?
Idinku miy-aad-naan fal-in?
Iyagu miy-ay-nan fal-in?

**Ogeysiin:**

a) Astaanta tagto diiddoleyda ku dhammaata shibbaneyaasha oo dhan, waxay noqotaa (-in) sida **ma liq-in, ma sheeg-in, ma hadl-in, ma teg-in**.

b) **Astaanta tagto diiddoleyda ku dhammaata shaqallada** oo dhan, waxay noqotaa (-n, -an (nin)) **sida ma socon(nin)** ma **dhegeysan(-nin) ma dayn(-nin) ma siin(-nin) ma haysan(-nin). Sidoo kale ayay noqotaa astaanta tagtada diiddo weydiinleyda.** Sida **(miyaanan teg-in, miyaadan hadl-in miyuunan sheeg-in miyaynan keen-in).**

Fallarka diiddo weydiinleyda nagaadeyaalkana raacaa waa:

| | **Keli** | | **Koox** |
|---|---|---|---|
| 1d | (l. dh. ke.) miy-aan-**an** | 1d | (dh. l. ko.) miy-aan-**naan** |
| 2d | (l. dh. ke.) miy-aad-**an** | 2d | (dh. l. ko.) miy-aad-**naan** |
| 3d | (l. ke.) miy-uu-**naan** | 3d | (dh. l. ko.) miy-ay-**nan** |
| 3d | (dh. ke.) miy-ay-**nan** | | |

TAGTO DAREERTO

VI. **Tagto dareerto waxay ku tustaa falid tagtay oo had iyo jeer dhici** jirtay, amaba ahayd caado in falo. Haddaan iraahdo: «**Waxaan qaadan jiray daawo**» taasi waxay ku tustaa, inaan «**waa tegay**» aan mar walba qaadan jiray daawo. Tagto dareerto **waa falid tagtay, een ku dhammaannin tegiddaas.** Tagto dareerto waxay ka abuurantaa **Falid + falid taageeraha (jir),** summadaha tagtadaasina (-ay, -tay, -ay, -tay, -nay, -teen, -een). Sida «**waan keeni jiray**» «**waad keeni jirtay...**».

TAGTO DAREERTO OO KU JIRTA TIXO

| **Keli** | **Koox** |
|---|---|
| Anigu waxaan **aadi jir-ay** dugsiga | Innagu waxaan **aadi jir-nay** dugsiga |
| Adigu waxaad **aadi jir-tay** dugsiga | Idinku waxaad **aadi jir-teen** dugsiga |
| Isagu wuxuu **aadi jir-ay** dugsiga | Iyagu waxay **aadi jir-een** dugsiga |
| Iyadu waxay **aadi jir-tay** dugsiga | |

## TAGTO DAREERTO OO HADDANA KU JIRTA TIXO

1. Anigu waxaan ka shaqayn jiray bankiga.
2. Shaqaaluhu wuxuu ka shaqayn jiray beerta dugsiga.
3. Ebyan waxay raaci jir-tay baaska.
4. Warsame wuxuu raaci jiray lò.
5. Ardadu waxay ku heesi jirtay af Ingiriis, haddase, waxay ku heestaa Af Soomaali.
6. Geelu wuxuu daaqi jiray meel naq leh.
7. Kacaanku wuxuu horay u marin jirey dalka horukiciisa.
8. Iyagu waxay wax ku qori jireen laabis.
9. Warsan waxay wax ka baran jirtay dugsiga sare.
10. Dhakhtarku wuxuu la diriri jiray cudurrada.

## TAGTO DAREERTO IYO HAWLAHEEDA

### SOCO

| **Weydiinley** | **Sugidley** |
| --- | --- |
| Anigu ma socon jir-ay? | Anigu waan socon jir-ay |
| Adigu ma socon jir-tay? | Adigu waad socon jir-tay |
| Isagu ma socon jir-ay? | Isagu wuu socon jir-ay |
| Iyadu ma socon jir-tay? | Iyadu way socon jir-tay |
| Innagu ma socon jir-nay? | Innagu waan socon jir-nay |
| Idinku ma socon jir-teen? | Idinku waad socon jir-teen |
| Iyagu ma socon jir-een? | Iyagu way socon jir-een |

### SII

| | |
| --- | --- |
| Anigu ma siin jir-ay? | Anigu waan siin jir-ay |
| Adigu ma siin jir-tay? | Adigu waad siin jir-tay |
| Isagu ma siin jir-ay? | Isagu wuu siin jir-ay |
| Iyadu ma siin jir-tay? | Iyadu way siin jir-tay |
| Innagu ma siin jir-nay? | Innagu waan siin jir-nay |
| Idinku ma siin jir-teen? | Idinku waad siin jir-teen |
| Iyagu ma siin jir-een? | Iyagu way siin jir-een |

Anigu ma fali jir-ay?
Adigu ma fali jir-tay?
Isagu ma fali jir-ay?
Iyadu ma fali jir-tay?

Innagu ma fali jir-nay?
Idinku ma fali jir-teen?
Iyagu ma fali jir-een?

### Diiddoley

Anigu ma socon jir-in
Adigu ma socon jir-in
Isagu ma socon jir-in
Iyadu ma socon jir-in

Innagu ma socon jir-in
Idinku ma socon jir-in
Iyagu ma socon jir-in

Anigu ma siin jir-in
Adigu ma siin jir-in
Isagu ma siin jir-in
Iyadu ma siin jir-in

Innagu ma siin jir-in
Idinku ma siin jir-in
Iyagu ma siin jir-in

Anigu ma fali jir -in
Adigu ma fali jir-in
Isagu ma fali jir-in
Iyadu ma fali jir-in

Innagu ma fali jir-in
Idinku ma fali jir-in
Iyagu ma fali jir-in

## FAL

Anigu waan fali jir-ay
Adigu waad fali jir-tay
Isagu wuu fali jir-ay
Iyadu way fali jir-tay

Innagu waan fali jir-nay
Idinku waan fali jir-teen
Iyagu way fali jir-een

## SOCO

### Diiddo weydiinley

Anigu miy-aan-an socon jir-in?
Adigu miy-aad-an socon jir-in?
Isagu miy-uu-nan socon jir-in?
Iyagu miy-ay-nan-socon jir-in?

Innagu miy-aan-naan socon jir-in?
Idinku miy-aad-naan socon jir-in?
Iyagu miy-ay-nan socon jir-in

## SII

Anigu miy-aan-an siin jir-in?
Adigu miy-aad-an siin jir-in?
Isagu miy-uu-nan siin jir-in?
Iyadu miy-ay-nan siin jir-in?

Innagu miy-aan-naan siin jir-in?
Idinku miy-aad-naan sii jir-in?
Iyagu miy-ay-nan siin jir-in?

## FAL

Anigu miy-aan-aan fali jir-in?
Adigu miy-aad-an fali jir-in?
Isagu miy-uu-nan fali jir-in?
Iyadu miy-ay-nan fali jir-in?

Innagu miy-aan-naan fali jir-in?
Idinku miy-aad-naan fali jir-in?
Iyagu miy-ay-nan fali jir-in?

## QAYBTA VIII.

# JIMAYNTA

Jimayntu waa wax, wax lala jimaynayo, qof, qof la ag dhigayo oo laysla siamaayo. Jimayntu waxay ka dhalataa laba magac oo lays ag dhigayo, amaba laysla simayo. Afka Soomaaliga waxaa ku jira **Jimayn** sida afafka kale. Jimayntu waxay u qaybsantaa saddex jimood:

1. **Heer jimaynta**
2. **Heer weheliyaha**
3. **Yool-gaarid**

### 1. Heer jimaynta oo tixo la jirta.

Wiilku **wuu wanaagsan yahay**
Ninku **wuu gaaban yahay**
Geedku **wuu dheer yahay**
Geelu **wuu badan yahay**
Gabadhu **way qurux badan tahay**
Ardadu **way edeb badan tahay**

### 2. Heer weheliyaha Jimaynta (ka wanaagsan yahay).

Wiilku **wuu ka wanaagsan yahay wiilka** ama **(kasii) wanaagsan yahay wiilka.**
Ninku **wuu ka gaaban yahay ninka kale ama (kasii) gaaban yahay ninka.**
Geelaani **wuu ka badan yahay geelaas.**
Gabadhu **way ka qurux badan tahay gabadha kale.**
Ardadu **way ka edeb badan tahay ardada kale.**
Geedku **wuu ka dheer yahay geedka kale.**

### 3. Jimaynta Yool-gaaridda (u, ugu, ugu, sii).

Wiilku **wuu u (ugu, ugu sii) wanaagsan yahay wiilasha dhammaatood.**

Ninku **wuu u (ugu sii) gaaban yahay nimanka.**
Geelaani wuu u **(ugu, ugu sii) badan yahay geelasha dham-maantood.**
Gabadhu way u **(ugu, ugu sii) gaaban tahay gabdhaha dham-maantood.**
Ardadu way u **(ugu, ugu sii) edeb badan tahay ardada dham-maantood.**
Geedku wuu u **(ugu, ugu sii) gaaban yahay geedaha.**

Ogow:

In (**«wanaagsan»**) ay tahay «heer jimayn».
In (ka wanaagsan) ay tahay **«heer weheliyaha jimaynta».**
In (u, ugu) ay tahay **«yool-gaarid heerka».**
In erayga (sii) uu ku tuso **darnaan.** Markaan iraahdo **«Ninku wuu ugu sii xun yahay nimanka».** Taasi waxay ku tusaysaa in xumaatadu ay ugu daran tahay xumaatada ninku xumaa-tooyinka nimanka kale. Erayga **(sii)**, wax ayuu sii adkeeyaa.

## XIRIIRIYEYAALKA

Xiriir waxaa la yiraahdaa wixii wax lagu xiriirinayo amaba wax lagu kabayo. Af Soomaaligu wuxuu leeyahay erayo magacyada iyo tixaha isku xiriiriya. Xiriiriskaasi waa hoggaankii u dhexeeyey erayada amaba tixaha. Xiriiriyeyaalku waxay u qaybsamaan laba qaybood:

1. **Xiriiriyeyaalka magacyada (iyo, mise, ama, (amaba) iwm).**

**Xiriiriyeyaalka magacyada oo ku jira tixo.**

a) Maxamad **iyo** Dhoorre waxay ka yimaadeen Hobyo.
b) Wiil **iyo** gabar ayaa Kooshin soo agmaray.
d) Muqdisho **iyo** Hargeysa, waa laba magaalo oo waaweyn.
dh) Shaah **iyo** caano ii keen.
e) Rooti **iyo** kafee caana leh ii keen.

**Xiriiriyaha magaca (-ba).**

1. Nin wali**ba** qoor iyo xeradiisa**ba,** ayuu qaddar ku yeeshaa.
2. Shinbir**ba** shinbirkiisa ayuu la duulaa.
3. Geed**ba** geedkiis ayuu dhalaa.

4. Hawo iyo hoos galbeedba labadooda midna lama gaaro.
5. War la helaaba talo la helaa ayuu leeyahay.
6. Suldaankaba wax baa la sii baraa.
7. Nin ragihi geeri iyo nololba waa lagu arkaa.

**Xiriiriyaha magaca (mise).**

1. Ma shaah baan kuu keenaa **mase** (mise) kafee?
2. Ma bariis **mise** hilib ayuu doonayaa wiilku?
3. Kee wanaagsan Cabdi **mise** Nuur?
4. Midkee cusub koobkaan **mise** koobkaas?
5. Gurigee ku jirtaa ma kan **mise** kaas?

**Xiriiriyaha (ma ah+ee, ma ahee) oo magaca.**

1. Ninku kan ma **ahee**, waa kan kale.
2. Geedku kan dheer ma **ahee** waa kan gaaban.
3. Wiilashiisu kuwa gaagaaban ma **ahee**, waa kuwa dhaadheer.
4. Hadalka runtiisu sidaan ma **ahee**, waa sidaas.
5. Xaaladdu sidaan kuma qummana **ee** sidaan ayay ku qumman tahay.
6. Warku sidaas iiguma iman, ee si kale ayuu iigu yimid.

**Xiriiriyaha magaca (ama, amase).**

1. Iigu yeer Nuur, **amase** Kaahin.
2. I sii shaatigaan guduudan **amase** kan cad.
3. U gad wiilka koofiyaddaan, **amase** tan cad.
4. Ka qadee baarkaan, **amase** ristoorantigaas.
5. Buuggaan **amase** kaas, kee doonaysaa?
6. Injineernimo **amase** dhakhtarnimo midkee jeceshahay inaad barato?

## II. Xiriiriyeyaalka Tixaha.

Xiriiriyeyaalka tixaha **(intii, goortii, markii, (kolkii)**, ama **(amaba) haddii, meeshii, markaas, kaddib, sidaas daraaddeed, illowse, (laakiinse)**, oo ee, **maxaa yeelay, hase yeeshee, inkastoo, sidaas awgeed, sidaas daraaddeed, iwm).**

1. Xiriiriyaha tixaha (intii).

a) Anigu wax baan baranayaa, **intii** aan ka liibaano,
b) Isagu wuu shaqeeyaa **intii** uu ka daalo.
d) Iyadu wax ayay barataa **intii** ay ka qaybto dersiga.
dh) Ninku wuu hadlaa **intii** uu ka noogo.
e) Geelu biyuhuu cabbaa **intii** uu ka wabxo.
f) Macallinku erayga wuu ku celceliyaa **intii** ay ardadu ka garato.

2. **Xiriiriyaha tixaha (goortii, markii, kolkii).**

a) Faadumo **markii** ay ka baxday aqalka ayaan tegay.
b) Warsame **markii** uu ka dhoofay gagida dayuuradaha ayaan soo noqday.
d) Xaliimo **kolkii** ay hadasho waan iska aammusaa.
dh) Nimankii **kolkii** ay wada yimaadeen ayaa shirkii furmay.
e) **Kolkii** aan hurdada ka kacay ayaa Geelle noo yimid.

3. Xiriiriyaha tixaha ama (amase)...... ama (amase).

a) **Ama** tag..... amase joog!
b) Ama hadal murti leh sheeg....... **ama** iska aammus!
d) Lacagta **ama** i sii...... **amase** iska dayso!
dh) **Ama** bood...... **ama** dhac! wax aan kuu qabanayo lama arko
e) **Ama** i cay.... **ama** i faani, marna hadalkaagu i gelimaayo!
f) **Ama** nala cayaar!...... **amase** iska tag!

4. Xiriiriyaha tixaha (haddii).

a) **Haddii** uu yimaado waan u sheegi doonaa hadalka.
b) **Haddii** uu tago anna waan tegi.
d) **Haddii** uu i nabad gelin waayo waan la diriri doonaa.
dh) **Haddii** ay shaqaysan weydo qofna ma rabo iyada.
e) **Haddii** ay na xumeeyaan annana waan xumeyn doonnaa.

5. **Xiriiriyaha (meeshii) meel.**

a) Cirka **meeshii** aad ka gasho ayaan anna ka geli doonnaa.
b) **Meeshii** lagu qoyo ayaa lagu qallalsadaa.
d) **Meeshii** aad igu sugtid anna waan kuugu imanayaa.
dh) **Meeshii** aad igula ballantid waan kuugu iman doonaa.
e) **Meeshii** aan shalay fadhinay ayaan kuugu iman doonaa.
f) **Meeshi** ay aaddaba, isna wuu u raacaa.

6. **Xiriiriyaha tixaha (markaas kaddib).**

a) Warsan way ila sheekaysatay **markaas kaddib**, ayay iska tagtay.
b) Mahad wuu qadeeyay **markaas kaddib**, ayuu badda aadday.
d) Shineema Xamar ayaan filim ka daawaday, **markaas kaddib** ayaan ka cabbay kafee baar Shabeelle.
dh) Hawshaan dhammee **markaas kaddib**, ayaan wada hadli doonnaa.
e) Si aad ah wax baro **markaas kaddib** ayaad nolosha qiimaheeda ogaan doontaa.
f) Dadka la sheekayso **markaas kaddib**, ayaad garan doontaa qiimaha dadnimada.

7. **Xiriiriyaha tixaha (sidaas daraaddeed).**

a) Isagu mar walba wuu igu qayliyaa, **sidaas** daraaddeed waan necbahay isaga.
b) Ninku naagaha wuu u daran yahay, **sidaas daraaddeed** wuu naago là yahay.
d) War xun ayaa loo soo sheegay, **sidaas daraaddeed** waxaad aragtaa inuu degdegsan yahay.
dh) Ninku wuu cilmi là yahay, **sidaas daraaddeed** ha ka sugin inuu ku afgarto.
e) Geel ayuu dhacay **sidaas daraaddeed**, ayaa loo xiray.
f) Waan daallan nahay **sidaas daraaddeed** ma shaqayn karo.

8. **Xiriiriyaha tixaha, illowse laakiinse, hase yeeshee, hase ahaatee).**

a) Beeraha ayaan galay, **illowse** miro kama guran.
b) Hadalkii waan kuu sheegay, **illowse**, ma aadan garan ujeeddayda.
d) Waxaan iri wax ma haysto, **laakiin** ima aadan rumaysan.
dh) Dugsigii waa la furay, **hase yeeshee**, isagu muusan tegin.
e) Dadka waad waanisaa, **hase ahaatee**, adigu ma waansanid.
f) Iyadu way shaqaysaa, **waxayse** qaadataa lacag yar.

9. **Xiriiriyaha tixaha, (oo, ee) (-na, ba).**

a) Seexo **oo** ha qaylin!
b) I dhegeyso **oo** wax baro!
d) Shaaha cabb **ee** iska tag!
dh) Fariiso oo waxba**ba** ha ii sheegin!
e) Gacmaha ka shaqee maskaxda**na** ku dar!
f) Beerta bannee, dhirta**na** wax ha u dhimin!
g) Hilibka cun **oo** Cabdi wax ka sii!

10. **Xiriiriyaha tixaha maxaa yeelay, waayo, maxaa wacay iwm.**

a) Xasan wuu iska tegay, **maxaa yeelay,** waad ka caraysiisay.
b) Lacagtu way ka dhammaataa isaga **maxaa yeelay,** khamrada ayuu cabbaa!
d) Dugsi ma dhigan karo **maxaa wacay,** waan bukaa!
dh) Shalay kuuma iman **waayo,** waxaan lahaa hawl!
e) Xalay wuu dhaxay **waayo,** roob ayaa jidka ku helay!
f) Gurigii hore waannu ka baxnay, **maxaa wacay** nal iyo biyo muusan lahayn.

**Ogeysiin:**

Xiriiriyayaalkaas waxaa weheliya kuwo kale. Kuwaasi waa: (ilaa, teer iyo inta, inkasta, si kasta, in ayaa, waa baa, xataa, yaa, iwm).

## TIMAADDO DHOWEY (TIMAADDO DHOWIDLEY)

Timaaddo dhowey, waa falid dhow oo gadaal mar dhow ka imaanaysa, daqiiqad, saacad, maalin, bil ama laba bilood, amase sannad. Af Soomaaligu wuxuu leeyahay timaaddo dhowey sida afaf kale. Timaaddo dhowey waxay la mid tahay joogto dareerto. Joogto dareerto waa falid hadda hawsheeda faraha lagu hayo amaba mar dhow la qaban doono.

## TIMAADDO DHOWEY OO LA JIRTA TIXO

### CAB

| **Keli** | **Koox** |
| --- | --- |
| Anigu waxaan cabbayaa biyo | Innagu waxaannu cabbayna biyo |
| Adigu waxaad cabbaysaa biyo | Idinku waxaad cabbaysaan biyo |

| | |
|---|---|
| Isagu wuxuu cabbayaa biyo | Iyagu waxay cabbayaan biyo. |
| Iyadu waxay cabbaysaa biyo | |

**Ogeysiis:**

Timaaddo dhowey iyo joogto dareerto falidahoodu waqtiga kuma kala soocna, illowse waxay ku kala soocan yihiin astaamaha. Haddaan irahdo, «waan shaqaynayaa», waxay noqon kartaa shaqo hadda amaba hadhow aan qabanayno. «Samatar wuu imaanayaa hadda», «Samatar wuu imaanayaa berrito». waa la oran karaa! Labada eray, «hadda», hadhow», waxay kala saaraan waqtiga muddayntiisa. Labadaas eray qofku tusaale badan ayuu ka bixin karaa isagoo garanaya ujeeddada erayadaas. **Mar dhow, hadhow, goor dhow, kol dhow, saaddanbe, toddoobaadkaan, bishaan, gùgaan, dayrtaan, sanada dhow.**

Erayadaas oo dhammi waxay ku tusayaan timaaddo dhowey.

## TIMAADDO FOGEY (Timaaddo Fogidley)

Timaaddo fogey ama timaaddo fogidley, **waa timaaddo gadaal ka imanaysa, illowse, lama yaqaanno goortay bilaabanayso. Waa timaaddo mar danbe bilowgeeda, asaan xad** lahayn lagu yaqaanno bilowgeeda. Timaaddo dhowey iyo timaaddo fogey, xad u kala go'an lama arko. Qofku wuu dhihi karaa: **«Anigu waan tegi doonaa berri»,** amaba **«Anigu waan tegayaa berri. «Labadaas tee fog, teese dhow?** Jawaabtu hadba **waxay ku xiran tahay qofka hadlaya siduu dhowaan iyo fogaan ka dhigto, amaba ulajeeddo, berriyu qofna way la dhowaan kartaa, qofna way la fogaan kartaa.**

Timaaddo fogey **(timaaddo fogidley) oo tixa ku jirta**

TAG

| Keli | Koox |
|---|---|
| Anigu waan tegi **doonaa** Marka | Innagu waan tegi **doonnaa** Marka |
| Adigu waad tegi **doontaa** Marka | Idinku waad tegi **doontaan** Marka |
| Isagu wuu tegi **doonaa** Marka | Iyagu way tegi **doonaan** Marka |
| Iyadu way tegi **doontaa** Marka | |

## GEE

**Keli**

Anigu waan geyn **doonaa** alaabta
Adigu waad geyn **doontaa** alaabta
Isagu wuu geyn **doonaa** alaabta
Iyadu way geyn **doontaa** alaabta

**Koox**

Innagu waan geyn **doonnaa** alaabta
Idinku waad geyn **doontaan** alaabta
Iyagu way geyn **doonaan** alaabta

## KEEN

Anigu waan keeni **doonaa** Buugagga
Adigu waad keeni doontaa Buugagga
Isagu wuu keeni **doonaa** Buugagga
Iyadu way keeni **doontaa** Buugagga

Innagu waan keeni **doonnaa** Buugagga.
Idinku waad keeni **doontaan** Buugagga
Iyagu way keeni **doonaan** Buugagga

## SII

Anigu waan ku siin **doonaa** beer
Adigu waad i siin **doontaa beer**
Isagu wuu i siin **doonaa** beer
Iyadu way ku siin **doontaa** beer

Innagu waan ku siin **doonnaa** beer
Idinku waad na siin **doontaan** beer
Iyagu way idin siin **doonaan** beer

## QABO

**Keli**

Anigu waan qaban **doonaa** hawsa
Adigu waad qaban **doonaa** hawsha
Isagu wuu qaban **doonaa** hawsha
Iyadu way qaban **doontaa** hawsha

**Koox**

Innagu waan qaban **doonnaa** hawsha
Idinku waad qaban **doontaan** hawsha
Iyagu way qaban **doonaan** hawsha

**Ogeysiis:**

Haddii aad damacdid inaad abuurto timaaddo fogey, falidda salka ah, (sii, keen, qabo, tag, gee) waxaad ku daraysaa summadda dhammaadka timaaddo fogey; sidaan oo kale (tegi+doonaa, -+doonnaa, +doonnaa, +doontaan, +doonaan = tegi doonaa, -doontaa, -doonaan). Haddii uu ku dhammaado shibbanaha, falidda iyo summadda dhammaadka, waxaa kala dhexgala shaqallada (i) oo xiriir fooneetig ah, sida (keen-i- doonaa-keen-i-doontaan). Hddiise eraygu ku dhammaado shaqallada (-i, -sii, -a, daa, -e, samee) falidda iyo summadda dhammaadka, waxaa kala dhexgala shibbanaha (-n) oo xiriirka dhawaaqa ah, sida samay-n-doonaa, day-n-doontaa soco-n-doonaa, sii-n doonnaa, jebi-n-doontaan).

**Timaaddo fogey (Timaaddo fogidley)**

| **Falidda**<br>sii, keen | **Xiriirka dhawaaqa**<br>(-n-, -i-) | **Summad dhammaadka**<br>(-doontaa, -doonaa) |
|---|---|---|
| ilaali- | -n- | -doonaa |
| ilaali- | -n- | doontaa |
| ilaali- | -n- | -doonaa |
| ilaali- | -n- | doontaa |
| ilaali- | -n- | -doonnaa |
| ilaali- | -n- | -doontaan |
| keen- | -i- | -doonaa |
| keen- | -i- | -doontaa |
| keen- | -i- | -doonaa |
| keen- | -i- | -doontaa |
| keen- | -i- | -doonnaa |
| keen- | -i- | -doontaan |
| keen- | -i- | -doonnaan |
| samee- | (-y-n-) | -doonaa |
| samee- | (-y-n-) | -doontaa |
| samee- | (-y-n-) | -doonaa |
| samee- | (-y-n-) | -doontaa |
| samee- | (-y-n-) | -doonnaa |
| samee- | (-y-n-) | -doontaan |
| samee- | (-y-n-) | -doonaan |

## TIXDA

Waan ilaalin doonaa guriga
Waad ilaalin doontaa guriga
Way ilaalin doontaa guriga
Wuu ilaalin doonaa guriga
Waan ilaalin doonnaa guriga
Waad ilaalin doontaan guriga

Waan keeni doonaa alaabta
Waad keeni doontaa alaabta
Wuu keeni doonaa alaabta
Way keeni doontaa alaabta

Waan keeni doonaa alaabta
Waad keeni doonaan alaabta
Way keeni doonaan alaabta

Waad sameyn doontaa hawsha
Wuu sameyn doontaa hawsha
Way samayn doontaa hawsha

Waan samayn doonaa hawsha
Waad sameyn doontaan hawsha
Way sameyn doonaan hawsha

## TIMAADDO FOGEY IYO HAWLAHEEDA

### SOCO

**Weydiinley**

Anigu ma socon doonaa?
Adigu ma socon doontaa?
Isagu ma socon doonaa?
Iyadu ma socon doontaa?

Innagu ma socon doonnaa?
Idinku ma socon doontaan?
Iyagu ma socon doonaan?

**Sugidley**

Anigu waan socon doonaa
Adigu waad socon doontaa
Isagu wuu socon doonaa
Iyadu way socon doontaa

Innagu waan socon doonnaa
Idinku waad socon doonaan
Iyagu way socon doonaan

SII

Anigu ma siin doonaa?
Adigu ma siin doontaa?
Isagu ma siin doonaa?
Iyadu ma siin doontaa?

Innagu ma siin doonnaa?
Idinku ma siin doontaan?
Iyagu ma siin doonaan?

Anigu waan siin doonaa
Adigu waad siin doontaa
Isagu wuu siin doonaa
Iyadu way siin doontaa

Innagu waan siin doonnaa
Idinku waad siin doontaan
Iyadu way siin doontaa

SOCO

**Diiddoley**

Anigu ma socon doono
Adigu ma socon doontid
Isagu ma socon doono
Iyadu ma socon doonto

Innagu ma socon-doonno

Idinku ma socon-doontiin (doontaan)
Iyagu ma socon-doonaan

**Diiddo weydiinley**

Anigu miy-aan-an socon doonin?
Adigu miy-aad-an socon doonin?
Isagu miy-uu-nan socon doonin?
Iyadu miy-ay-nan socon doonin?

Innagu miy-aan-naan socon-doonin?
Idinku miy-aad-naan socon-doonin?

Iyagu miy-ay-nan socon-doonin?

SII

Anigu ma siin-doono
Adigu ma siin-doontid
Isagu ma siin-doono
Iyadu ma siin-doonto

Innagu ma siin-doonno
Idinku ma siin-doontaan (doontiin)
Iyagu ma siin-doonaan

Anigu miy-aan-an siin-doonin?
Adigu miy-aad-an siin-doonin?
Isagu miy-uu-nan siin-doonin?
Iyadu miy-ay-nan siin-doonin?

Innagu miy-aan-naan siin-doonin?
Idinku miy-aad-naan siin-doonin?

Iyagu miy-ay-nan siin-doonin?

**Ogeysiin:**

a) Astaanta dhammaadka timaaddo fogey diiddoleyda, waxay noqotaa keli (-doono, -doontid, -doonto, -doono), iyo koox

(-doonno, -doontaan (doontiin), -doonaan) sida ma tegi-doo-
-doontid, doonno, -doontaan.

b) Astaanta dhammaadka timaaddo fogey diiddoleyda, waxay noqotaa (-doonin), (miy-aan-an, socon-doonin, may-aad-an socon-doonin, -miy-uu-nan socon-doonin, -miy-ay-nan socon-doonin, miy-ayn-nan socon-doonin). Astaantani waa mid joogto ah oo aan beddelmin.

## QAYBTA IX.

## F A L E

Fale waxaa la yiraahdaa, wixii wax falay. Sida aan ognahay wax kastoo dhacaa, wax bay ka dheceen. Wax la falana wax baa fala. Haddaan iraahdo «**qalinkii ayaa jabay**». Taasi waxay ku tusaysaa in wixii jabay uu yahay qalin. Jabiddu ma jirteen haddaan qalinku jirin. Sidoo kale haddaan iraahdo, «**Daruur baa curatay**». Taasi waxay ku tusaysaa wixii curtay, inay yihiin daruur, maxaa yeelay haddaan daruurtu jirin curashadu ma jirteen. Sidaas daraaddeed, **daruurtii** iyo **qalinkii** waxay noqdeen (fale). **Curashada** waxaa falay daruurta; jabidduna waxay ka timid qalinka. Marka sidaas daraaddeed, **daruurtii** iyo **qalinkii**, waxay noqdeen fale.

### FALAHA OO KU JIRA TIXO

**Anigu waan** tegay maanta
**Adigu waad** tagtay shalay
**Geelle wuu** dabaashay
**Magool way** heestay
**Baabuurkii wuu** rogmaday
**Fay waxay** ka baxday dugsiga
**Shinbirtii** way duushay
**Geelii wuu** wabxay
**Inammadii way** tageen
**Askerigii wuu** istaagan yahay
**Saaxiibkay Yuusuf wuu** dhoofay

**Magool waxay u dhooftay** Hargeysa.

Tixahaan haddaad aad u dhuuxdid, waxaad ku arkaysaa in faluhu yahay, **anigu, waan, adigu, waad, geelle, wuu, Magool; way, baabuurkii, wuu, Fay, way, shinbirti, way, geelii, wuu, inammadii, way, askerigii, wuu** iyo **saaxiibkay Yuusuf wuu.**

### MANAGAADEYAALKA IYO NAGAADEYAALKA

Managaadeyaalku iyo nagaadeyaalku waxay yihiin fale tixahaan. Sidoo kale magacyada wax u go,an (Fay, Geelle, Magool) dhammaan-

[..]ood, waxa weeye **fale.** Af Soomaaliga waxuu kaga duwan yahay [..]afka kale, waxa weeye, **in magaca wax-u-go'an, -sida Mgaool- iyo nagaadeyaalku ay is-wada raacaan.** Waxaa ka mid ah, haddaan iraado: **«Magool way timid».** Tixdaan «Magool» iyo «way» labaduba, waa **fale.** Nagaadeyaalku waxay ka joogi karaan magac kasta ama ha [..]haadee, mid wax u go'an, amase, ha ahaadee midaan wax u go'nayn.

## LA - FALE

La fale waxaa la yiraahdaa wixii wax lagu falay. Haddaan iraahdo **«Baabuur ayaan soo waday»** waxay ku tusaysaa wixii aan soo waday inuu yahay baabuur, kii wadayna inuu yahay aniga. Ama haddaan iraahdo, **«waxaan dilay libaax»** wixii wax dilay waa aniga, wixii la dilayna waa libaax. Haddaanan wax falin, libaaxa lama dileen, haddaan libaax jirinna; wax dilidu ma jirteen, haddaanan jirinna falidu ma jirteen. Anigu iyo libaaxa waxaa noo dhexeeya (falid). Marka sidaas daraaddeed, anigu waxaan ahay **fale,** libaaxuna wuxuu yahay la-fale.

## LA-FALE OO TIXO KU JIRA

Anigu waxaan dilay **mas**
Isagu wuxuu cunay **hilib**
Yaanyuurtu waxay cayrisay **jiir**
Ardadu waxay baranaysaa **dersiga**
**Hooyaday** ma aragtay?
Daanyeerku wuxuu cunayaa **muus**
Gabdhuhu waxay aadayaan **Dugsiga**
Raage wuxuu gadaa **Dukaan**
Ratigu **geed** ayuu daaqayaa
Macallinku wuxuu dhigayaa **dersiga**

Erayada **mas, hilib, jiir, dersiga, hooyaday, muus, dugsiga, dukaan, geed,** waxay ku tusaan in ay yihiin la-fale. Iyaga ayaa faliddii la faluhu ku dhacaday.

**Ogeysiis:**

**La-falaha iyo falaha, waxaa u dhexeeya falid. Taasina waxay ka timaaddaa falidaha qaarkood. Falidahaas, waxaa lagu magacaabaa falidaha-gudbinta.** Falidaha gudbinta, waxa weeye: **cun, dil, baro, arag, samee, aad, gad, iibi, dhig, cab,** sii, iyo ku-wa kale.

## FALAHA QOFMAQABAHA (LA, LOO)

Falaha qof ma qabaha ahi, waa falihii wax falay oo aan la aqoon, amaba noqon kara falihii qof kasta. Falaha qofmaqabuhu (La, Loo) fale kasta ayuu ka joogaa oo aan la aqoon. Sidaas daraad-deed, waxaa lagu magacaabay **qofmaqabaha.** Qof-ma-qabaha (la, iyo loo) waxay ka joogi karaan keli iyo kooxba.

**«Raggii loo yeer».** Tixdaan waxaan ku aragnaa, in raggii loo yeeray. Qofkiise u yeeray, ma naqaan. Wixii u yeeray waa noqon karaan koox iyo keli. Raggii rag, waa u yeeri karaan, qofna waa u yeeri karaa, sidaas daraaddeed qof-ma-qabuhu wuxuu ka joogi karaa keli ama koox.

## FALAHA QOFMAQABAHA OO TIXO KU JIRA

a) Wiil baa shalay **laga** saaray Dugsiga
b) Guryo ayaa **la** dumiyey
d) Biyo ayaa **la** cabbay
dh) **La** iibi baabuurtii
e) **La** kala bax dhallin iyo waayeel
f) **Laysku** sheeg ninka
g) **Laysku** arag meesha
h) Beenti **layska** diid
x) **Lays** wada arag
i) **La** wada kala aammus
j) Nimankii hadalkii **loo** wada sheeg
k) Ardadii Dugsigii **loo** dhis
kh) Warsame, **loo** keen buuggii
l) Ciidankii **loo** dig shalay

## QAAB ERAYEEDKA AF SOOMAALIGA

Af Soomaaligu sida afafka qaarkood ma leh **qaab erayeed.** Taas waa mid uu kaga duwan yahay afafka qaarkood. Sidaas daraaddeed, tixaha Af Soomaaliga saddex siyaalood ayaa loo dhisi karaa.

I. Waxaa suurtowda in tixaha falidda lagu horumariyo, lafalahana lagu xijiyo, faldduna u danbayso sida tixahaan.

## DHISMADA TIXAHA

| Fale | La-fale | Nagaadeyaalka | Falidda |
|---|---|---|---|
| Guleed | Libaax | ayuu | dilay |
| Warsame | Ukun | ayuu | cunay |
| Ilaaladii | ayax | ayay | sumaysay |
| Wiilku | Baabuur | ayuu | wadaa |
| Anigu | Warqad | ayaan | qoray |
| Ardadu | **Dugsigii** | ayay | aadaysaa |
| Hillaacu | dhulka | ayuu | iftiiminayaa |
| Beentu | dadka | ayay | ka nixisaa |
| Runtu | dadka | ayay | ka farxisaa |
| Kaahiye | raadiyaha | ayuu | dhegeystaa |
| Gabadhu | soor | ayay | karinaysaa |
| Idinku | wax | ayaad | barateen |

II. Waxaa suurtowda oo kale tixaha Af Soomaaliga, in la-falaha la horumariyo, nagaadeyaalkana lagu xijiyo, falidduna ku xigsato, magacuna ku xigo.

## DHISMAHA TIXAHA

| La-falaha | Nagaadeyaalka (falaha) | Falid | Magaca (falaha) |
|---|---|---|---|
| Iibaax | ayuu | dilay | Warsame |
| Ukun | ayuu | cunay | Guleed |
| Ayax | ayay | sumeysay | ilaaladii |
| Baabuur | ayuu | waday | wiilkii |
| Warqaddii | ayaan | qoray | anigu |
| Dugsigii | ayay | aadaysaa | ardadu |
| Dhulka | ayuu | iftiimiyaa | hillaacu |
| Dadka | ayay | ceebaysaa | beentu |
| Raadiyaha | ayuu | dhegeystaa | Kaahiye |
| Soor | ayay | karinaysaa | gabadhu |
| Wax | ayaad | barateen | idinku |
| Dadka | ayay | ka nixisaa | runtu |

## DHISMAHA TIXAHA

III. Waxaa kaloo haddana suurtowda in la-falahana la hormariyo, magacyadana lagu xijiyo, nagaadeyaalkuna ku xigsadaan, falidduna u danbayso.

| **La-falaha** | **Magaca** (fale) | **Nagaadeyaalka** (fale) | **Falidda** |
|---|---|---|---|
| Libaax | Warsame | ayuu | dilay |
| Ayax | Guuleed | Ayuu | sumeeyey |
| Warqad | anigu | ayaan | qoray |
| Baabuur | wiilku | ayuu | wadaa |
| Dugsiga | ardadu | ayay | aadaysaa |
| Dhulka | hillaacu | ayuu | iftiimiyaa |
| Dadka | runtu | way | ka nixisaa |
| Dadka | beentu | way | ceebaysaa |
| Raadiyaha | Kaahiye | wuu | dhegaystaa |

| Falaha maga-cuyaalka nagaadiyaha, ama managaadiyaha | Qodb. maga-cuyaalka nagaadiyaha, ama managaadiyaha | Jaangooyo xaaladleyda falaha | Nagaadiyaha | Falidda | La-falaha ama amagaca wa-u-go'an | Qodbaha | Jaangooyo xaaladleyda la'falaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Guuleed | | | wuu | dilay | libaax | — | -ii |
| Ani- | -g- | -u | waxaan | aaday | Marka | — | — |
| Ciise | | | wuxuu | shubay | ceel- | -k- | -ii |
| Cabdi | — | — | wuxuu | keenay | alaab- | -t- | -ii |
| Iya- | -d- | -u | waxay | qortay | warqad- | -d- | -a |
| Hillaac- | — | u | wuxuu | iftiimiyaa | dhul- | -k- | -a |
| Iya- | -g- | -u | waxay | aadeen | Dugsi- | -ga- | -a |
| Warsame | — | — | wuxuu | akhriyay | buug- | -g- | -a |
| Xaali | — | — | waxay | cabbtay | shaah | — | — |
| Waraabi- | -h- | -ii | wuxuu | dilay | ha- | -sh | -ii |
| Macallin- | -k- | -u | wuxuu | dhigay | dersi- | -g- | -ii |
| Injiyeer- | -k- | -u | wuxuu | dhisay | guri- | -g- | -ii |
| Adi- | -g- | -u | waxaad | tagtay | baar- | -k- | -ii |
| Nin- | -k- | -u | wuxuu | waday | baabuur- | -k- | -ii |
| Haweenay- | -d- | -u | waxay | xaaqday | aqal- | -k- | -ii |
| Raadiyu- | -h- | -u | wuxuu | sheegay | war- | -k- | -ii |
| Beeraley- | -d- | -u | waxay | fashay | beeri- | -h- | -ii |
| Wiil- | -k- | -u | wuu | keenay | lacag- | -t- | -ii |
| Xaliimo | — | — | waxay | karisay | soor | — | — |
| Inan- | -k- | -u | wuxuu | jebiyay | koomow- | -g- | -ii |
| Askeri- | -g- | -u | wuxuu | ilaalinayaa | banki- | -g- | -a |
| Gabadh- | — | -u | waxay | u socotaa | suuq- | — | -a |
| Wiil- | -k- | -u | wuxuu | ka shaqeeyaa | warshad- | -d- | -a |
| Ari- | -g- | -u | wuxuu | ka cabbayaa | balli- | -g- | -a |
| Ciidan- | -k- | -u | wuxuu | daafacayaa | dhul- | -k- | -a |
| Walaalkay | — | | wuxuu | seexday | laba- | -d- | -a saac |
| Xaas- | -k- | -u | wuxuu | ka qadeeyay | Huteel- | -k- | -a Jubba |
| Niman- | -k- | -u | waxay | galeen | shineema- | -d- | -a Shabeelle |
| Makaaning- | -g- | -u | wuxuu | fuulay | Fatuurad- | -d- | -ii |

## LA-FALAHA QOF QABAYAALKA

Magacuyaallada managaadeyaalka ahi (aniga, adiga, isaga, iyada, idinka, iyaga) waxay fariistaan jagada lafalaha, inkastoo marmarka qaarkood laga digtoonaan karo iyaga. Hase yeeshee qofku markuu ku isticmaalo nagaadeyaal (waan, waad, wuu, way) iyo managaadeyaalka, tixda way adkeeyaan, sida **«Anigu waan tegayaa maanta».** Tixdaan waxaan ku isticmaalay managaadaha (anigu) iyo nagaadaha (waan) **oo isla jira. Isla jiriddoodu** waxay ku tustaa adkaynta tixda. Managaadeyaalku, waxay fariistaaan jagada falaha, sida **(Anigu waan tegayaa»**, iyo jagada la-falaha; sida **(Caasha waxay igu tiri aniga** iska tag!) Tixdaan waxaad ku aragtaa, in erayga **«aniga»**, uu fadhiyo jagada la-falaha. La-falaha qof qabeyaalka managaadeyaalku waxay qaataan xaaladda jaangooyada (-ii, -a) sida, **«Isagu, wuxuu i yiri aniga iska tag»!** ama **«Isagu wuu i yiri anigii iska tag»!** Sidaas daraaddeed managaadeyaalku **aniga, adiga, isaga, iyada, idinka, innaga, iyaga)**; waxay noqdaan **lafalaha** qof **qabeyaalka.**

La-falaha qof qabeyaalku waxay u qaybsamaan saddex qaybood:

I. Qalbta lafalaha qof qabeyaalka managaadeyaalka (**aniga, adiga, isaga, iyada, innaga, idinka, iyaga**).

II. Qaybta lafalaha qof qabeyaalka:

| | | |
|---|---|---|
| | Isaga | |
| **(ii, kuu, u** | Iyada | noo, idiin |
| | Iyaga | |

III. Qaybta lafalaha qof qabeyaalka (**i, ku, isaga, iyada, na, idin**).

I. **Lafalaha qof qabeyaalka managaadeyaalka** (aniga, adiga, isaga, **iyada, innaga, idinka, iyaga)** oo tixo ku jira:

a) Cabdi wuxuu ii keenay **(aniga)** buug
b) Anigu waxaan ku iri **(isaga)** «iska tag!»
d) Iyadu waxay kuu sheegtay **(adiga)** war
dh) Wiilku wuxuu siiyay **(iyada)** lacag
e) Nimanku waxay nagu waaniyeen (innaga) «wax barta».
f) Wiilashu waxay idin ku yiraahdeen (idinka) hadal qoto leh.
g) Inanku wuxuu u sheegay **(iyaga)**, in Xasan yimid.

Ogeysiin:

Ogow, in lafalaha qof qabeyaalka managaadeyaalka laga deeqtoonaan karo oo tixahaas kor ku yaalla iyaga laga bixin karo. Markii iyaga laga bixiyo tixaha, macnahoodu doorsoomi maayo. Haddiise aan laga bixin iyaga tixaha, **waxay ku tusayaan adkaynta tixaha.**

II. **Lafalaha qof qabeyaalka** (ii, kuu, u, isaga, iyada, iyaga, noo, idiin) oo ku jira **tixo:**

a) Isagu wuxuu **ii** sheegay hadal
b) Isagu wuxuu **kuu** sheegay hadal
d) Iyadu waxay **u** sheegtay (isaga, iyada, iyaga,) hadal
dh) Iyagu waxay **noo** sheegeen hadal
e) Anigu waxaan **idiin** sheegay hadal

III. Lafalaha qof qabeyaalka **(i, ku, isaga, iyada, na, idin, iyaga)** oo tixo ku jira:

a) Buug **i** sii. Wax i bar
b) Isagu wuxuu **ku** yiri «iska tag»!
d) Dhar ayaan siiyay **isaga**
dh) Isagu wuxuu maqlay **iyada** hadalkeeda
e) Wiilku wuu **na** maqlay
f) Macallinku wax ayuu **idin** baray
g) Faarax wuxuu siiyay **iyaga** buugag

## (I) LAFALAHA QOFQABEYAALKA

| **Keli** | **Koox** |
|---|---|
| 1d (l. dh. ke.) **ii** | 1d (l. dh. ko.) **noo** (wadajir) |
| 2d (l. dh. ke.) **kuu** | 2d (l. dh. ko.) **idiin** (kala-jir) |
| 3d (l. ke) **u(isaga)** | 3d (l. dh. ko.) **u(iyaga)** (kala-jir) |
| 3d (dh. ke.) **u-(iyada)** | |

## (II) LAFALAHA QOFQABEYAALKA

| **Keli** | **Koox** |
|---|---|
| 1d (l. dh. ke.) i | 1d (l. dh. ko) **na**(wadajir) |

| | |
|---|---|
| 2d (l. dh. ke.) **ku** | 2d (l. dh. ko.) **idin** (kala jir) |
| 3d (l. ke.) **Isaga** | 3d (l. dh. ko.) **iyaga** (kala-jir) |
| 3d (dh. ke.) **Iyada** | |

**Ogeysiin:**

La-falaha qof qabeyaalka qaybta labaad, falidaha ay raacaan waxaa weeye: **keen, jebi, gad, iibi, dir, dhis, kari, shiil, amaahi, jeex, gorgori, naadi, dab, heensee, sheeg, kexee, kaydi, dhaq, fur, xir, aqool, loog, samee,** iyo kuwa kale oo badan.

Lafalaha qof qabeyaalka qaybta saddexaad, falidaha ay raacaan waxa weeye: **dheh, sii, gee, tus, jeclow, necbow, maqal, dhegayso, ximi, basaas, sheeg, fal, sixir, waal, dhib, lur, kexee, fuul, fariisi, dil, qaxar, wanaaji, bar, cayri, xishood, caraysii, farxi, calwi, nab, qayli, geesinimo-geli, ka nixi, ka baq, daa, ammaan-geli, ceebee, abaaldar, sir, wareeri,** iyo kuwa kale oo badan.

Ogow in falidaha qaybta labaad oo qof qabeyaalka qaarkood iyo kuwa qaybta saddexaad qaarkood, inay geli karaan qayb walba. Falidaha qayb walba galaa, way badan yihiin. Falidahaasi waxa weeye: sheeg, amaahi, gee, samee, kexee, weyddii, fur, jebi, iibi, gad iyo kuwa kale oo badan.

Haddaan iraahdo: «**Guriga i tus**», iyo haddaan iraahdo; «**Guriga wiilka ii tus**». Labadaas tixood, macnaha way kala duwan yihiin, in kastoo tixuhu isu eg yihiin. Labadaas tixood, waxay ku kala duwan yihiin, waxa weeye, qof qabaha lafalaha (ii, iyo i,). **Guriga wiilka ii tus,** waxa weeye, asxaan ii samee, oo anigu ma tagi karee, adigu wiilka guriga ii tus. **Qaybta labaad** oo qofqabeyaalku waxay ku tusaan hawl qof-qof u qabanayo, amaba qof-qof asxaan u falaya. Waxaa kaloo haddana ka mid ah tixda «**I gee guriga**» iyo «**Ii gee wiilka guriga**» iyo «**I amaahi lacag**» iyo «**Ii amaaho lacag**» iyo «**I sii shaah**, iyo «**Ii sii wiilka shaah**».

## QAYBTA X.

## JAGO HORJOOGAYAASHA AF SOOMAALIGA

Jago horjoogayaasha Af Soomaaligu waxay ka horreeyaan falidaha, magacyadana, way ka danbeeyaan, amaba, way la xiriiraan. Sidaas daraaddeed, ayaa waxaa lagu magacaabay **Jago horjoogayaalka.** Jago horjoogayaalku markii ay keligood yihiin wax macna ah oo ay leeyhihiin lama arko, markii ay tixda ku jiraanse, macno ayay leeyihiin, amaba ku tusaan. Haddaan iraahdo:

**«Kaahiye wuxuu ku jiraa dugsiga».** Erayga jago horjoogaha ahi (ku), wuxuu na tusayaa jagada Kaahiye joogo. **Hawsha jago horjoogayaalku, waxa weeye, inay muujiyaan jagada wax keliya, tixdana, ay dhammaystiraan.** Jago horjoogayaalku waxay u qaybsamaan saddex qaybood:

I. **Kuwo magaca ka danbeeya amaba ka horreya.**

II. **Kuwo falidda ka horreeya amaba ka mid noqday xubinta falidda.**

III. **Kuwo falidda ku darsamay ee ka mid noqday falidaha.**

I. Kuwo magaca ka danbeeya (**guriga agtiisa, guriga gadaashiisa, guriga dhinaciisa, guriga korkiisa, guriga wareeggiisa, guriga kaadkiisa, guriga barbarkiisa, guriga geestiisa, guriga gasadiisa,** iyo kuwa kale oo badan). Jago horjoogayaalka, waxaa gadaal ka raaca magacuyaallada lihiga (-ay, -aa -iisa, -eeda, -eenna, -ooda, -iinna).

### JAGO HORJOOGAYAALKA MAGACA KA DANBEEYA

a) Kooshin wuxuu fadhiyaa guriga **agtiisa.**
b) Khadiijo waxay seexataa aqalka **gudahiisa.**
d) Ardadu waxay ku cayaaraysaa dugsiga **dabadiisa.**
dh) Baabuurku wuxuu taagan yahay ristoorantiga **horaydiisa.**
e) Baarku wuxuu ku yaallaa huteelka **dhinaciisa.**
f) Baasku wuxuu ku socdaa jidka **bartankiisa.**
g) Inanku wuxuu marayaa jidka **dhexdiisa.**

h) Ninku wuxuu martida ku sooraa guriga **gasadiisa.**
x) Koobkii wuxuu saaran yahay miiska **korkiisa.**

II. **Jago horjoogayaalka falidda ka horreeya, amaba ka mid noqday xubnaha falidda oo ku jira tixo.**

a) Anigu waxaan **ku kalsoonahay** arrinta.
b) Isagu wuxuu **ka baqay** inuu ku dhaco imtixaanka.
d) Iyadu waxay **ka xishootay** inay caydo ninka.
dh) Ninku wuxuu **ku siray** naagta hadal macaan iyo been run u eg.
e) Xubnaha baabuurku waxay **u qaybsamaan** dhawr qaybood.
f) Lacagtii bankigu wuxuu **ku baddelay** doollar.
g) Dadkii wuxuu **ka qayliyay** xaqdarrada iyo dhaqan xumada.
x) Haweeneydii waxay **ka dacwootay** maamul xumada xafiiska.
h) Aradii waxay **ka dhiidhiday** xumaatada dhulkeeda lagu hayo.
i) Ninkii wuxuu ka **gubtay** gumeysiga cusub.
j) Geelii wuxuu ka **dareeray** ceelkii.

III. **Jago horjoogayaalka falidda ka horreeya** oo tixo ku jira (ka, ku soo, sii, la, u, ag).

a) Cabdullaahi wuxuu **ka** tegay aqalka.
b) Faahiye wuxuu **ku** jiraa huteelka.
d) Asli waxay **la** jirtaa wlaalkeed.
dh) Baabuurkii wuu **soo** noqday shalay.
e) Lo'dii waxay **sii** socotaa meel fog.
f) Gabadhu waxay **u tagtay** aabbeheed.
g) Macalliinku wuxuu **ag** fadhiyaa ardayga.
x) Shuferku wuxuu **ka** shaqeeyaa garaashka baabuurta.

**Ogeysiin:**

Jago horjoogayaalka falidda ka horreeya, waa laysku dari kaaraa. Markii laysku daro iyaga, si gooni ah ayaa loo dhigaa amaba loo akhriyaa. Taas, waxaa ka mid ah (ka+soo=kasoo, la+soo=lasoo, ku+sii=kusii, u+sii=usii, ka+ga=kaga, la+gu=lagu, u+ga=uga, u+gu=ugu, ku+soo=kusoo iyo kuwo kale).

# JOGO HORJOOGAYAALKA FALIDDA KA HORREEYA OO LAYSKU DARAY

| Jago horjoogayaalka oo aan wax la xiriirin | Jago hogjoogayaalka ee aan welilaysku darin | Jago horjoogayaalka oo laysku daray | Tixda |
|---|---|---|---|
| ka | soo | kasoo | waan kasoo ........................................ |
| u | la | ula | waan ula ........................................ |
| ku | sii | kusii | wuu kusii ........................................ |
| ku | la | kula | way kula ........................................ |
| ku | soo | kusoo | waad kusoo ........................................ |
| ka | ka | kaga | waan kaga ........................................ |
| ku | ku | kugu | way kugu ........................................ |
| u | ka | ugu | wuu ugu ........................................ |
| u | ka | uga | way uga ........................................ |
| u | sii | usii | wuu usii ........................................ |
| u | soo | usoo | waan usoo ........................................ |

| Jago horjoogayaalka oo lasoo koobay | Jago horjoogayaalka oo ka abuurmay hal eray | Tixda iyaga oo ku jira |
|---|---|---|
| u, ku, soo | ugu soo | waxaan ugu soo qoray warqad |
| ku, la, soo | kula soo | waxay kula soo baxday caqli |
| u, la, sii | ula sii | wuxuu ula sii tegay Nuur |
| ka, ga, soo | kaga soo | waxaad kaga soo tagtay Marka. |

| Jago horjoogayaalkaan wax ula xiriirin | Jago horjoogayaalka ka abuurmay falido | Magacuyaalla-da nagaadiyeyaalka ah | laba jago horjooge oo is-raacsan | Summadda falidda |
|---|---|---|---|---|
| ka | hor | waan | ka horr- | eeyaa |
| ka | danb (e) | waad | ka danb- | -aysaa |
| ka | hoos | wuu | ka hoos- | -eeyaa |
| u | dhex | way | u dhex- | -aysaa |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| soo | dhexmar | waad | soo dhexmar- | -aynnaa |
| ka | wareeg | waad | ka wareeg- | -aysaan |
| la | dhinac | wuu | la dhinac- | -yahay |
| ku | dhexjir | way | ku dhexjir- | -taa |

## QOFMAQABAHA QUDHAALAHA «IS»

Qof ma qabaha qudhaalaha (is), waa fale iyo lafalaha qof ma qabe ah, oo ka jooga qof aan la aqoon. Qof ma qabaha qudhaallaha (is), wuxuu ka joogaa muuqaasha qofka saddexaad keli iyo kooxda. Muuqaasha qofka saddexaad, waxay oggoshahay falidda uu ka horreeyo qof maqabaha qudhaaluhu. Sida, **«iska tag adigu!)** iyo **(iska warrama idinku?)**

**Falaha qof ma qabaha qudhaalaha (is) oo tixo ku jira.**

1. **Isu** imaada maanta!
2. **Iskaga** tag (adigu) meesha!
3. **Iska** warran adigu?
4. **Iska** jir bahalka!
5. **Iska** daa hadalka!
6. **Iska** daaya hadalka!
7. **Iska** eeg dameerka!
8. **Iskaga** bax shuqulka!
9. **Iska** keen alaabta!

Lafalaha qof ma qabaha qudhaalaha (is) oo tixo ku jira

1. Qof qof, (idinku) **isu** wargeliya!
2. **Is** xusuusta idinku!
3. **Anigu** waxaan is iri **«isaga tag halkaan wax kuuma yaalliine!»**
4. Xuseen wuxuu **is** yiri **«adigaa dadka u wanaagsan»!**
5. Faahiye wuxuu **is** mooday inuu dadka u wanaagsan yahay!
6. Carfoon waxay **isu** malaysay inay naago u gaarisan tahay!
7. Iyagu waxay **isu** sheegeen hadalkii!
8. Ninka **laysu** wada sheeg!

## KU DHUFASAHDA ERAYGA

Af Soomaaliga sida Afafka qaarkood ku dhufashadu waa lagama

maarmaan. Ku dhufasha la'aanteed, erayadu way isu ekaan lahaayeen. Markii laba eray isaga ekaadaan qoridda, waxaa lagu kala saaraa ku dhufashada (—). Ku dhufashadu magaca iyo falidda labadaba way gashaa, macnahana, way kala saartaa. Ku dhufadu (—) waa kala sooc dhawaaqeed, oo lagu muujiyo macnaha magaca. Ku dhufashadu waxay ku saabsan tahay erayga siimaantikadiisa Af Soomaaliga. Iyadu waxay kala bixisaa macnaha dheddignimada iyo labnimada erayga Af Soomaaliga.

## Ku dhufashada oo erayo ku jirta

| | | |
|---|---|---|
| Inan (l. ke.) | dameér (dh. ke). | daanyeer (l. ke.) |
| Inàn (dh. ke.) | dameer (l. ke. | daanyeér (dh. ke.) |
| Géed (l. ke.) | baqal (l. ke.) | faras (l. ke.) |
| Geéd (dh. ke.) | baqàl (dh. ke.) | fàras (dh. ke.) |
| Timir (l. ke.) | libaax (l. ke.) | wiyil (l. ke.) |
| Timìr (dh. ke.) | libàax (dh. ke.) | wiyìl (dh. ke.) |
| nayl (l. ke.) | waxar (l. ke.) | niring (l. ke.) |
| nàyl (dh. ke.) | waxàr (dh .ke.) | nirìng (dh. ke). |
| bahal (l. ke.) | qurun (l. ke.) | shinbir (l. ke.) |
| bahàl (dh. ke.) | qurùn (dh. ke.) | shinbìr (dh. ke.) |

**Ogeysiin:**

Ogow in afku uu isagu is dhiso maxaa yeelay, haddii ku dhufashada laga tego, haddana waxa jira si kale oo lagu kala saari karo erayada. Taasi, waxaa weeye: in lagu kala saari karo astaanta magaca (dheddigga amaba labka). Waxaa ka mid ah (inan**ka**, inan**ta**, geed**ka**, geed**da**, wiyil**ka**, wiyi**sha**, waxar**ka**, waxar**ta**, baqal**ka**, baqa**sha**, timir**ka**, timir**ta**, niri**gga**, nirig**ta**).

## QOFMAQABAHA (LA, LOO) iyo HAWLAHOODA

Qofmaqabeyaalka (la, loo) waxay fariistaan jagada falaha, waxayna ka joogaan fale aan la aqoon. Qofma-qabeyaalka(la, loo) waxay ka joogi karaan **keli** amaba **kadin.** Iyagu qof kasta way ka joogi karaan, sidaas daraaddeed, waxaa lagu magacaabay **qofmaqabeyaal.** Erayga (wada) kadin muujiyaha, wuxuu raacaa qofmaqabaha (loo) sida badan, in kastoo qofmaqabaha (la), uu isna raaco erayga kadinlaha ah (wada).

Qof ma qabyaalka (la, loo) waxay oggol yihiin falidaha la xiriira. Falidaha gudbinta (sheeg, aqool, loog, keen, gee, samee) waxay raacaan qofmaqabaha (loo). Qofmaqabayaalka (la, loo) waxay raacaan falaha iyo lagu falaha qofmaqabaha qudhaalaha (is) iyo jogo horjoogayaalka (ka, ku, u, sii, soo).

## QOFMAQABAHA (la) oo tixo ku jira

a) Wiil ayaa **la** dilay
b) Geedo ayaa **la** jaray
d) Wax **la** arag waxna laaban
dh) Ilaah **la** wada bari
e) Beer baa **la** gubay
f) Maxaa la sheegay?
g) Nabad ayaa **la** sheegay
h) Sidee **la** yahay?
x) Waa **la** nabdoon yahay, waa **la** nabad qabaa
j) Maxaa **laysu** wada sheegay?
kh) Waxaa **laysu** sheegay nabad

## QOFMAQABAHA (loo)

a) Wiikii waa **loo** yimid
b) Martidii **loo** wada aqool soortii
d) Nimankii waa **loo** wada digay
dh) Faarax hadalkii **loo** sheeg
e) Beertii **la** wada goosay
f) Geeri iyo nolol waa **loo** wada siman yahay
g) Baabuurkii **loo** keen isaga
h) Ciidankii gumeysatada **la** wada jebi
x) Ninkii meeshii **looguma** tegin
i) Guddigii waa **loo** heesay
kh) Dayuuradihii waa **la wada** kiciyey

**Ogeysiin:**

Qofmaqabaha (la), wuxuu ku tusaa qof kasta oo innaga naga mid ah. Qofmaqabaha (loo), wuxuu ku tusaa kadinnimo, amaba halnimo dad ah. Qof-maqabaha (loo), wuxuu ka abuurmay laba eray (la+u=loo).

## QOFMAQABAHA (la, loo) QOFMAQABAHA QUDHAALAHA (is) IYO JAGO HORJOOGAYAALKA IYO KADINLAHA (wada)

Af Soomaaliga qofmaqabaha (la, loo) iyo qof maqabaha qudhaalaha (is) iyo jago-horjoogayaalka (ka, ku, la, sii, soo) way isku raaci karaan jiridda.

| Magacuy, qofqabey. lafalaha | Erayga qudhaalaha (is) iyo Q.M.q. (la, loo) | Qofqab. lafalaha | Jago horjoogay-aalka | Erayga kadinlaha | Xiriiriye ah iyo diidaha (ma) | Dhammaantood oo laysku wada daray | Tixaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| — | -la- | -i- | -ka- | -wada | — | layga wada | layga wada dhac maalkii |
| na- | -la-is- | — | -ku- | -wada | — | nalaysku wada | nalaysku wada dir |
| — | -la-is- | -u- | — | -wada | — | laysu wada | laysu wada keen raggii |
| — | -la- | -ii- | — | -wada | — | lay wada | lay wada sheeg iyaga |
| — | -la-is- | — | -la- | -wada | — | laysla wada | laysla wada arag |
| na- | -la- | — | -ka- | -wada | — | nalaka wada | nalaka wada dareer |
| — | -la-is- | -u- | — | -wada | — | laysu wada | laysu wada diid xafiiskii |
| — | — | -ii- | -ku- | -wada | — | iigu wada | iigu wada sheeg iyaga hadalka |
| — | -la- | -ii- | — | ma | — | layma | layma dilin aniga |
| — | -loo- | — | -ka- | — | — | looga | looga teg meeshii |
| — | -la-is- | — | -ku- | -wada | — | laysku wada | laysku wada goo colkii |
| — | — | -i- | -ku- | — | ma | iguma | iguma diidin hadalkii |
| na- | -la- | — | -ku- | -wada | — | nalaku wada | nalaku wada yiri hadalkii |
| — | -la-is- | — | — | -wada | — | lays wada | lays wada bar xeeshii |
| na- | -la- | — | -ka- | -wada | — | nala ka wada | nala wada kexee nimankii |
| na- | -la- | — | -ka- | -la | — | nala kala | nala kala sooc. |
| — | -loo- | — | -ka- | -la | — | loo kala | loo kala bax nimankii |

## KU CELISKA

I. Timaaddo fogey iyo timaaddo dhowey maxay ku kala duwan yihiin? Timaaddo maxaa loogu magacaaby?
Ma ii sheegi kartaa summadda timaaddo dhowidleyda lagu yaqaanno?
Haddaad damacdid, inaad abuurto timaaddo fogidley, sidee u abuuraysaa?
Hadday timaaddo fogidley ku dhammaato shibbane, muxuu noqonayaa xiriirka dhawaaqa ahi? Haddayse ku dhammaato shaqal, xiriirku muxuu noqdaa?
Ma ii sheegi kartaa summadaha dhammaadka timaaddo dhowidleyda?

II. Falidahaan ku dar summadihii timaaddo dhowidleyda.

1. Anigu berri ayaan (aad)...... Baydhabo.
2. Fay toddobaadka dhow (dhammee)...... dugsiga sare.
3. Axmad shan saac kaddib, wuu inagu (martiqaad)......
4. Macallimaddu waxay (keen)...... alaabtii dugsiga.
5. Isagu baabuur ayuu nagu (gee)...... Golaha Hiddaha.
6. Jamcaha dhow dugsigayagu wuxuu la (cayaar)...... dugsiga Macallin Jaamac.
7. Bisha Oktoobar oo dhow waxaa wada (cayaar)........ kubbad dugsiga ina-Cabdille Xasan iyo kan Axmed-Gurey.
8. Idinku berri aroortii waad (shaqee)........
9. Maridu waxay (seexo)...... ristoorantiga martida.
10. Sanada dhow dugsiyada Sare waxaa (ka bax)...... 5000 oo arday.

III. Tixahaan waxaad u beddeshaa tixo diiddoley ah.

a) Geelu wuxuu daaqayaa meel naq leh.
b) Kooshin wuxuu aadayaa maanta Berbera.
d) Nimanku waxay na oran doonaan iska taga.
dh) Cabdiyo waxay tahay gabar wanaagsan.
e) Nuuro iyo Gahayr waxay ku dabaalanayaan Liido.
f) Shufeerku wuxuu wadaa baaska.
g) Injiyeerku wuxuu dhisa guryaha.
x) Ardadu waxay wax ka barataa Jaamacadda Ummadda.

IV. Erayadaan ku dar erayga weydiinlaha ah (ma).

a) Libaax baan arki doonaa.
b) Macallinku wuxuu imanayaa galabta.
d) Shinbir baa duushay.
dh) Raadiyo Muqdisho ayaan dhegaysan doonaa maanta.
e) Isagu wuxuu akhriyayaa joornaal.
f) Kalluunku wuu hilib wanaasan yahay.
g) Nalal ayaan shiday
h) Rag ayaa shir u fariistay.
x) Ardaygu wuxuu qorayaa dersiga.
i) Saaxiibkay Ashkir wuxuu dhigtaa galaaska shanaad.
j) Faadumo waa gabar dadaal badan.
k) Macallimaddayadu aad iyo aad ayay wax noo baartaa.

V. Ka jawaab weydiimahaan.

a) Fale waa maxay? Falaha qofqabeyaalku waa immisa?
b) Faluhu muxuu ku tusaa? Waxaan fale lahayn ma falmaan?
d) Qofmaqabaha qudhaaluhu (is) muxuu ku tusaa?
dh) Keen tixo shan ah, oo ay ku jiraan qofmaqabeyaalka (la iyo loo).
e) Keen saddex tixood oo ay ku jiraan qofmaqabeyaalka (la iyo loo iyo jago horjoogaha ku).
f) Keen tixo lix ah oo lafaleyaalka qofqabeyaalku ku jiraan?

## KU DAR TIXAHAAN FALE

1. .................................................. ayaa yimid.
2. Baabuur ............................ waday.
2. .................................................. ayaa ciyay.
4. .................................................. galay ristoorantiga.
5. .................................................. ayaa da'ay.
6. .................................................. ayaa jabtay.
7. .................................................. ayaa qaaday hees

VI. Ku dar Tixahaan Falid iyo la-Fale.

1. wuxuu (askeri) ............................ Bankiga
2. (Makaanig) wuxuu ka shaqeeyaa (warshad).
3. .......................... waxay akhrisaa ...................... (joornaal).

4. ............................ wuxuu wadaa ...................... (taksi).
5. ............................ waxay ka shaqaysaa ...................... (makhaayad lambar afar.
6. ............................ waxay galeen...................... (shineema Xamar)
7. ............................ wuxuu dhigt: ................ (dugsiga Xamar Jajab).
8. ............................ waxay wax ka bartaan...................... Jaamicadda Ummadda.
9. ............................ wuxuu dhigtaa ............................ (galaas labaad).
10. ............................ wuxuu markab............................ (bad Hindi).
11. ............................ waxay cunaan ............................ (miro).
12. ............................ wuxuu daaweeyaa...................... (dad jirran).

Toddoba tixood oo fale iyo lafale ku jiraan soo qor. Arday walba ha ku soo qoro guriga, hadal ay ku jiraan qofmaqabeyaalka (la, lo) iyo shan tixood oo uu ku jiro falaha iyo lafalaha qudhaalaha (is).

VII. Tixahaan ku dar Jago Horjoogayaalka ku habboon.

a) Isagu wuxuu...................... jiraa guriga.
b) Geelle wuxuu...................... nool yahay Xaafadda Hodan.
d) Taksigu wuxuu...................... socdaa jidka........................................
dh) Walaalkay wuxuu deggan yahay Hodan........................................
e) Xaliimo waxay wax........................................ barataa dugsiga Sare.
f) Gabadhu waxay................................ jirtaa walaasheed.
g) Wiilku wuxuu............................ socdaa jidka meel fog.
h) Macallinku wuxuu wax...................... dhigaa Jaamacadda.
x) Makaaniggu wuxuu...................... shaqeeyaa warshadda.
i) Iyadu waxay wax............................ gadatay suuqa.
j) Iyagu waxay............................ tageen agaasimaha dugsiga Sare.

VIII. Ka jawaab Tixahaan.

a) Lafale maxaa la yiraahdaa? Maxaa loogu magacaabay lafale?
b) Maxaa u dhexeeya falaha iyo lafalaha?
d) Fale hadduunan jirin lafale ma jiri lahaa?
dh) Sheeg gadaalraacayaalka magacyada falaha?
e) Nagaadeyaasha magacuyaalka, xaggee bay fariistaan?
f) Sheeg tix lafaluhu ugu horreeyo?
g) Keen laba tixood oo lafaluhu u horreeyo faluhuna u danbeeyo?

**Ka jawaab Hadalladaan**

1. Sheeg qofmaqabaha (la) wuxuu ka joogo?
2. Qofmaqabaha (is) xaggee buu tixaha ka galaa?
3. Keen tixo qofmaqabaha qudhaaluhu ku jiro?
4. Ka faallood tixdaan **«Ninkii markuu ila diriray anigu waan iska qabtay».**
5. Boqorkii intuu raggiisii warmo geliyay, ayuu ku yiri «war isa safa!» Tixdaas ka faallod.
6. Dayuuraddii way iska duushay shan saac kaddib.
7. Aniga hayska kay qarin.

IX. Magacuyaalka Lafalaha saddexaad oo koox ah, tixuu ku jiro keen?

1. Qor tixo magacuyaalka lafalaha ku jiraan?
2. Keen tixo ay ku jiraan managaadeyaalka?
3. Ma ii keeni kartaa tixo ay ku jiraan nagaadeyaashu?
4. Sheeg waxa ku jira tixdaan **«Anigu waxaan dhegeysan jirey war».**

X. **Ku dar Taxahaan Astaanta-dhammaadka Tagto Dareerto.**

1. Anigu waxaan (aad) ........................ magaalada
2. Isagu wuxuu (akhri) ........................ joornaalka dalka
3. Xaliimo waxay (samee) ........................ soor
4. Geelle wxuuu (qor) ........................ buug
5. Askerigu wuxuu (daafac) ........................ dalka
6. Idinku waxaad ku (jir) ........................ guri cusub
7. Warsame wuxuu (illaali)........................ geel
8. Walaalkay wuxuu (ka shaqee)........................ Xafiiska Dawladda.
9. Daruur ayaa (ka cura) ........................ degmada Mudug
10. Toddobaad walba dayuuradda (Shirkadda Soomaaliyed waxay (u duul) ........................ Hargeysa.

XI. Ku dar Tixahaan Gadaalraacyada sifaynta iyo Erayada Sifaynta:

a) Cabdi wuu (wanaag) ........................ yahay
b) Asli way (gaab) ........................ tahay
d) Nimanku way (dheer) ........................ yihiin

dh) Ninku wuu (qab) .................................................... yahay
e) Naagtu way (tabar) .................................................... tahay
f) Walaalahay way (cad) .................................................... yihiin
g) Wananku way (weyn) .................................................... yihiin
h) Guryuhu way (fog) .................................................... yihiin
x) Askerigu wuu (xoog) .................................................... yahay
i) **Ardadu way (yar) .................................................... tahay**
j) Jidadku way (ballaaran).................................................... yihiin
k) Nimanku way hadal (kulul) .................................................... yihiin

XII. Ku dar Falidahaan Astaan ku dhammaadka Timaaddo fogey.

1. Anigu waan (tag) .............................. Beledweyne
2. Xasan wuxuu (gal) .............................. Shineemada Hodan
3. Ninku wuxuu (dhoof) .............................. laba toddobaad kaddib
4. Abshir wuxuu (baro) .............................. Af Ingiriiska
5. Xasan wuxuu (sheeg) .............................. warka dunida
6. Nimanku waxay (ka shaqee) .............................. mashruuca (iskaa wax u qabso)
7. Nuurre wuxuu (qor) .............................. warqad lala yaabo
8. Idinku waxaad (shub) .............................. ari
9. Iyagu waxay (martisoor).............................. martida Afrika
10. Caliyow wuxuu (ka bax).............................. dugsiga Sare sannadda dhow.

## QAYBTA XI.

## SHARIDLEY IYO XIRIIRIYAYAALKEEDA

Shardiley waa falid shardi leh oo ka abuuranta laba tixood oo laysu geeyey. Tixda hore waxay ku xiran tahay tan danbe, waxaana isku xira labada tixood erayada shardiga (haddii, kolkii). **Haddii aad timaaddo, anna waan imanayaa». «Haddii lowgu ku wiiqo anna waan wakiyaa»** (wiilwaal). Tixda hore, imaatinkaygu wuxuu ku xiran yahay imaatinkaaga. Tan danbana, low-wiiqmadaadu waxay ii soo jiiday-saa wakintayda. Wakintaydu waxay ku xiran tahay low-wiiqmadaada. Tixda hore, **waa tixmadaxeed,** tan danbana, **waa tixshardiyeed,** erayga **shardiguna, waa «haddii».**

## XIRIIRIYEYAALKA SHARDILEYDA

Xiriiriyeyaalka shardileydu waa saddex.

1. Xiriiriyaha gooraynta oo shardiyelda **(haddii, kolkii, markii, waagii, goortii** iyo kuwo kale).
2. Xiriiriyaha tixaha **(e)** ee falidda hore, wuxuu gadaal ka raa-caa erayga inkastoo xiriiriyahaas laga reebi karo falidda hore.
3. Xiriiriyayaalka tixaha **(yaa, ayaa, baa, waxaa, waa).**

### 1. Xiriiriyaha gooreynta oo shardileyda oo tixo ku jira.

a) **Haddaad** timaaddo, anna waan imanayaa.
b) **Hadduu** Geelle i dilo, anna waan dilayaa.
d) **Hadday** aaddo dugsiga, isna wuu aadayaa.
dh) **Haddaan** si wanaagsan u shaqeeyo, lacag waan helayaa.
e) **Haddii** biyo la waayo, ciddu meesha way guuraysaa.
f) **Haddii** roob da'o, ciddu way nagaanaysaa.
g) **Haddaad** i caydid, anna waan ku caayayaa (caayi).
h) **Markuu** i ammaan gelin waayay, ayaan la diriray.
x) Ninkii **markuu** dharbaaxay naagtii, ayay iskaga tagtay gu-rigii.
j) Geelii **markuu** ceelkii ka cabbay, ayaan nasannay.
kh) Baabuurkii **kolkii** la sameeyay, ayaan fuulnay.

k) **Waagu** markuu baryey, ayaan ka kacnay hurdada.
kh) **Waagaad** timaaddo, ayaan wax ku siin doonaa.
l) **Waaguu** shaqo helo, ayaan wax weydiisanyaa.

2. **Xiriiriyaha tixood (e) oo ku jira tixo.**

a) Aan tag**ee**, i daa.
b) Aan gal**ee**, iga fur ablaabka.
d) Aan dhoof**ee**, baabuur i saar.
dh) Aan seexann**ee**, hadalka naga daa.
e) Ha fariisteen**e**, kursiyo u keen.
f) Ha hadash**ee**, gabadha u daa hadalka.
g) Aad tagtiin**e**, wax yar i suga.
h) Aad tiraahdid**e**, i maqal.
x) Isagu wax ha bart**ee**, buugag u gad.
i) Aan ku daay**ee**, i daa.
j) Aan wax kuu sheeg**ee**, i maqal.
k) Ha kaa tagt**ee** (iyadu), lacag sii.
kh) Ha cabb**ee** (isagu), ka bixi shaaha.
l) Ha seexd**ee**, furaha guriga sii.

3. **Xiriiriyeyaalka Shardiga tixaha oo tixo ku jira.**

a) **Mar**kaan caroodo (**ayaan**) iska aammusaa.
**Mar**kaan caroodo (**waan**) iska aammusaa.
**Mar**kaan caroodo (**yaan**) iska aammusaa.
**Mar**kaan caroodo (**baan**) iska aammusaa.

b) **Kol**kuu geelu oomo, **ayuu** olol badnaadaa.
**Kol**kuu geelu oomo, **yuu** olol badnaadaa.
**Kol**kuu geelu oomo, **buu** olol badnaadaa.
**Kol**kuu geelu oomo, **wuu** olol badnaadaa.

d) **Had**daad is cuskatid, **waad** liibaani doontaa.
**Had**daan is cuskado, **waan** liibaani doonaa.
**Had**duu is cuskado, **ayuu** liibaani doonaa.
**Had**day is cuskato **ayay** liibaani doontaa.

dh) **Kolkii** aan jidkaas maro, **ayaa waxaan** arkaa guri foolxun.
**Kolkii** aad jidkaas marto **ayaa waxaad** araktaa guri foolxun.

**Kolkii** uu jidkaas maro, **ayaa wuxuu** arkaa guri foolxun.
**Kolkii** aan jidkaas marno, **ayaan waxaan** aragnaa guri foolxun.
**Kolkii** aad jdikaas martaan, **ayaa waxaad** aragtaan.
**Kolkii** ay jidkaas maraan, **ayaa waxay** arkaan guri foolxun.

**Ogeysiin:**

**Ogow, in laba xiriiriye laysku dari karo. Sida** (ayaa + waxaa)......

**Markii** aan jirrado, **ayaan waxaan** iska seexdaa meel xasillan.
**Markii** aad jirrato, **ayaad waxaad** iska seexataa meel xasillan.
**Markii** uu jirrado, **ayuu wuxuu** iska seexdaa meel xasillan.
**Markii** ay jirrato, **ayay waxay** iska seexataa meel xasillan.
**Markii** aan jirranno, **ayaan waxaan** isku seexannaa meel xasillan.
**Markii** aad jirrataan, **ayaad waxaad** iska seexataan meel xasillan.
**Markii** ay jirradaan, **ayay waxay** iska seexdaan meel xasillan.

## Gooraynta Shardileyda

Shardileydu waxay u qaybsantaa saddex goorood.

1. Timaaddo fogey.
2. Joogto.
3. Tagto.

1. **Timaaddo Shardiley oo ku jirta tixo.**

a) **Haddaan** wax barto, waan shaqaysan doonaa.
b) **Haddaad** wax baratid, waad shaqaysan doontaa.
d) **Hadduu** wax barto, wuu shaqaysan doonaa.
dh) **Hadday** wax barato, way shaqaysan doontaa.
e) **Haddaan** wax baranno, waan shaqaysan doonnaa.
f) **Haddaad** wax barataan, waad shaqaysan doontaan.
g) **Hadday** wax bartaan, way shaqaysan doonnaan.

2. **Joogto shardiley oo tixo ku jira.**

**Markii** aan daalo, waan nastaa
**Markii** aad daashid, waad nasataa
**Markii** uu daalo, wuu nastaa

**Markii** ay daasho, way nasataa
**Markii** aan daalno, waan nasannaa
**Markii** aad daashaan, waad nasatan
**Markii** ay daalaan, way nastaan

Kolkaan isaga arko, waan yaabaa
Kolkaad isaga aragtid, waad yaabtaa
**Kolkuu** isaga arko, wuu yaabaa
Kolkay isaga aragto, way yaabtaa
Kolkaan isaga aragno, waan yaabnaa
Kolkaad isaga aragtaan, waad yaabtaan
Kolkay isaga arkaan, way yaabaan

3. **Tagto shardiley oo tixo ku jirta.**

Haddaan akhrin **lahaa,** waan baran **lahaa** dersiga
**Haddaad** akhrin **lahayd,** waad baran **lahayd** dersiga
Hadduu akhrin **lahaa,** wuu baran **lahaa** dersiga
Hadday akhrin **lahayd,** way baran **lahayd** dersiga
Haddaan akhrin **lahayn,** waan baran **lahayn** dersiga
Haddaad akhrin **lahaydeen,** waad baran **lahaydeen** dersiga
Hadday akhrin **lahaayeen,** way baran **lahaayeen** dersiga

Ninka **hadd**aan arki **lahaa,** waan u sheegi **lahaa** hadalka
Ninka **hadd**aad arki **lahayd,** waad u sheegi **lahayd** hadalka
Ninka **hadd**uu arki **lahaa,** wuu u sheegi **lahaa** hadalka
Ninka **hadd**ay arki lahayd, way sheegi **lahayd** hadalka
Ninka **hadd**aan arki **lahayn,** waan u sheegi **lahayn** hadalka
Ninka **hadd**aad arki **lahaydeen,** waad u sheegi **lahaydeen** hadalka
Ninka **hadd**ay arki **lahaayeen,** way u sheegi **lahaayeen** hadalka.

**Ogeysiin:**

1. Summad ku dhammaadka shardileydu, waxa weeye: (-o, -tid, -o, -to, -taan, -aan). Summad ku dhammadka joogto shardileyda iyo timaaddo shardileyda, waa summad ku dhammaadka halkaan kore, aan ka soo sheegay. Illowse, summad ku dhammaadka tagto shardileydu, waxa weeye (-lahaa, -lahayd, -lahaa, -lahayd, -lahayn, lahaydeen, -lahaayeen).

2. Xiriiriye tixoodka shardileyda (-e) oo la xiriira tixmadaxeedda, wuxuu ka abuurmaa falidda+e. Waxaa ka mid ah (aan tago+e=tagee idaa).

3. Erayada shardileyda (haddii, markii, kolkii, goorti, waaggii), waxay jiriddoodu u tahay tixaha lagama maarmaan. Erayadaasi, haddii aynan jiri lahayn, shardiley ma jirteen.

4. Xiriiriye tixoodka shardileyda (-e) wuxuu raacaa falidda tixmadaxeedka ku jirta (ha tago+e=ha tagee). Xiraariye tixoodka -ee), waxaa la weheliya nagaadeyaalka magaacuyaalka (-aa, -aad, -uu, -ay, -aan, -aad, -ay). Nagaadeyaalkaasi, way qaawan yihiin, oo wax horay kala xiriira ma jiraan. Nagaadiyeyaalkaas, waxaa ka soo horjeeda lafalaha qofqabeyaalka magacuyaalka (i, ii, ku, kuu, u, isaga, iyada, iyaga, idin, na, idiin, noo).

| **Shardiley furan** | **Tuxmadaxeed** | **Tixshardiley** |
|---|---|---|
| Joogto shardiley | Wuu shaqaysanayaa, | hadduu shaqo helo |
| Timaaddo shardiley | Wuu shaqaysan lahaa, | hadduu shaqo helo |
| Tagto shardiley | Wuu shaqaysan doonaa, | hadduu shaqo helo |

**Diiddo shardiley.**

| **Shardiley furan** | **Tixmadaxee** | **Tixshardiley** |
|---|---|---|
| Joogto sharidiley | Ma shaqaysanayo, | hadduu shaqo helo |
| Timaaddo shardiley | Ma shaqaysan doono, | hadduu shaqo helo |
| Tagto sharidiley | Ma shaqaysteen, | hadduu shaqo heli lahaa |

**1. Joogto diiddo shardiley.**

| | |
|---|---|
| Anigu ma shaqaysan-**ayo,** | markaan shaqo hel-**o** |
| Adigu ma shaqaysan-**aysid,** | markaad shaqo he-shi**d** |
| Isagu ma shaqaysan-**ayo,** | markuu shaqo hel-**o** |
| Iyadu ma shaqaysan-**ayso,** | markay shaqo he-**sho** |
| Innagu ma shaqaysan-**aynno,** | markaan shaqo hel-**no** |
| Idinku ma shaqaysan-**aysaan,** | markaad shaqo he-**shaan** |
| Iyagu ma shaqaysan-**ayaan** | markay shaqo hel-**aan** |

### 2. Timaaddo diiddo shardiley.

| | |
|---|---|
| Anigu ma shaqaysan doon-**o** | haddii aan shuqul hel-**o** |
| Adigu ma shaqaysan doon-**tid,** | haddii aad shuqul he-**shid** |
| Isagu ma shaqaysan doon-**o** | haddii uu shuqul hel-**o** |
| Iyadu ma shaqaysan doon-**to,** | haddii ay shuqul he-**sho** |
| Innagu ma shaqaysan **doon-no,** | haddii aan shuqul hel-**no** |
| Idinku ma shaqaysan doon-**taan,** | haddii aad shuqul he-**shaan** |
| Iyagu ma shaqaysan doon-**aan,** | haddii ay shuqul hel-**aan** |

### 3. Tagto diiddo shardiley.

| | |
|---|---|
| Anigu ma shaqays-**teen,** | haddii aan shaqo heli-**lahaa** |
| Adigu ma shaqays-**ateen,** | haddii aad shaqo heli-**lahayd** |
| Isagu ma shaqays-**teen,** | haddii uu shaqo heli-**lahaa** |
| Iyadu ma shaqays-**ateen,** | haddii ay shaqo heli-**lahayd** |
| Innagu ma shaqays-**anneen,** | haddii aan shaqo heli-**lahayn** |
| Idinku ma shaqays-**ateen,** | haddii aad shaqo heli-**lahaydeen** |
| Iyagu ma shaqays-**teen,** | haddii ay shaqo heli-**lahaayeen** |

**Ogeysiin:**

Ogow, in summad ku dhammaadka joogto diiddo shardileydu tahay, keli **(-ayo, -aysid, -ayo, -ayso,)**, iyo koox **(-aynno, -aysaan, -ayaan)** in summad ku dhammaadka timaaddo diiddo shardileydu tahay, keli **(-o, -to, -tid, o,)** iyo koox **(-no, -taan, -aan)**, in summad ku dhammaadka tagto diiddo shardileydu tahay, keli haddii ay faliduhu ku dhammaadaan shaqal **(-teen, ateen, -teen, -ateen)**, iyo koox **(-anneen, -ateen, -een)**. Haddiise faliduhu ku dhammaadaan shibbane, summad ku dhammadka tagto diiddo shardileydu tahay, keli **(-een, -teen, -een, -teen)** iyo koox **(-neen, -teen, -een)**. Summadahaas oo idilu waa summad ku dhammaadka tixmadaxeedka shardileyda, summad ku dhammaadka tixshardileydu, iyana waa sidaas oo kale, mid keliya ma ahee. Taasina waa summad ku dhammaadka tixshardileyda (keli) waxa weeye **(-lahaa, lahayd, -lahaa, -lahayd)**, kooxduna waxa weeye **(-lahayn, -lahaydeen, -lahaayeen)**.

## QAYBTA XII.

# F A L K A A B

Falkaabku waa erayo wax muujiya. Erayada falkaabku waxyaalo kala geddisan, ayay muujiyaan. Erayadaas qaarkood, waxay muujiyaan **meel**, qaarkoodna wuxuu muujiyaa **goor**, qaarka kalena wuxuu muujiyaa **si**, amaba **qaab**. Sidaas daraaddeed, ayaa waxaa lagu macaabay tusayaal falkaab. Intaas keliya ma ahee, haddana, waxaa falkaab jira muujiya **jimayn**, iyo **dan** iyo **sabab**. Sidaas daraaddeed, tusmada falkaabku waxay u qaybsantaa siddeed.

I. **Falkaab Gooreed.**

Goortii, kolkii, markii, waagii, maalintii, sannaddii, qarnigii, gelinkii, toddobaadkii, saacaddii, fiidkii, cashadii, aroortii, galabtii, duhurkii, harkii, maqribkii, casarkii, galab-gaabkii, barqadii, daqiiqadii, gugii, xagaagii, dayrtii, jiilaalkii, saqdiidhexe, waaberigii, qorrax-dhicii, diraacdii, abaartii iyo kuwa kale.

II. **Falkaab meeleed.**

Halkaan, halkaas (halkaa), halkeer, meesha (meel), hortii, gadaashii, hoostii, korkii, meel walba, meeluun, meel kasta, dhexda, dhinaca, barbarka, geesta, meel fog, meel dhow, meel ku dhow, meel ka fog, xaggii, xag kasta, xag walba, gasada, kaadka, gundhigga, saldhigga, meel ka meel, dhinac ka dhinac, gees ka gees, goobtii, iyo kuwa kale oo badan.

III. **Falkaab siyeed, ama qaabeed.**

Si, sidii, aad iyo aad, degdeg, aad, aayar, durbaba, waa yahay, waa hagaag, waa run, waa been, waa la arkaa, way suurtowdaa, way noqotaa iyo kuwo kale.

IV. **Falkaab qiyaaseed.**

In yar, in badan, wax yar, wax badan, in weyn, in fudud, in culus, wax culus, wax fudud, xig, (kistoo), goror, iyo kuwa kale oo badan.

V. **Falkaab weydiimeed.**

Erayada falkaabka weydiimeed waxay ka dhasheen wax weydiis (weydiinley), meeqa, intee, intee-jeer (imisaa-jeer, meeqa-jeer) xigtẹe (kistee), iyo kuwa kale.

VI. **Falkaab daneed.**

Falkaabka daneed, waxaa ka dhashay weydiinley: Maxaa dhacay? **Ma kas iyo kama baa? Maxaad ula dan leedahay? Maxaad ka waddaa? Maxaad u dan leedahay?** Falkaabka daneed eray iyo tixba waxay muujiyaan danta qofka hadlaaya uu ka leeyahay hadalkiisa. **Waxaa ka mid ah: Ashkir, wuxuu u yimid, inuu shaqeeyo maanta.** Tixdaasi, waxay ku tustaa imaatinka Ashkir in dani ku jirto. Falkaabka daneed (sidaas daraaddeed), isaguna wuxuu muujiyaa sabab iyo dan.

VII. **Falkaabka ka horjeedaha ah.**

Wuxuu muujiyaa suurtoobid. Qof hadlayaa, marmarka qaarkood wuxuu ku hadlaa erayo uu ku muujinayo suurtoobid, amaba wax dhici kara. Erayada suurtowga muujiyaa waa: **hase yeeshee, inkastoo, si kastaba, wax kastaba, si walba, illowse,** iyo kuwa kale.

FALKAABYO TIXO KU JIRA

I. **Falkaabyo gooreed oo tixo jira.**

a) **Waagii** markuu beryay, ayaan hurdada ka kacay.
b) **Gu'ga** roob ayaa da'a.
d) **Saqdiidhexe** ayuu hurdada ka salalay.
dh) **Fiidkii** ayuu ii yimid.
e) **Habeyn** barkii, ayay qaylo la soo toostay.
f) **Intii** uu ka yimaado, ayaan sugay.
g) **Ka-goor-ka-goor**, ayuu wiilku gaajaysnaa.
h) **Had iyo jeer** gabadhu wax bay barataa.
x) **Sanadii** dhaweyd waxaa ii yimid walaalkay.
i) **Qorraxdhicii** ayaad ka tagtay guriga.

II. **Falkaabka meeleed oo tixo ku jira.**

a) Ninku wuu ka fayow yahay **dhinac walba.**
b) **Gasada** aqalka waxaa ku jira haweenay.
d) Buuggii wuxuu yaallaa **halkaas.**
dh) **Xag walba** waxaa ka yimid niman.
e) **Meel ka meel** ayuu faraskaygii u orday.
f) Goobtii raggu fadhiyey, waxaa ka istaagay wiil yar.
g) Warkii **meel walba** wuu saabta.
h) **Xaggii** loo dhigaba waa gammaan xulashadeediiye (Sayid M. Cabdile Xasan).
x) **Meel ka fog** gurigayaga ayuu dugsigu ku yaallaa.
i) **Meel u dhow** isaga ayuu fariistay.

III. **Falkaabka Siyeed oo tixo ku jira.**

a) **Si** xun ayuu isagu ula hadlay.
b) **Sidaas** oo kale ayuu hawshii u sameeyey.
d) Libaaxii **aayar** ayuu u socday.
dh) Hadalkaasi **waa been.**
e) **Waxaa la arkaa** inuu yimaado maanta.
f) **Way suurtowdaa** in ninku tago.
g) Iyadu waxay iga ballanqaadday **durbaba** inay imaanayso.
h) **Aad iyo aad,** ayay nimankii noola hadleen.
x) Isagu **aad** ayuu wax u cunaa.
i) **Degdeg** ayay Xaliimo gurigii uga baxday.

IV. **Falkaabyo Qiyaaseed oo tixo ku jira.**

a) Idinku waxaad i warsateen **xoogaa** sonkor ah.
b) **Xig** bariis ah iga gado.
d) Samantar **inyar** ayuu ila joogay.
dh) Macallinkaan **wax badan** ayaan guri wada deggenayn.
e) Xaajadaani **wax fudud** ma aha.
f) Far la'aantu **waa dhibaato** culus.
g) Isagu **wax badan** ayuu iiga sheekeeyay dalka Soomaalida.
h) Kacaanka Oktoobar taariikhda Soomaalida wuxuu ku leeyahay **in weyn.**

a) **Meeqa jeer,** ayaan hadalka kuugu celcelinayaa?
b) **Immisaa jeer** ayaad wax i weydiinaysaa?

d) Xaajadu **uma culusa sidaan** u malaynayay!
dh) Buuggu **ma u adag yahay sidaad** ii sheegtay?
e) **Intay kari kartay** ayay iyadu shaqaysay!
f) **Intuu** cuni karay ayuu wax cunay.
g) Iyagu **waxay sameyn kareen** ayay sameeyeen.
h) **Wax alla** wuxuu fali karay ayuu igu falay.
x) **Xigtee** xigtaan u haysaa?

VI. **Falkaabyo Daneed oo tixo ku jira.**

a) Anigu **kasiyo kama** ayaan kugu caayay.
b) Isagu **muxuu ula dan leeyahay** xaalkaas?
d) Hadalkeeda iyadu **maxay ulajeeddaa?**
dh) Afgooye waxay **u aadeen inay** beeraha ka shaqeeyaan.
e) Dhakhtarku ma shaqayn karo maanta, **sidaas daraaddeed** wuxu aaday gurigiisii.
f) Madaxaa i xanuunaya, **sidaas daraaddeed,** maanta anigu ma shaqayn karo.

VII. **Falkaabyo ka horjeede oo tixo ku jira.**

a) **In kastoo** uu yiri ha ii iman, waan isaga imanayaa isaga.
b) **In kastoo** ay i neceb tahay, waan la hadli doonaa.
d) Ninku wuu i jecel yahay, **hase yeeshee** waa nin xun.
dh) Iyadu **si kastoo** ay hadal qabow igula hadasho, marna rumaysanmaayo hadalkeeda.
e) **Wax kastoo** laygu sameeyo, hindisahaygu kuma doorsoomayo.
f) Macallinku wuu i faaniyay, **illowse** waan aqoon xumahay.
g) Idinku waad i xaar xaariseen, **illowse** idinka caroonmaayo.
h) **Si kastaba** waxbarashada u deynmaayo.
x) **Si kastaba** hawsha waan u wadayaa.
i) **Jirtoo** anigu kuma dhaaran guul (illowse) waxaan ku dhaartay genbis.
j) **Jirtoo** isagu wax wuu bartaa, hase yeeshee dhugmo dheer ma leh.
k) **Ka dhig** inaan ku aqaan, aqoon hoosese, kuuma lihi.
kh) **Ka dhig** inuu caroodo, muxuuse samayn karaa?

## QAYBTA XIII.

## ABUURIDDA MAGACYADA CUSCUSUB

Eray abuuriddu Af Soomaaliga, way ku badan tahay sida afafka kale. Waagii kasta, erayo cusub ayaa ku biirsama Af Soomaaliga. Erayadaasi waxay noqon karaan, erayo ku saabsan horukaca dalka Soomaalida iyo gaddoonka dhaqanka Soomaalida heer kasta. Ku hadalka erayadaasi, kuma badna dhaqanka dadka Soomaalida ah, taasina, waxaa sabab u ah in afka Soomaalidu uunan u helin awood uu kaga koro amaba uu kaga baxsado afafka isaga ciriiriga ku haya, amaba halis weyn u noqday horukiciisa, waa walba iyo qarni kasta. In kastoo dhibaatadaasi jirtay, haddana afku wuu iska luudayey oo wuu rafanayey. Abuuridda erayada cuscusubi, uguma badna sida afafka horumaray, taasina waa qorid la'aanta iyo xoogag dhaqameed oo isaga dibudhac ku riday.. Sidaas daraaddeed, eray abuuriddu gadaal shisheeye oo isu kaashaday. Sidaas daraadeed, eray abuuriddu gadaal ayay uga dhacday Af Soomaaliga. Eraya abuuriddu waa astaan ku xiran gaddoonka dhaqanka dadka, iyo horukicidda dalka dhinaca farsamada iyo dhinaca teknooloojiga iyo aqoonta. Eray abuuriddu waxay ka abuurantaa amase ka soo dhalataa laba magac oo laysu geeyay macno hor lehna ku tusa. Eray abuuriddu waa lagama maarmaan si walba. Erayada abuuriddoodu siyaalo badan ayay ku soo dhashaan.

I. **Magac falid loo geeyay iyo gadaalraace.**

geeljire (geel + jir + e = geeljire).
caanoole (caano + leh + e = caanoole).
beensheege (been + sheeg + e = beenshgee).
daljire (dal + jir + e = daljire).
biyoole (biyo + leh + e = biyoole).
ceebsheege (ceeb + sheeg + e = ceebsheege).
fidnowade (fidno + wad + e = fidnowale).
geeltoosiye (geel + toosi + ye = geeltoosiye).
ellektrijiste (ellektriji + ist + e = ellektrijiste).

II. **Magac, magac loo geeyey iyo gadaalraacaha qofka.**

xooladhaqato (xoolo + dhaqad + to = xooladhaqato).
beeratabcato (beero + tabcad + to = beeratabcato).

dhuunijecle (dhuuni + jecayl + le = dhuunijecle).
barqogol (barqo + gogol = baqogogol).
dhuunitaabac (dhuuni + taabac = dhuunitaabac).
gacmodheere (gacmo + dheer + e = gacmodheere).

III. **Magac loo geeyey gadaalraacaha qofka iyo qodobka magaca.**

caqliile (caqli + leh + e = caqliile).

siiye (sii + (y) + e = siiye).

geelleyda (geel + ley + da = geelleyda).

beloqabaha (belo + qab + ah + a = belqabaha).

caqlilaawe (caqli + la(w) + e = caqlilaawe).

dhegeystaha (dhegeysad + te + ha = dhegeystaha).

dhugmalaawe (dhugmo + là(w) + e = dhugmolaawe).

ceeblaawe (ceeb + là(w) + e = ceeblaawaha).

ceebleyda (ceeb + ley + da = ceebleyda).

xilalaawe (xilo + la(w) + e = xilolaawaha).

## QAYBTA XIV.

## KU DHUFASHADA FALIDDA

Ku dhufashada falidda Af Soomaaliga waxay ku tahay lagama maarmaan. Ku dhufashadu haddaynan jirin lama kala bixiyeen falidaha qaarkood, ku dhufashada ayaan ku kala saarnaa tagtada iyo farriinleyda. Ku dhufashadu, waxay leedahay macno siimaantig ah. Sida aad halkaan ku aragto ku dhufashada keliya, ayaa kala saari karta labada macnood oo isku si erayadooda loo dhigo, in kastoo labada falidood ay kala duwan yihiin.

### TIXAHAAN GAAGAABAN AKHRI OO KU DHUFASHADA KALA BIXI

| **Farriinleyda** | **Tagtada** |
|---|---|
| la-kàalay! | la kaalày! |
| kéen! | keén! |
| àrag! | aràg! |
| samée! | sameé! |
| àkhri! | akhrì! |
| gée! | geé! |
| bìxi! | bixì! |
| is tàag! | is-taàg! |
| jébi! | jebì! |
| ìlaali! | ilaalì |
| kexée! | kexeé! |

### Eray falideed oo ku dhufasho ah oo tix u dhigma

| **Wyediinley** | **Sugidley (jawaan gaaban)** |
|---|---|
| Adigu ma aragtay wiilkii? | arkày! |
| Isagu ma arkay wiilkii? | aràg! |
| Iyadu ma aragtay wiilkii? | aràgtay! |
| Innagu ma aragnay wiilkii? | aràgnay! |
| Idinku ma aragteen wiilkii? | aràgte! |
| Iyagu ma arkeen wiilkii? | arkè! |

| | |
|---|---|
| Adigu ma cuntay hilibkii? | cùnay! |
| Isagu ma cunay hilibkii? | cùn (cunyày!) |
| Iyadu ma cuntay hilibkii? | cùntay! |
| Innagu ma cunnay hilibkii? | cunnày! |
| Idinku ma cunteen hilibkii? | cunté! |
| Iyagu ma cuneen hilibkii? | cuné! |

| | |
|---|---|
| Adigu ma maqashay hadalkii? | maqlày! |
| Isagu ma maqlay hadalkii? | maqàl (maqalyey!) |
| Iyadu ma maqashay hadalkii? | maqashày! |
| Innagu ma maqalnay hadalkii? | maqàlnay! |
| Idinku ma maqasheen hadalkii? | maqashé! |
| Iyagu ma maqleen hadalkii? | maqlé |

## LABANLAABKA FALIDAHA

Falidaha Af Soomaaliga waa la labanlaabaa. Labanlaabidda faliduhu waxay ku tustaa hawsha adkaynteeda iyo kooxaynteeda. **Falidda labanlaabkeedu wuxuu ka abuurmaa xaraf qaybinta hore oo falidda.** Markii falid la labanlaabayo xaraf qaybinta hore oo falidda ayaa lagu daraa falidda; sidaan oo kale (celi saca) cel+celi=celceli saca) **hawshaas, celceliska ahi, waxay ku tusaysaa hawl dhowr jeer la celceliyey intii laga gaaro** dantii laga lahaa.

### Falidaha Labanlaabma oo Tixo Ku jira

| Keli | Koox |
|---|---|
| Beerta **fal!** | beerta **falfala!** |
| hilibka **liq!** | hilbaha **liqliqa!** |
| **sheeg** hadalka! | **sheegsheega** hadalka! |
| soo **noqo** maanta! | soo **noqnoqda** maanta! |
| guriga **xir!** | guryaha **xirxira!** |
| way **wadday** baabuurkii! | way **wadwadday** baabuurkii! |
| waan **tiriyaa** lacagta! | waan **tirtiriyaa** lacagta! |
| waxaad soo **marteen** guri! | waxaad soo **marmarteen** guryo! |
| alaabti ayuu **isugeeyey!** | alaabihii ayuu **isugeegeeyey!** |
| daaqadaha **tir!** | daaqadaha **tirtira!** |
| ninka bal **eeg!** | nimanka **bal eegeega!** |
| ha **kuududin** meel! | ha **kuudkuudina** meelo! |

waan ku **socday** jidka!
way ku **wareegtay** aqalka!
meesha geelu **fariisto!**
gorgor waa **fariisan!**

waan ku **socsoconnay** jidadka!
way ku **warwareegeen** aqallada!
meesha geelu **farfariisto!**
gorgor waa **farfariisan** feero waa kala jeex! (calikaar)

## QAYBTA XV.

### TIRADA AAN QAABKA LAHAYN

Tirada Af Soomaaliga way ku sahlan tahay sidii lagu abuuri lahaa. Markii wax la tirinayo, tirada waxaa laga bilaabaa, kow, labo, saddex, afar,..... illowse, markii tiradu mid keliya tahay, waxa la yiraahdaa, **«waa hal shilin»»** ee lama yiraahdo: **«waa kow shilin».** Sidoo kale, markii tiriska la bilaabayo, waxaa laga bilaabaa (kow) ee lagama bilaabo (hal).

Afka Soomaaliga intii ka bilaabata labo, kuna, dhammaata bilyan waa koox. Magac kasta oo tiris ah oo koox ah, magaca kale oo la xiriiraa isna waa koox. Taas, waxaa ka mid ah, haddaan iraahdo «iyagu waxay joogaan **saddex guryood»**, amaba **«Iyagu waxay leeyihiin bilyan (guri guryood).** Af Soomaaliga waxaa ka suurtowda laba siyood, markii wax la tirinayo. Waxaa la dhiri karaa **(kowiyo toban, labiyo toban, saddex iyo toban)** amaba **(toban iyo kow, toban iyo labo, toban iyo saddex).** Dadku qof kastaa, siduu jecel yahay ayuu wax u tiriyaa. Haddii kowaadka laga bilaabo gaf ma aha, haddii tobanaadka laga bilaabana gaf ma aha.

**Gadaalraacayalka tireed.**

Magaca kooxda ah oo raaca tirada kooxda; waxaa lagu aqoonadaa gadaalraacaha kooxda tirada. Magacu hadduu ku dhammaado gadaalraacaha kooxda magaca (o, geed-o), ama (-yo, gur-yo), waxaa raaca gadaalraacaha tirada kooxda (-ood, yood), **lix iyo toban riyood,** waxaan ku jiraa lix qawlad-**ood,** amaba, waxaan soo maray shan gur-**yood).** Sidoo kale, shan naag**ood,** boqol gabdh-**ood.** Magacyada kooxda ahi, oo raaca tirada kooxda ah, waxay ku haraan sidaas; gadaalraacyadooduna, waxa weeye: **(-yow, -yin, oyin, -yaal, iyo kooxda labanlaabanta.**

— Shan oday (oda**yaal),** toban gole**yaal,** lix iyo toban gaba**yaal,** labaatan shaati**yaal,** lixdan waraaba**yaal,** afartan maraadi**yaal.**
— Kuman**yaal** geelalyow (kooxayn la sii kooxiyay).
— Lixdan sheekoo**yin,** ayaan akhristay.
— Afar geenyoo**yin,** ayuu soo gatay.

— Wuxuu soo maray boqol **(aal)** jid**ad.**
— Waxay leedahay shan koob **(ah).**
— Waxay igula hadleen lix af**af.**
— Dawladdu, waxay dirtay kun baas (**as**).

Xiriiriyaha (oo) ee tixda, ayaa tirada kooxda ah, iyo magaca kooxda ah raaca. Markaas kaddib magacyadu, waxay noqonayaan sifayn. Taas waxaa ka mid ah, haddaan iraahdo: «**Iyagu waxay leeyihiin boqol guri** (-yood) oo waaweyn». «**shan gabdhood oo dhaadheer, ayaa yimdi**». Xiriiriyaha (oo) iyo magaca kooxda oo ka danbeeya, waxay ku tusaan sifayn (-oo waaweyn, -oo dhaadheer). Sifayntu waxay ku saabsan tahay **tirada iyo magacyada tirsan.**

## TIRADA QAABKA LEH

Tirada qaabka luhu, iyadu way ka duwan tahay tirada kale. Waxay kaga duwan tahay qoridda iyo akhriska, hase yeeshee, abuuriddeedu ma leh dhib. Markii la abuurayo tirada **(kow, labo, saddex, afar, shan, lix, toddoba, siddeed, sagaal, toban),** ayaa waxaa lagu daraa gadaalraacaha tirada qaabka leh (-aad); gadaalraacaha tiradu wuxuu ka raacaa magacyada tirada qaabka leh gadaal. Gadaalraacaha markaas kaddib ayaa waxaa raaca qodobka magaca (-ka). Hadda, waxaad arkaysaa qoristooda iyo akhriskooda:

1° koow + aad + ka = koowaadka.
2° laba + aad + ka = labaadka.
3° saddex + aad + ka = saddexaadka.
4° afar + aad + ka = afaraadka.
5° shan + aad + ka = shanaadka.
6° lix + aad + ka = lixaadka.
7° toddoba + aad + ka = toddobaadka.
8° siddeed + aad + ka = siddeedaadka.
9° sagaal + aad + ka = sagaaladka.
10° toban + aad + ka = tobanaadka.
11° kow iyo tob + naad + ka = kow iyo tabnaadka.
12° laba iyo tob + naad + ka = labo iyo tobnaadka.
20° labaatan iyo koow + aad + ka = labaatan iyo koowaadka.
30° soddon + aad + ka = soddomaadka.
100° boqol + aad + ka = boqolaadka.
1000° kum + aad + ka = kumaadka.

## QAYBTA XVI.

## MAGACUYAALLADA AF SOOMAALIGA

Sida la og yahay, magacuyaallada Af Soomaaligu waxay u qaybsamaan sagaal qaybood:

1.

| Falaha | La-Falaha |
| --- | --- |
| Anigu | Aniga, i, ii, |
| Adigu | Adiga, ku, kuu, |
| Isagu | Isaga, u, iyada, iyaga, |
| Iyadu | Iyada, |
| Innagu | Innaga, na, noo, |
| Idinku | Idinka, idin, idiin, |
| Iyaga | Iyaga. |

2. **Magacuyaalka qudhaalaha (is).**

| Falaha | La-falaha |
| --- | --- |
| Anigu (laftaydu, qudhaydu) | Aniga (laftayda, qudhayda) |
| Adigu (laftaadu, qudhaadu) | Adiga (laftaada, qudhaada) |
| Isagu (laftiisu, qudhiisu) | Isaga laftiisa, qudhiisa) |
| Iyada (lafteedu, qudheedu) | Iyada (lafteeda, qudheeda) |
| Innagu (lafteennu, qudheennu) | Innaga (lafteenna, qudheenna) |
| Idinku (laftiinnu, qudhiinnu) | Idinka (laftiinna, qudhiinna) |

3. **Magacuyaalka lihiga.**

| Falaha | La-falaha |
| --- | --- |
| aqalkaygu | Aqalkayga |
| Aqalkaagu | Aqalkayga |
| Aqalkiisu | Aqalkkiisa |
| Aqalkeedu | Aqalkeeda |
| Aqalkeennu | Aqalkeenna |
| Aqalkiinnu | Aqalkoodu |
| Aqalkoodu | Aqalkiinna |

Ogow, in Magacuyaalka lihigu uu ka abuurmo magac kasta. Magacyadaas, waxaa raaca gadaalraacaba lihiga.

aqalk-ay-gu (-ay-)
aqalk-aa-gu (aa-)
aqalk-iisu (-iisa)
aqalk-eedu (-eeda)
aqalk-eennu (eenna)
aqalk-iinnu (-iinna)
aqalk-oodu (-ooda)

4. **Magacuyaalka Tilmaaneed.**

| Keli | Koox |
|---|---|
| kan (lab) | kuwaan kuwa + kan (dh. l.) |
| tan (dheddig) | kawaas (dh. l.) |
| kaas (lab) | |
| taas (dheddig) | kuweer (dh. l.) |
| kanoo kale (l.) | |
| teer (dheddig) | |
| tanoo kale (dh.) | kuwaanoo kale (dh.) |
| taasoo kale (dh.) | kuwaasoo kale (dh. l.) |
| keeroo kale (l.) | kuweeroo kale (dh. l.) |
| teeroo kale (dh.) | |

5. **Magacuyaalka xadaysan (is).**

Magacuyaalka xadaysan (is) waxaa gadaal ka raaca gadaalraacyada lihiga. Sidaas daraaddeed, wuxuu u eg yahay magacuyaalka qudhaalaha (lafta, nafta, qudha).

isk-ay-gu (-ga)
isk-aa-gu (-ga)
isk-eedu (-eeda)
isk-iisu (-iisa)
isk-eennu (-eenna)
isk-iinnu (-iinna)
isk-oodu (-ooda)

dhammaant-iin, waad iska tagteen
dhammaant-een, waan iska tagnay

dhammaant-ood, way iska tageen
dhammaant-een, waan iska tagnay
kullig-een, waan iska tagnay
kullig-iin, waad iska tagteen
kullig-ood, way iska tageen

Magacuyaallada xadaysan ama jaango'an, waxaa kaloo la weheliya magacuyaallo jaango'an. Iyagu waxa weeye:

**Wax kasta, qof kasta, mid kasta, kuwo kasta, nin kasta, rag kasta, naag kasta, dad kasta, iyo kuwa kale oo badan.**

6. **Magacuyaallada weydiinleyda ah.**

yaa-yaa yimid?
maxaa- maxaa dhacay?
kee- ninku kee yahay? gurigu, kee yahay?
tee- naagtu, tee tahay? laantu tee tahay?
kuwee-nimanku kuwee yihiin?
kuwee-naaguhu kuwee yihiin?
kuwee-guryuhu, kuwee yihiin?
meeqa-intee, immisaa?
nimanku-intee yihiin?
guryuhu-immisaa yihiin?
dugsiyadu meeqa yihiin?
shaarku-meeqa buu joogaa?
funaanaddu meeqa bay joogtaa?
surweelku immisuu joogaa? (lacagtiisu waa maxay?
hilibku intee joogaa?

7. **Magacuyaalka tixaha isku xira amaba ku jiri kara tix la wada og yahay.**

kii (l.) tii (dh.) kuwii (dh. l.) intii (dh. l.)
qofkii (dh. l.), wixii (dh. l.), midkii (l.)
middii (dh.).

markaan jidka soo maray, waxaan ku arkay kii?
markaad jidka soo martay, ma ku aragtay tii?
markuu jidka soo maray, ma ku arkay kuwii?
markay soo martay jidka, waxay ku aragtay midkii.

markaan soo marnay jidka, waxaan ku aragnay middii.
markaad soo marteen jirdka, waxaad ku aragteen qofkii.
markay soo mareen jidka, waxay ku arkeen wixii.

8. **Magacuyaalka diiddaalaha.**

qofna, waxna, waxbaba, waxba, midna, ninna, tuna, kuwana, dadna, ragna, kuna, gurina, geedna.

Anigu qofna ma arkin
Adigu waxna ma haysatid
Isagu waxbaba ma haysto
Iyadu waxba ma haysato
Ninku midna ma haysto
Innagu ninna ma aannaan baryin
Idinku dadna ma aadnaan baryin
Iyagu ragna ma ay baryin
Isagu geedna ma harsan
Isagu tuna muunan arag
Wiilku gurina muunan gelin

Ogow, magacuyaalka diiddaaluhu wuxuu raacaa erayada diiddoleyda (ma iyo summad dhammaadka diiddoleyda falidda (-in).

9. **Magacuyaalka aan xadaysnayn amaba aan jaangooyo lahayn.**

qof, mid, wax, waxuun, ku, tu, kuwo, nin, dad, miduun, ninuun, naaguun iyo kuwo kale.

qof ayaa yimid maanta
mid ayaa yimid maanta
ku ayaa yimid maanta
tu ayaa timid maanta
kuwo ayaa yimid maanta
nin ayaa yimid maanta
ninuun ayaa yimid maanta
dad ayaa yimid maanta
naag ayaa timid maanta
dad ayaa yimid maanta
wax ayaan soo ogaaday maanta
waxuun ayay soo ogaadeen maanta

## GADAALRAACYADA MAGACYADA AF SOOMAALIGA

Gadaalraacyada magacyadu waxay ka mid yihiin xubnaha erayada. Eray markuu abuurmo, wuxuu ka abuurmaa xubno dhawr ah. Xubnahaas waxaa ka mid ah salka iyo laanta iyo summad dhammaadka iyo qodobka magaca iyo jaangooyo xaaladleyda magaca amaba gadaalraacaha magaca. Gadaalraacyada magacu waxay gadaal ka raacaan magacyada aan wax u gooni ahayn horay amaba dhexda. Sida afafka kale, Af Soomaaligu wuxuu leeyahay gadaalraacyo ku tusaya qof ama wax kale. Sidaas daraaddeed qaybta gadaalraacuyadu waxay u qaybsamaan lix qaybood.

### I. Gadaalraacyada magacyada labka ah qaybtooda:

1. Gadaalraacaha (-le-) caqli-**le**, biyoo**le**, geel-**le**, naagoo-**le**, beer-**le**, (beer+**re**=beerre).
2. Gadaalraacaha (-**laawe**-) caqli-**laawe**, dhaqan-**laawe**, geel-**laawe**, diin-**laawe**).
3. Gadaalraacaha (-**e** (-**ye**-) dil-**e**, shaqee-**ye**, cun-**e**, cabb-**e**.
4. Gadaalraacaha (-**te**-), dhageys-**te**, samays-**te**, jeclays-**te**.
5. Gadaalraacaha (-**low**-), caqli-**low**, been-**low**, faala-**low**, run-**low**.
6. Gadaalraacaha **(-yaa-, -shaa-, -aa-)**, **gabay-aa**, **lumi-yaa**, dhaantee-**yaa**, qayli-**yaa** ama qay-**shaa**.
7. Gadaalraacaha **(-qabe)** belo-**qabe**, ciil-**qabe**, naxdin-**qabe**, xishood-**qabe**.
8. Gadaalraacaha (-**yahan**-), dagaal-**yahan**, gun-**yahan**, dhaqan-**yahan**.
9. Gadaalraacaha (-**yaqaan**-) xaajo-**yaqaan**, xeel-**yaqaan**, xil-**yaqaan**.
10. Gadaalraacaha (-iste-), eleetrij-**iste**, jeoloj-**iste**, muusik-**iste**. Gadaalraacahani wuxuu inaka soo galay afafka shisheeyaha.

### II. Gadaalraacayada Magacyada Dheddiga ah qaybtooda.

1. Gadaalraacaha (-**do**-) baabuurwad-**do**, jeex-**do**, baaq-**do**, liq-**do**, luud-**do**.
2. Gadaalraacaha (-**to**-) sheeg-**to**, dheegaysa-**to**, keen-**to**, xoolo-dhaqa-**to**.
3. Gadaalraacaha (-**so**-), sii-**so**, kaxay-**so**, samay-**so**, gey-**so**, lumi-**so**, ilaali-**so**.

4. Gadaalraacaha (**-sho**), maqa-**sho**, hada-**sho**, fa-**sho**, lu-**sho**, fuu-**sho**.
5. Gadaalraacaha (**-ley-**), caqli-**ley**, ceeba-**ley**, been-**ley**, faala-**ley**, faan-**ley**, biyoo-**ley**.
6. Gadaalraacaha (-là) ceeb-là, calow-là, camal-là, cawra-là, cood-là, qalam-là, qiil-là, quud-là, harag-là.
7. Gadaalraacaha (-yad-ad-), macallim-ad, makaanik-àd, dhakhtar-àd, miskiin-àd, karraani-yàd, askeri-yàd.
8. Gadaalraacaha (-yahanàd-) dagaal-yahanàd, dhaqan- yahanàd, xil-yahanàd.
9. Gadaalraacaha (**-qabto**) belo-**qabto**, shar-**qabto**, ciil-**qabto**, habaar-**qabto**, hagar-**qabto**, duco- **qabto**, jirra- **qabto**.

Ogow inay jiraan gadaalraacyo kale oo nooga yimid afafka shisheeyaha siiba afka Talyaaniga iyo kan Ingiriiska, gadaalraacyadaasi, waxaa weeye:

1. Gadaalraacaha (**-toor**) direk-**toor**-ka, ambaasha-**toor**-ka, administra-**toor**-ka, raadiye-**toor**-ka, dat-**toor**-ka.
2. Gadaalraacaha, (**-eer-**) **-yeer-**) inji-**yeer**-ka, sekret-**eer**-ka, minist-**eer**-ka.
3. Gadaalraacaha (-tar-), dhakh-**tar**-ka, inispek-**tar**-ka.
4. Gadaalraacaha (**-aal-**), jener-**aal**-ka, miner-**aal**-ka.

Gadaalraacyadaasi waa inta la hubo inay Afka Soomaaliga soo galeen oo ay ka soo galeen afafka shisheeyaha, loona baahnaa, in laga bixiyo erayadaas afka Soomaaliga, maxaa yeelay, gadaalraacyadaasi waxay ka dhigayaan afkeenna hodan iyo deeq. Af gooni u istaagi karaa ma jiro adduunka. Af walba, af kale ayuu ka amaahdaa erayada. Sidaas daraaddeed, afafku way isu baahan yihiin. Sidoo kale erayadii Af-Carabiga naga soo galay, afkeenna hodan ayay ka dhigayaan, oo waa inaan u qaadanno erayadaas, sidii dadku u yaqaanno, innaga oo aan marna halmaamayn in afku isagu uu is-dhiso, oo uu yahay wax dhaqanka ku saabsan.

III. **Gadaalraacyada magacyada qaybtooda:**

1. Gadaalraaca (**-o-**), (**-yo-**), far-**o**, naag-**o**, kolay-**o**, mindiy-**o**, mir-**o**.
2. Gadaalraaca (**-oyin-**), tiro-**oyin**, waddo-**oyin**, qaanso-**oyin**, eeddo-**oyin**.

3. Gadaalraaca (**-yaal-**), girgire-**yaal**, huuri-**yaal**, gole-**yaal**, tuke-**yaal**, guulwade-**yaal**.

IV. **Gadaalraacyada magacyada labanlaabma qaybtooda:**

1. Gadaalraacaha (**-ab-**), koob-**ab**, dab-**ab**, qab-**ab**, kub-**ab**, lab-**ab**.
2. Gadaalraacaha (**-ad-**), jid-**ad**, qod-**ad**, fad-**ad**, wad-**ad**, cad-**ad**.
3. Gadaalraacaha (**-al-**), nal-**al**, kal-**al**, wiil-**al**, kuul-**al**, buul-**al**.
4. Gadaalraacaha (**-ar-**) war-**ar**, bar-**ar**, bur-**ar**, shir-**ar**, bir-**ar**.
5. Gadaalraacaha (**-as-**) muus-**as**, miis-**as**, mas-**as**, bas-**as**, moos-**as**.
6. Gadaalraacaha (**-ag-**), ruug-**ag**, tuug-**ag**, siig-**ag**, muug-**ag**, buug-**ag**.
7. Gadaalraacaha (**-aq-**), suuq-**aq**, buuq-**aq**, huq-**aq**, baaq-**aq**, miiq-**aq**.
8. Gadaalraacaha (**-af-**), af-**af**, shaf-**af**, luf-**af**, kaf-**af**, kuf-**af**.

V. **Gadaalraacyada magacyada la sii kooxeeyey qaybtooda:**

1. Gadaalraacaha (**-yow-**), geeda-**yow**, naaga-**yow**, cida-**yow**, roobab-**yow**.

VI. **Gadaalraacyada magacyada duugoobay:**

1. Gadaalraacaha (**-an-**), dhagx-**an**, ugx-**an**, ama dhagax-**yo**, ugax-**yo**, sag-**an**.

## QAYBTA XVII.

## SHAQALLADA (O, A) OO ORDA

Af Soomaaligu sida afafka qaarkood, wuxuu leeyahay shaqallada «O» iyo «A» ee ordaa, waxayna ka galaan falidaha ku dhammaada (l) dhexda, iyo magacyada ku dhammada (l). Erayadaasi, waxay yihiin laba xubnaleyda. Sida (hadal), (maqal) (shuqul). Erayadaan sidaad ku aragtid (a)-du waxay kaga jirtaa erayga dhexda. Illowse haddii mec-falidaha (hadal, maqal) summad dhammaad la raacsiiyo, (a)-du, mecsha way ka baxaysaa oo jagadeedii way ka ordaysaa. Sidoo kale (o)-duna, waxay ka gashaa erayga dhexda, sida aad halkaan ku aragtid (orod). Illowse, haddii summad dhammaadka lagu daro, (o)-dii jagadeedii way ka tegaysaa (ord-**ayaa,** hadl- **ayaa** shuqlan yahay).

## DAREENKA **(Dareenleyda)**

Erayda dareenku waxay ku tusaan dareen inuu dhaco loo maleeyo. Erayadaasi, waxay tixaha ka galaan horay amaba gadaal. Sida ay u badan yihiin, erayadaasi waxay isku xiraan laba tixood, inkastoo ay tix geli karaan. Erayada dareenku waxa weeye:

**Show, sow, mindhaa, armaa.** Erayadaasi markii labada tixood ay isku xiraan ayay kaddibna macno u yeelaan tixaha. Iyaga waxaa raaca erayga **«Haddii».** Erayada dareenka oo tixo ku jira.

**Show** haddaan biyaha ku dabaalanno, daad naqaadee!
**Show** bahalku ku cunee, haddaad u dhawaatid!
**Show** roob dhex nagu helimaayo, haddaan maanta safarno!
**Sow** shabeelku ku dilimaayo, haddaadan u deyn ilmihiisa!
**Sow** haddaadan shaqaysan, gaajo u dhimanmaysid!
**Sow** hadduunan wax baran, jaahilnimadu dilimayso!
**Mindhaa** wiilku iga caroodee, haddaan la kaftamo!
**Mindhaa** naagtu i caydee, haddaan la hadlo!
**Mindhaa** haddaad waaniso ninka, kaa xumaadee!
**Armuu** ninku gaajo u baqtiyaa, hadduunan shaqaysan!
**Armay** baddu na liqdaa, haddaan ku dabaalanno maanta!
**Armaa** isaga la dilaa, hadduu dembi galo!
**Armaad** iga naxdaa, haddaan runta kuu sheego!

**Ogeysiin:**

Erayada dareenku waxay isku xiraan laba tixood. Tixda danbe, waxay ku xiran tahay tan hore. Taas, waxay uga eg yihiin shardileyda, maxaa yeelay labada tixood way isku xiran yihiin. Haddayan tan hore jiri lahayn, tan kalena ma jirteen. Sidaas daraaddeed, waxay uga eg yihiin hawl qabadkooda shardiley.

SUGEYAALKA **(waa, baa, ayaa, yaa)**

Sugeyaalku waxay sugaan hadalka oo adkeeyaan. Tix kasta oo ay ku jiraan erayadaasi, wax sugan weeye. Sidaas daraadeed, waxaa lagu magacaabay suge**yaal.** Sugeyaalku waxay sugaan hawsha la qabanayo. Sugeyaalka (baa, ayaa, yaa), waxay sugaan qofka shaqadiisa, illowse ma sugaan qofka qudhiisa. Sugaha (waa), wuxuu sugaa qofka iyo hawshiisa labadaba. Haddaan iraahdo: **«aqal ayaa (aa, yaa) gubtay!».** Tixdaasi waxay ku tusaysaa inay sugan tahay aqalka gubashadiisu lamase yaqaan aqalkii gubtay. Haddaanse iraahdo: **aqalkii waa (wuu) gubtay»** gubashada iyo aqalkuba, way sugan yihiin. Sidaas daraaddeed, waxaan ogaannay in erayga sugaha ah (waa) uu **wax sii suge yahay.** Marka sugeyaalka (baa, yaa), waxay yihiin **sugeyaal.**

**Sugeyaalka:**

WAX SII SUGAHA

| **Baa** | **Ayaa (yaa)** | **Waa** |
|---|---|---|
| Naag **baa** timid | Naag **yaa** timid | Naag **waa** timid |
| Aqal **baa** gubtay | Aqal **ayaa** gubtay | Aqal **waa** gubtay |
| Geel **baa** lumay | Geel **ayaa** lumay | Geel **waa** lumay |
| Dugsi **baan** galay | Dugsi **ayaan** galay | Dugsi **waan** galay |
| Soor **buu** cunay | Soor **ayuu** cunay | Soor **wuu** cunay |
| Guri **baa** dumay | Guri **ayaa** dumay | Guri **wuu** dumay |
| Koob **baa** jabay | Koo **ayaa** jabay | Koob **wuu** jabay |
| Geed **baa** ruqay | Geed **ayaa** ruqay | Geed **waa** ruqay |
| Askar **baa** timid | Askar **ayaa** timid | Askar **waa** timid |
| Rag **baa** shiray | Rag **ayaa** shiray | Rag **waa** shairay |

## VIII. **FARRIINLEY.**

Farriinleydu waa falid qofka hadlaya uu farriin farayo qofka lala

hadlayo; qofka lala hadlayo, wuxuu noqdaa qofka saddexaad oo keliya iyo qofka saddexaad oo kooxda ah. Farriinleydu waxay ka abuurantaa erayga salkiisa. Erayga salkiisa iyo farriinleydu waa isku hal. Farriinleydu waxay u qaybsantaa saddex farriinley.

I. Farriinleyda Sahlan (gad, keen, cab, cun, luq, sooc, wad, sheeg).

II. Farriinleyda qudhaaleyda (gado, keeno, sooco, wado, sheego, shaqayso iibso).

III. Farriinleyda adag (gelinsii, dhegaysii, maqashii, seexi, fariisi).

— Farriinleyda sahlani waa middii ku dhammaata shibbaneyaasha (-g, -q, -n, -r, -b, -f, -c, -x, -d, -y, -w, -s).

— Farriinleyda qudhaaleydu waa middii ku dhammaata shaqalka (-o) ama summadda (-so).

— Farriinleyda adagi, waa middii ku dhammaata fallar falideedka (-sii, -shii, -i).

**Farriinleyda sahlan**

| Keli | Koox |
| --- | --- |
| Sheeg hadalka | Sheeg-**a** hadalka |
| Liq hilibka | Liq-**a** hilibka |
| Keen qalinka | Keen-a qalimada |
| Iska jir ninka | Iska jir-**a** nimanka |
| Cab biyaha | Cabb-**a** biyaha |
| Ku kuf meesha | Ku kuf-a meesha |
| Kala sooc xoolaha | Kala sooc-**a** xoolaha |
| Ka bax guriga | Ka bax-**a** guryaha |
| Wad baabuurka | Wad-**a** baabuurrada |
| La kaalay biyo | La kaalay-**a** biyo |

**Farriinleyda qudhaleyda**

| Keli | Koox |
| --- | --- |
| dhagays-o hadalka | dhageys-**ta** hadalka |
| seex-o guriga | seex-**da** guryaha |
| sheeg-o dacwada | sheeg-**ta** dacwada |

| | |
|---|---|
| wad-o baabuurka | wa-**ta** baabuurrada |
| xool-o sooco | xoolo socc-**da** |
| keen-o ilmaha guriga | keen-**ta** ilmaha guriga |
| dil-o biciid | di-**sha** biciidyo |
| fur-o albaabka | fur-**ta** albaabka |
| fariis-o halkaan | fariis-**ta** halkaan |
| dheh-o tixdaada | iraah-**da** tixihiinna (dheh-**da**) |
| ku soc-o jidka | ku soc-**da** jidadka |
| faro xal-o | faro xa-**sha** |

**Farriinleyda adag**

| Keli | Koox |
|---|---|
| maqa-**shii** ninka hadalka | maqashii-**ya** nimanka hadalka |
| gelin-**sii** nimanka xaajada | gelinsii-**ya** nimanka xaajada |
| farii-sii ragga | fariisi-**ya** ragga |
| fuul-**i** wiilka baabuurka | fuuli-**ya** wiilasha baabuurka |
| i dhac-**sii** hadalka | na dhacsii-**ya** hadalka |
| ii ilaal-**i** guriga | noo ilaali-**ya** guryaha |
| iska kay da**a** | iska kaaya daa-**ya** |
| ful-**i** xaajada | fuli-**ya** xaajada |
| ka shaqay-**sii** nimanka | ka shaqaysii-**ya** nimanka |
| i wargel-**i** (aniga) | na wargeli-**ya** (innaga) |
| ka yeer-**i** buunka | ka keeri-**ya** buunka |
| ka caray-**sii** ninka | ka caraysii-**ya** nimanka |
| hagaaj-**i** guriga | hagaaji-**ya** guryaha |
| wanaaj-**i** martida | wanaaji-**ya** martida |
| seex-**i** carruurta | seexi-**ya** carruurta |

**Ogeysiin:**

1. Ogow, in farriinleyda sahlani ay midaynta ku dhammaato shibaaneyaasha (-g, -q, -n, -r, -s, -b, -f, -d, -x, -y), (bar shibbanaha, -w, bar shaqallada (y). Keliyeyna farriinleyda sahlani waxay leedahay summad dhammaad. Kooxda farrinleyda sahlani waxay leedahay summad dhammadka kooxda (-a) oo qofka saddaxaad oo kooxda ah oo lala hadlayo; sida (tag) (ke.) tag-a (ko.).

2. Ogow, in farriinleyda qudhaaleyda keli ku dhammaato shaqalka (-o), farriinleyda keli ee qudhaaleydu waxay leedahay summad

dhammaadka (-o). Kooxaynta farriileyda qudhaaleydu waxay leedahay summad dhammaadka kooxda (-ta), markii faliduhu ku dhammaadaan shaqalka (-o) iyo shibbaneyaasha (-g, -s, -n, -r, b, -f) haddiise faliddu ku dhammaato shaqalka (-l) kooxda farriinleyda qudhaaleydu waxay yeelataa summad dhammaadka kooxda (-sha), sida (dil-**o**, di-**sha**). Markiise faliduhu ku dhammaadaan shibaneyaasha (-c, -q, -x, -d, -h, -y, -w) kooxda farriinlyeda qudhaaleydu waxay noqotaa (**-da**), sida (sooc-**o**, -sooc-**da**).

3. Ogow, in farriinleyda adagi, keliga ay ku dhammaato, (fallar falideedka (-sii), markii faliduhu ku dhammaadaan shaqallo iyo shibbaneyaasha (-c, -q, -x, -d, -h, -y) (bar shibbanaha ah), (-w, bar shibbanaha ah), keliya farriinleyda maqashii-ya, adagu waxay noqotaa falidahoo idil (-ya), sida shaqaysii-ya, fariisi-ya, fuuli-ya, ka shaqaysii-ya, ka caraysii-ya).

**Diiddoleyda Farriinleyda sahlan**

| Keli | Koox |
|---|---|
| ha sheeg-**in** hadalka | ha sheeg-**ina** hadalka |
| ha liq-**in** hilibka | ha liq-**ina** hilbaha |
| ha keen-**in** qalinka | ha keen-**ina** qalimada |
| hayska jir-**in** ninka | hayska jir-**ina** nimanka |
| ha cabb-**in** shaaha | ha cabb-**ina** shaaha |
| ha ku kuf-**in** meesha | ha ku kuf-**ina** meesha |
| ha kala sooc-**in** xoolaha | ha kala sooc-**ina** xoolaha |
| ha ka bix-**in** guriga | ha ka bix-**ina** guryaha |
| ha wad-**in** baabuurka | ha wad-**ina** baabuuradda |
| ha lakaalay-**in** biyo | ha lakaalay-**ina** biyo |

**Diiddoleyda farriinleyda qudhaaleyda**

| Keli | Koox |
|---|---|
| ha seex-**an** (nin)guriga | ha seexan-**nina** guriga |
| ha dhegays-**an** hadalka | ha dhegaysan-**nina** hadallada |
| ha sheeg-**an** (nin) dacwada | ha sheegan-**nina** dacwada |
| ha wad-**an** baabuurka | ha wadan-**nina** baabuuradda |
| ha sooc-**an** xoolo | ha soocan-**nina** xoolo |
| ha keen-**in** ilmaha guriga | ha keen-**ina** (keenin-nina) |
| ha dil-**an** biciid | ha dilan-**nina** biciidyo |

| | |
|---|---|
| ha fur-**an** albaabka | ha furan-**nina** albaabyada |
| ha farii-**san** halkan | ha fariisan-**nina** halkaan |
| ha ku soc-**on** jidka | ha ku socon-**nina** jidadka |
| ha faro xal-**an** | ha faro xalan-**nina** |
| ha dhah-**an** tixdaa | ha dhahan-**nina** tixahiinna |

### Diiddoleyda farriinleyda adag

| **Keli** | Koox |
|---|---|
| ha maqashii-**n** ninka hadalka | ha maqashiin-**nina** ninka hadalka |
| ha gelinsii-**n** nimanka xaajada | ha gelinsiin-**nina** nimanka xaajada |
| ha fuul-**in** baabuurka wiilasha | ha fuulin-**nina** wiilasha baabuurta |
| hay dhacsii-**n** hadalka | ha na dhacsiin-**nina** hadalka |
| hay ilaal-**in** guriga | ha noo ilaalin-**ina** guryaha |
| hays kakay dey-**n** | hayska kaayo deyn-**nina** |
| ha ful-**in** xaajada | ha fulin-**nina** xaajada |
| ha ka shaqaysii-**in** nimanka | ha ka shaqaysiin-**nina** nimanka |
| hay war gel-**in** (aniga) | ha na war gelin-**nina** (innaga) |
| ha ka yeer-**in** buunka | ha ka yeerin-**nina** buunanka |
| ha ka caraysii-**n** ninka | ha ka caraysiin-**nina** nimanka |
| ha hagaaj-**in** guriga | ha hagaajin-**nina** guryaha |
| ha wanaaji-**in** martida | ha wanaajin-**nina** martida |
| ha seex-**in** carruurta | ha seexin-**nina** carruurta |

**Ogeysiin:**

1. Ogow, in diiddoleyda farriinleyda sahlani keliyeynta ay leedahay summad dhammaadka diiddo farriinleyda sahlan (-**in**) kooxayntuna ay leedahay summad dhammaadka diiddo farriinleyda sahlan (-ina).

2. Ogow, in diiddo farriinleyda qudhaaleydu, keliyeynta ay leedahay summad dhammaadka diiddo farriinleyda qudhaaleyda (-an), kooxayntuna ay leedahay (-nina).

3. Ogow in diiddo farriinleyda adagi, keliyeynta ay leedahay summad dhammaadka diiddo farriinleyda adag (-in, n) kooxayntuna ay leedahay (-nina). Ogow in erayga diidaha ah (ha) uu galo diiddo farrinleyda oo idil.

## AQYBTA XVIII.

## X I S L E Y D A

Xisleydu Af Soomaaliga waxay muujisaa xiska qofka hadlayaa, uu ku muujinayo erayda xisleyda. Xisleydu, waxay caddaysaa qofka hindisihiisa iyo xiskiisa. Qofku xiskiisa oo hadal ku imanaya, wuxuu ku muujiyaa danqahsadiisa amaba faraxiisa. Xisleydu Af Soomaaliga, waxay u qaybsantaa sagaal qaybood:

1. **Digid:**

Digiddu waa erayo qofka hadlayaa uu uga digayo qofka uu la hadlayo wax. Erayada digiddu waa:

Hà!, Bà! Bà'aa! à! oy-yo! Haa! AA! Hiihii! O-O', AA. AA. suul baa ka jabay! OO..... O.... OO. Madaxaa layga hayaa! Hà, ha cunin hilibka! AA..... AA.... Caloosha ayaa layga hayaa!

2. **Yeerid:**

Yeeriddu waa erayo qofka hadlayaa uu uga yeerayo qofka lala hadlayo. Erayada yeeriddu waa:

War yaa! (lab). Naa yaa! (dheddig). War heedhe! (l.). Naa heedhe! (dh.) War maandhe! Naa maandhay! Maandhow! Maandhay! Maandhooyin! (k.) Maandheyaal! (k.) War yaa heedhe! Naa yaa heedhe! War yaaya heedhe! (ko.) War yaa heedhe! Yarow! (l.) Yarey! (dh.) Gabarey! Walaal! Walaaley! Aabbe! Hooyo! Ina-adeerow! Ina-adeerey! Ina-adeerrayaal! Eeddo! Adeer! Abti! Ayeeyo! War heedhe! maandho, hadalka naga daa! Yarow, jidka ka leexo! Naa yaa heedhe! maandhay! hadalkaas maaxad u tiri!

3. **Dareen iyo yaab:**

Dareenka iyo yaabku, waa erayo uu ku tusayo qofku dareenkiisa iyo yaabkiisa. Erayada dareenka iyo yaabku waa:

Waa balaayo! Waa warey! Waa warey! La hoog lana bà! Hoogay

oo ba'ay! Hoogtay oo ba'day! Hoogay oo ba'ay! Hoognay oo ba'nay! Hoogte oo ba'de! Hooge oo be'e! Wax la arag, waxna laaban, maanaa waalan mise dadka! War nimanyohow bal xaajadaas ila arka! War ninyohow! Naa haweeney yahay! Waxaanoo kale weligay iyo waaqay ma arag! War yaa Ilaah yaqaan! War yaa loo sheegaa xaajadaas oo aan yaabin! Taasina waa hoog iyo ba', iyo gablan! War hoy heedhe, bal arrintaa foolxumadeeda arka! War maanaa waalan mase Cadan baa laga heesayaa! War sidee yeelaa! Cawru waa isagee dhib badanaa! Cawru waa iyadee qallafsanaa! Cawru waa isagee aqoonxumaa!

Ogow, **in dareenku iyo yaabku ay noqdaan eray-eray, amaba** koox-koox.

4. **Cay iyo yaqyaqsi:**

Cayda iyo yaqyaqsigu waa erayo dadka caydiisa u go'an. Erayada cayda iyo yaqyaqsiga muujiyaa waa:

Kis! Kir iyo ban! Uf! ufa! Akh... Akh! War Kac! War iska tag! War iska taga! Wasakh yohow! Wasakh yahay! Bax... bax... bax! War bax bax! Naa bax! War baxa! Qurun yohow! Qurun yahay! Wax yohow urayaa iska tag! Wax yahay uraysaa iska tag! Nacallad yohow naga fogow! Nacalad yahay naga fogow! Bakhtiyohow iska tag! Caasi yohow, i daa! Bakhayl yohow i dhaaf! Bakhayl yahay i daa! Iimaan laawe yohoy i dhaaf! Sirrow yohoy iska tag! Markhaati-beenaala yohow iska tag! Tuug yohow bax! Seegseeg yohow i daa! Duqon (nacas) yohow aammus! Sawaab yohow i dhaaf! Faallow yohow hay sixrin! Sixirrow yohoy (yahay) hay sixrin! Badow yohow (yahay) iska aammus! Miskiin yohow wax ma ogid!Baryo-ku-nool-yohow shaqayso! Afmiinshaar yohow hay lumin! Musuqmaasuq yohow beenta daa! Laaluush-cune yohow halkaas lagugu dheg! Dhurwaa yohow hay cunin! Jaqjaqle yohow iga aammus! Goroyo yahay haygu qaylin! Yaxaas yohow (yahay) hay cunin! Dameer yohow asxaan ma lihid! Xaasid yohow i dhaaf! Daanyeer yohow (yahav) iska tag! Weer yohow (yahay) ama dhidar yohow iska bax.

5. **Aammusid:**

S... s... s! Us... us! Us... u! Shib... shib... shib! Heedhe, aammus! aammus... .mmus! Sh... sh... sh... sh!

6. **War-gurid:**

War guriddu waa erayo markii labo qof amaba rag shir meel ku qabo, ay isaga war guraan. Erayada war guriddu waa:

Ha... haa... haa! HM... hm... hm! Waa saas... Waa saas... waa saas! Waa yahay! Waa hagaag... waa hagaag! Gartay... gartay... gartay! Ku gartay... ku gartay... ku gartay! Waan ku maqlayaa... waan ku maqlayaa! Wad... wad... wada! Gari Ilaan bay taqaan... gari Ilaah bay taqaan... gari Ilaah bay taqaan! Waa guddoon... waa guddoon!.

7. **Habaar:**

Habaarku wuu ku badan yahay Af Soomaaliga. Qof markuu qof habaarayo, erayo iyo tixo ayuu ku isticmaalaa. Habaarku wuu ku badan yahay dhaqanka Soomaalida. Erayada habaarku way ka badan yihiin erayada ducada. Tixaha ama erayada habaarku waxaa weeye:

Dhimo idam Alla! Kufoo dhac! Lixda lixaad beel! Indhuhu ku tirme! Indho-beel! Isbuuro! Jinni kula teg! Alla ku qabay! Bawdo ka jab! Aabbahaa alla gub! Balaayo kugu dhacday! Ibleys (shaydaan) kula teg! Waq ha ku dilo! Balaayo beerka ku kala goysay! Khasaarto iyo hoog Allaha kuu keeno! Cirka balaayo kaaga soo degtay! Idam Alla nafta gab! Lagu xabaal! Xiniinyaha iyo xoogga Alla ku qabay! Adoogaa iyo awowgaa Alla cadaab! Caano waa! Cagay (Waraabe) caano u ag fariiso! Lagu xabaal oo qabrigaagu ma nuuro!

8. **Duco iyo samaan:**

Ducadu Af Soomaaliga way ku badan tahay in kasta oo ay ka yar tahay habaarka. Qofku markuu qof jecel yahay, wuu u duceeyaa. Wuxuu ugu duceeyaa barwaaqo iyo bash-bash in alla siiyo, intuu dunida ku nool yahay, hadduu dhintana in Ilaahay Jannadii geeyo. Waalidku wuu u duceeyaa ilmihiisa. Dadkuna wuu isu duceeyaa, markii uu is jecel yahay, hadduuse is noco, wuu is-habaaraa! Erayda ducadu, waxay noqdaan eray-eray, amaba tix-tix. Erayadaas iyo tixahaas, waxaa ka mid ah:

Khayr Alla ku sii! Allaha ku janneeyo! Alla magan! Alla igama kaa qaade! Khayr iyo jannaan kuugu duceeyay! Nebigii Allaha kuugu bishaareeyo! Bashbash iyo barwaaqo! Naxariis iyo naallo iyo khayr!

Naxariis Eebbe Allaha ku siiyo! Asaaggaa ha baryin idam Alla! Lagaama naxo! Ifkii Jannada Allaha kuugu bishaareeyo! Adduun iyo aakhiro Allaha ku nabad yeelo! Alla kuma cadaabo! Xasanaad iyo sawaab Allaha ku siiyo! Xurquun badan Allaha ku siiyo! Awliyadii Allaha kuugu bishaareeyo. Allaha kuu xirsixiro! Cayuun iyo Waleeco Allaha kaa wareejiyo! Illaaco kuma hesho!

## 9. Yeeridda Xoolaha iyo Bahallada:

Af Soomaaligu wuxuu leeyahay erayo u gooni ah xoolaha iyo bahallada. Taasina waxay ka timid nolosha Reer Guuraaga. Erayadaas, xoolaha u go'an dadka laguma yiraahdo. Waxaase jirta, markii qof, qof si-xun u caayayo, wuu ku yiraahdo eraydaas xoolaha u gooni ah.

Farduhu, markii ay daaqayaan, waxaa la yiraahdaa... deeg....deeg! Dameerku markuu biyaha sido, waxaa la yiraahdaa... naq... naq... naq! Riyuhu markii ay daaqayaan meel waxaa lagu yiraahdaa... sh... sh.. sh... sh! oo la kexaynayo! Ariga markii la kaxaynayo waxa la yiraahdaa... sh... sh... is... s... s! Idaha markii iyagana la kaxaynayo waxaa la yiraahdaa... Xày... xày... xày!... sh... sh... xày! Ariga riyu haddii ay ka lunto, amaba aryo kale ku dhex lunto, oo aryahaas ka qalooto, markay cida dayn weydo, waxaa la yiraahdaa... kaalay... kaalay... xow... xow... xow... kaalay... kaalay... xow!.

Lo'da, amaba saca, markii la kaxaynayo waxaa la yiraahdaa..... hùy... hùy... hùy! Geela markii la dheelmayo, waxaa la yiraahdaa..... oohow... oohow... oohow! Ratiga markii la kaxaynayo oo uu socodka diido, waxa la yiraahdaa... oho... oho... oho! Nirgaha iyo naylaha markii la kaxaynayo waxaa la yiraahdaa... dig... dig... dig... dig! Ratiga markii la fariisinayo waxaa la yiraahdaa... juw... juw... juw! Ratiga markii la kicinayona waxaa la yiraahdaa... kac... kac... kac...! Bahallada hilibleyda ahina waxay leeyihiin erayo u gooni ah. Waraabaha markii layska celinayo waxaa la yiraahdaa... Yur... yur... yur...! sidoo kale, Libaaxana markii layska celinayo, waxaa la yiraahdaa.... Yuryur... war yur... war yur... war yur! Dawacada markii layska celinayo waxaa la yiraahdaa... naahoy dawoco...! Dawoco...! Naahoy... naahoy... naahoy dawoco! Eyga markii layska celinayo waxaa la yiraahdaa... Hus... hus... hus! Eyga markii dadka lagu dirayo, waxaa la yiraahdaa... his qabo... his qabo... his qabo! amaba waxaa la yiraah-

daa... qoolle qabo... qoolle qabo... qoolle qabo! Eygu markuu guryaha galo waxaa la yiraahda... war kac! War kac... War kac!.

## HADAL TOOS AH IYO HADAL MALDAHAN

Hadal toos ah, waxaa la yiraahdaa hadalkii uu qof ku hadlay oo loo soo guuriyey, siduu qofku ugu hadlay isagoon wax laga beddelin. Hadal maldahanna, waxaa la yiraahdaa, hadalkii qof uu ku hadlay, oo uu soo guuriyey qof kale, isagoo doorsoon, amaba maldahan. Markii tix loo baddelayo, amaba laga dhigayo hadal maldahan, waxaa loo kaashadaa falidda (dheh). Markaas kaddib, ayaa falidihii ahaa joogtada loo baddelaa tagto. Haddii hadalka toosni, uu yahay weydiinley, hadalka maldahan, waxaa la geliyaa erayga «**weydiiyey amaba sheegay, warsaday**». Hadalka tooska ah, waxaa la geliyaa xeradaan (.....). Xeradaasi waxay ku tustaa, in hadalka la soo guuriyay uu yahay midka halkaas ku dhigan.

## HADALKA TOOSKA AH OO TIXO KU JIRA

Geelle wuxuu yiri, «Adigu ma degdegsan tahay?».
Xaliimo waxay tiri, «Maxaad adigu doonaysaa?».
Anigu waxaan iri, «Maxaa ka dhacay magaalada?».
Adigu waxaad tiri, «Dugsiga waan xirayaa?».
Isagu wuxuu yiri, «Maanta iga tag oo mar kale ii imow?».
Iyadu waxay tiri, «Ashkir goormuu ka soo noqnayaa Hargeysa?».
Innagu waxaan niri, «Kooxdii cayaaraha raadiyo Muqdisho, shalay ayay timid».
Idinku waxaad tiraahdaan, «Guddigii Golaha Sare ee Kacaanku shir ayuu u fariistay».
Iyagu waxay yiraahdeen, «Roob ayaa ka da'ay degmooyinka woqooyi».

## HADALKA MALDAHAN OO KU JIRA TIXO

Geelle wuxuu i weydiiyay, inaan degdegsan ahay iyo in kale.
Xaliimo waxay i weydiisay, inaan wax doonayo iyo in kale.
Anigu waxaan weydiiyay isaga, in magaalada wixii ka dhacay uu ii sheego.
Adigu waxaad sheegtay, inaad dugsiga xirayso.
Isagu wuxuu sheegay, inuu isagu maanta ka tago oo mar kale u yimaado.

Iyadu waxay weydiisay, goortuu Ashkir ka soo noqonayo Hargeysa.
Innagu waxaan sheegnay, in kooxdii cayaaraha raadiyo Muqdisho ay shalay timid.
Idinku waxaad sheegteen, in Guddigii Golaha Sare ee Kacaanku uu shir u fariistay.
Iyagu waxay sheegeen, in roob ka da'ay degmadaas woqooyi.

**Ogeysin:**

Ogow, in xiriiriyaha tixeed (in) uu kala qaybiyo labada tixood oo ku jira tixaha maldahan. Xiriiriye tixoodka (in-), waxaa gadaal ka raaca nagaadeyaalka; sidaan oo kale (in + aan, in + aad, in + uu, in + ay, in + aan, in + aad, in + ay). Tixaha maldahan, waxay iyana qaataan falidaha **(sheeg, weydii, wari)**. Ogow, in falidda **(dheh)** loogu isticmaalo tixaha hadalka toosan keliya, kuwa (sheeg, weyddii, wari)na loogu isticmaalo tixaha hadalka maldahan oo keliya.

## JOOGTO DAREERTO IYO TAGTO GOYSO

Joogto dareerto iyo tagto goyso, waxaa weeye labo tixood oo isku xiran. Tagto goyso, waxay goysaa shaqada joogto dareertada, waxay ku dhammaataa bilowga tagto goysada. Tagto goyso markii ay bilaabato yaa waxaa dhammaata shaqadii joogto dareertada. Waxaa isla socda tixda hore oo hawsheedii dhammaatay iyo tixda danbe oo hawsheedii bilaabatay. **Hawl dhammaadkeed waxay weeye hawl kale bilowgeed.** Taas waxaa ka mid ah haddaan iraahdo, «**Anigoo hadalaya, ayaa waxaa yimid Nuur**». Hadalkaygii waxaa gooyay, imaatinkii Nuur. Imaatinkii Nuur wuxuu bilowday, hadalkaygii markii uu joogsaday. Labadaas tixood, tixda hore waa joogto, tixda danbana, waa tagto. Sidaasoo kale, ayay tahay tagto dareerto iyo tagto goyso.

I. **Joogto dareerto iyo tagto goyso.**

Anigoo socon-**aya,** ayaa waxaa i istaajiyey cod haweeney.
Adigoo socon-**aya,** ayaa waxaa ku istaajiyey cod haweeney.
Isagoo socon-**aya,** ayaa waxaa isaga istaajiyey cod haweeney.
Iyadoo socon-**aysa,** ayaa waxaa iyada istaajiyey cod haweeney.
Innagoo socon-**aynna,** ayaa waxaa na istaajiyey cod haweeney.
Idinkoo socon-**aya,** ayaa waxaa idin istaajiyey cod haweeney.
Iyagoo socon-**aya,** ayaa waxaa iyaga istaajiyey cod haweeney.

Anigoo teg-**aya**, yaa waxaa yimid Sanmantar.
Adigoo teg-**aya**, yaa waxaa timid Geelo.
Isagoo teg-**aya**, yaa waxaa timid Geelo.
Iyadoo tag-**aysa**, yaa waxaa timid Geelo.

Innagoo teg-**aynna**, yaa waxaa timid Geelo.
Idinkoo teg-**aya**, yaa waxaa yimid Samantar.
Iyagoo teg-**aya**, yaa waxaa yimid Samantar.

II. **Tagto dareerto iyo tagto goyso.**

Anigoo sheegi **lahaa** hadalka, baa waxaa i afjigay Sharmaarke.
Adigoo sheegi **lahaa** hadalka, baa waxaa ku afjigay Sharmaarke.
Isagoo sheegi **lahaa** hadalka, baa waxaa isaga afjigay Cali.
Iyadoo sheegi **lahayd** hadalka, baa waxaa iyada afjigay Cabdi.
Innagoo sheegi **lahayn** hadalka, baa waxaa na afjigay Axmed.
Idinkoo sheegi **lahaa** hadalka, baa waxaa idin afjigay Faarax.
Iyagoo sheegi **lahaa** hadalka, baa waxaa iyaga afjigay Cali.

Anigoo seexan **lahaa,** ayaa waxaa booqasho iigu yimid Habboon.
Adigoo seexan **lahaa,** ayaa waxaa booqasho kuugu yimid Habboon.
Isagoo seexan **lahaa,** ayaa waxaa booqasho ugu yimid Habboon.
Iyadoo seexan **lahayd,** ayaa waxaa booqasho ugu yimid Habboon.
Innagoo seexan **lahayn,** ayaa waxaa booqasho noogu yimid Habboon.
Idinkoo seexan **lahaa,** ayaa waxaa booqasho idiinku yimid Habboon.
Iyagoo seexan **lahaa,** ayaa waxaa booqasho iyaga ugu yimid Habboon.

**Ogeysiis:**

Ogow, in summad dhammaadka joogto dareerto keli iyo koox ay tahay (-aya), (-aysa) na ay u go'an tahay keli qofka saddexaad oo dheddig, (-aynna) na ay u go'an tahay qofka koowaad oo kooxda ah keliya. Misana ogow, in summad dhammaadka keli oo tagto dareertadu ay tahay (lahaa) qofka kowaad, labaad, saddexaad oo dh. l.), iyo qofka labaad iyo kan saddexaad oo kooxda ah, (lahayn) na ay u go'an tahay qofka kowaad oo kooxda ah keliya! Labada tixood waxaa

isku xira xiraaga tixood «oo» oo tan hore gala. Tan hore waxaa la yiraahdaa tix-madaxeed, tan danbana tix-shardiley.

## KU CELISKA

I. Shardiley maxaa la yiraahdaa?

Xiriiriyeyaalka shardileydu immisaa u qaybsamaan?
Erayadaan shardileyda, waxaad ku dartaa tixo oo markaas kaddib akhri.
haddii.................. markii.................. kolkii.................. waagii............ waqtigii.

Sheeg gooraynta shardileydu intay u qaybsanto? ..................................
Keen joogto shardiley tix ku jirta?...................................................
Keen tixo ay ku jiraan summad dhammaadka tagto shardiyeda iyo tan joogto shardileyda iyo timaaddo fogey shardilyeda?

..........................................................................................

Maxaa la yiraahdaa tix madaxeed iyo tix shardiley? Mase kala taqaannaa, waxaa ku kala dhex yira?...................................................
Isagu wuu shaqaysan lahaa, hadduu shaqo helo? ..................................
Tixdaas tixo la mid ah keen? ..........................................................................

II. Ma taqaannaa falkaabyadu intay u kala baxaan? Maxaase la yiraahdaa falkaab ? ....................................................................................

a) keen afar tixood oo uu ku jiro falkaab gooreed? ........................

..........................................................................................

b) sheeg lix tixood oo ay ku jiraan falkaabyo meeleed?.................

..........................................................................................

d) keen laba tixood oo ay ku jiraan falkaabyo siyeed?................

..........................................................................................

dh) keen laba kooxood oo ay ku jiraan falkaabyo qiyaaseed?

..........................................................................................

e) Ii sheeg saddex tixood oo ay ku jiraan falkaabyo jimayn? ..........................................................................................

f) Falkaabyo daneed, ma taqaannaa? Haddii aad taqaannid ii sheeg? ..........................................................................................

g) keen tix ay ku jiraan falkaabka horjeedka ..................................

III. Maxaa la yiraahdaa ku dhufasho? ..................................................

a) keen falid ku dhufasho leh iyo magac ku dhufasho leh ...........
b) keen saddex magac oo ku dhufasho leh ..........................................

IV. Maxaa la yiraahdaa labanlaabka falidda? ..........
Falidahaan labanlaab .......... fal.......... sheeg.......... wareeg.......... bax.......... eeg.......... tir.......... liq.......... soco.......... fariiso .......... fur .......... xir.......... miiq.......... fuul.......... arag.......... dil.......... kexee..........

V. Tiradu, Af Soomaaliga immisay u kala baxdaa?..........
Keen gadaalraacaha kooxeed (-ood), oo lix tixood ku jira?..........
Keen lix tixood oo uu ku jiro gadaalraacaha tireed (-aad). Maxaa ku kala dhex jira shan iyo toban, iyo toban iyo shan?..........
Gadaalraacyada magacyada (-yin-, -yaal-aal-, as-, ah-, -ad, -af), oo tixo ku jira keen ..........

VI. Keen sagaal tixood oo ay ku jiraan magacuyaalka qudhaalaha (is) iyo magacuyaalka lihiga (-ay), iyo magacuyaallada tilmaanta, iyo magacuyaallada xadaysan iyo kuwaan xadaysnayn? ..........
Magacuyaallada weydiinleydu waa immisaa?.......... Ma keeni kartaa laba tixood oo ay ku jiraan magacuyaallada weydiinleydu? ..........
Waa maxay magacuyaallada tixaha isku xiraa?..........
Waa maxay magacuyaallada diiddoleydu?..........

VII. Sheeg intay yihiin gadaalraacyada magacyada labka ah..........
Sheeg intay yihiin gadaalraacyada magacyada dheddigga ah..........
Sheeg gadaalraacyada kooxeed oo magacyada..........
Erayadaan ku dar qodbaha ku habboon.......... tiro.......... waddo.......... huuri.......... wiil.......... ruug.......... muus.......... mar.......... wan.......... suuq.......... shaf.......... War..........

VIII. Ma taqaannaa erayada dareenka (dareenleyda) iyo erayada sugeyaalka?..........

a) farriinleydu intee u qaybsantaa?..........
b) akhri falid-farriinleydaan, **wad, dil, dheh, maqal, furo, firo, xiro, deyso, gelinsii,** wanaaji, seexo, **keeno, tiro, cabbsii, liqsii, dhigo oo tix ka samee mid walba.**

Keliga u beddel koox.......... fur albaabka.......... seexo halkaan.......... I maqal. Keen rida.......... dheh hadalka.......... dhan caanaha.......... Ninka iska celi.......... geela raac.......... Ilaali dalka.......... ii fariiso halkaas.......... waxba hay weydiin.......... ha ku socon jidka.......... ha sheegin hadalka .......... hayska jebin lugta ..........

IX. Maxaa la yiraahdaa xisley? Xisleydu intee u kala baxdaa?..........
Tixahaan xisleyda ah ku dar xisley.......... suul baa i jabay.......... caloosha ayaa layga hayaa.......... laf ayaan liqay.......... geed ayaa i xagtay.......... war naga tag!.......... naa naga aammus!.......... war i dhaaf! .............. ha i waalin!.............. iska bax!.............. hus qabo!..............

Keen toban tixood oo duco iyo habaar iyo yeerid iyo aammusidu ku jiraan ..............................
Keen shan tixood oo habaar ku jiro ..............................
Keen Sagaal tixood oo duco ku jirto ..............................

X. Maxaa la yiraahdaa hadal toos ah? ..............................
Maxaa la yiraahdaa hadal maldahan? ..............................
Tixahaan tooska ah u baddel tixo maldahan (Geelle, wuxuu yiri «Maxaad adigu beenta iigu sheegtay». Xaliimo, waxay tiri, «Berri badda ayaan ku dabaalan doonaa». «Sahra, waxay igu tiri, «Walaashay ayaa Dhuusamareeb ka timid». «Nimankii waxay yiraahdeen, shaqaalihii wuxuu dhisay warshad».

XI. Keen laba tixood oo ay ku jirto joogto dareerto iyo tagto goyeso?
Ma taqaannaa summad dhammaadka tagto dareerto iyo joogto goyso?
Maxaa loogu magacaabay joogto dareerto iyo tagto goyso?
Summad dhammaadkaan tagto dareertada iyo tagto goyso, waxaad ku dartaa falido, kaddibna ka samee tixo (-lahaa, -lahayd, lahayn).

## QAYBTA XIX.

### KALA DHIGIDDA

Kala dhigiddu Af Soomaaliga waxay ku tahay magac magac loo dhigayo. Kala dhigiddu waxay ku tustaa macno macna kale weydaarsan. Halqabsi.

| | |
|---|---|
| yar | weyn |
| dheer | gaaban |
| adag | jilicsan |
| quruxsan | foolxun |
| madow | cad |
| fudud | culus |
| fayow | jirran |
| gaajeysan | dheregsan |
| fayiigan | tabardaran |
| kaduudan | falfalacsan |
| udgoon | qurmuun |

### LABAYNTA IYO DHEDDIGAYNTA MAGACYADA MAGAALOOYIKNA, TUULOOYINKA, XAAFADAHA, DEGMOOYINKA IYO GOBOLLADA

Magacyada magaalooyinka, tuulooyinka, xaafadaha iyo degmooyinku in kastoo ay yihiin magacyo wax u gooni ah, haddana waxay qaataan qodobbada dheddig iyo kuwa lab. Qodobbada magaalooyinka, tuulooyinka, xaafadaha iyo degmooyinku way ka duwan yihiin astaamihii magacyada dadka iyo waxyaalaha.

Qodobbada dheddig ee magaalooyinka, tuulooyinka, xaafadaha iyo degmooyinku waxa weeye:

a) (-a), -ey), (-ya, -yo), (-o), (-ow), -la', -ley).

**Magaalooyinka magacyadoodu ay qaataan qodobbada dheddig.**

**Hargeys-a** way ka yar tahay Muqdisho.
**Berber-a** way ka kulushahay Kismaayo.
**Boosaas-o** waxay ku taallaa Xeebta Badweynta Hindiya.

**Gaalkacy-o** waxay ku taallaa gobolka Mudug.
**Mark-a** way ka qurux badan tahay Beledweyne.
**Qardh-o** way ka kulayl badan tahay **Ceerigaab-o.**
Qarniga labaatanaad bilawgiisa **Hoby-o** waxay ahaan jirtay Deked.
**Hurdi-ya** waxay ku taallaa Xeebta Badweynta Hindiya.
Calaw-**là** waxay leedahay gasiirooyin badan.
Qoryoo-**ley** waxay ku taallaa gobolka Shabeellaha Hoose.
**Jasiirra** waxay leedahay gasiirooyin badan.
**Baydhab-o** waxay leedahay canab.
**Afmad-ow** waxay leedahay xoolo badan.
**Afmad-ow** waxay ku taallaa soohdinta Keenya iyo Jam. Dimoq. Soomaaliyeed.
**Muqdish-ow** waxay leedahay Xeeb ballaaran.
**Dool-ow** waxay leedahay xoolo badan.
**Madiin-a** waxay ka mid tahay Xaafadaha Muqdishow.
**Biyoo-ley** waxay u dhowdahay Waajid.
**Jubba-da** Sare waxay leedahay beero badan.
**Mahad-day** waxay leedahay beero iyo geedo dhaadheer.

b) **Magaalooyinka dheddig ee magacuyaalladoodu ayan qaadan qodobbo.**

Magaalooyinka, degmooyinka, tuulooyinka iyo xaafadaha magacyadoodu ay ku dhammaadaan shibbanayaasha, dhammaantood waxay yihiin dheddig. Magacyadaas dheddignimadoodu waxay ka muuqataa dhinaca siimaantikadooda.

**Jilib** waxay ku taallaa Jubbada Sare.
**Dhuusamareeb** waxay ku taallaa gobolka Galguduud.
**Luuq** waxay ku ag taallaa webi Jubba.
**Laascaanood** waxay leedahay ceelal iyo laasas.
**Jawhar** waxay leedahay beero qasab ah ee sonkorta laga sameeyo.
**Balcad** waxay Muqdishow u jirtaa 30 kiilowmiter.
**Benaadir** waxay leeahay daaq iyo beero badan.
**Mudug** waxay leedahay ugaar badan.

**Qodbaha labee magaalooyinka, Tuulooyinka, Degmooyinka, Xaafadaha iyo Gobolladu waxay noqdaan** (-e, -ye).

Garoow-e wuu kulul yahay.
Beledweyn-e wuxuu leeyahay buuro dhaadheer.

**Afgoo-ye** wuxuu leeyahay beero muus ah.
**Wanleweyn-e** wuxuu ku yaallaa gobolka Sh. Hoose.
**Cadal-e** wuxuu ku yaallaa Xeebta Badweynta Hindiya.
**Xarardheer-e** wuxuu u dhow yahay Hobyo.

Ogow in magacyadaas magaalooyinka iyo degmooyinka iyo gobollada iyo Xaafadaha dadku maanta ay ka wada dhigaan dheddig, in kastoo ayan dhismaha afka ku ahayn sidaas.

## SALAYNTA MAGACYADA

Af Soomaaligu wuxuu leeyahay salayn sida afafka kale. Salaynta waxa ka abuurma magacyada iyo falidaha. Halqabsi:

-id-
caab —
-ayaa, -doonaa, -ay,

Sida aad halkan ku aragtid, salaynta magacyada waxaa lagu yaqaannaa inay magacyadu iyo faliduhu ka abuurmaan. Magacyadu waxay u kala baxaan kuwo qeexan iyo kuwo sifaysan. Salka magacyada qeexan waxaa raaca gadaalraacaha (-id-). Gadaalraacaha (-id-), wuxuu raaci karaa salka magacyada, markii ay ku dhammaadaan magacyadu shibbaneyaanshan.

(-b-) caab-id-, koob-id-, rab-id-,
(-d-) wad-id-, hod-id-, dood-id-,
(-f-) leef-id-, gef-id-, saf-id-,
(-g-) sheeg-id-, rog-id-, noog-id-,
(-h-) daah-id-, taah-id-, kaah-id-,
(-k-) ark-id-, falk-id-, subk-id-,
(-l-) lul-id-, lal.id-, dil-id-, maal-id-.
(-m-) lum-id-, oom-id-, hum-id-.
(-n-) doon-id-. faan-id-. keen-id-.
(-q-) liq-id.- baq-id-. daaq-id-.
(-r-) sayr-id-. dar-id-, bar-id-.
(-s-) lis-id-, miis-id-, kas-id-.
(-c-) liic-id-. kic-id-. sooc-id-.
(-w-) halw-id-. sahw-id-.
(-y-) waay-id-, dhay-id-, laay-id-.

Ogow, in gadaalraacaha magacyada qeexan (-id-) ay raacdo jaangooyo xaaladleyda (da).

Salka magacyada waxaa haddana raaca gadaalraacaha magacyada (-in-). Taasina waxa weeye markii magacyadu ay ku dhammaadaan shibbanaha (-t-), sida: (-t-) boot-in-, imaat-in, moot-in-.

Ogow in shibbanaha (-t-) uu asalkiisii ahaa (-d-). Shibbanha (-d-) wuxuu ka baddalmay dhawaaqiisii hore, wuxuuna u baddelmay dhawaaq cusub. Taas waxaa ku tusaya sida aan halkaan ka sheegeynno.

| **Dhawaaqii hore (asal)** | **Dhawaaqii cusbaa** |
|---|---|
| bood-in- | boot-in- |
| imaad-in- | imaat-in- |
| mood-in- | moot-in- |

Ogow, in gadaalraacaha magacyada salaynta (-in-) ay raacaan jaangooyo xaaladlyeda (-ta, -ka).

Salka magacyada waxaa haddana raaca gadaalraacaha (-in-, -is-,). Taasina waa markii salka magacyadu ay ka koobmaan erayada halka siilab leh ama kuwa labada siillab leh, sida:

**Erayga halka siillab ka koobma.**

kar-in- (-is-), tir-in- (-is-), fiir-in- (is-).

**Erayada labada siillab ka koobma.**

ilaal-in- (-is-) olol-in- (-is-).

Magacyada salayntoodu ka koobanto halka siillab amaba labada siillab way ku badan yihiin Af Soomaaliga. Qaabkoodu alfabeetiga ahi waa kuwaan:

(-b-) qayb-in-, (-is-) gaab-in-, (-is-) koob-in-, (-is-),
(-d-) bad-in-, (-is-), ked-in-, (-is-) jeed-in-, (-is-),
(-f-) buuf-in-, (-is-), faaf-in- (-is-), oof-in-, (-is-),
(-j-) ceej-in-, (-is-), daaj-in-, (-is-), xooj-in-, (-is-),
(-h-) ooh-in-, (-is-),

(-m-) saham-in-, (-is-), dhaam-in-, (-is-), tuum-in-, (-is-),
(-l-) gel-in-, (-is-), faal-in-, (-is-), kaal-in, (-is-),
(-n-) baan-in-, (-is-), been-in-, (-is-), faan-in-, (-is-),
(-q-) baaq-in- (-is-), riiq-in-, (-is-), qiiq-in-, (-is-),
(-r-) kar-in-, (-is-), tir-in-, (-is-), fiir-in-, (-is-),
(-s-) toos-in-, (-is-), hoos-in-, (-is-), moos-in, (-is-),
(-c-) beec-in-, (-is-), raac-in-, (-is-), shaac-in-, (-is-),
(-w-) qaaw-in-, (-is-), huw--in-, (-is-), haaw-in-, (-is-),

Ogow, in gadaalraacaha salaynta magacyadu (-in-) uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-TA), iyo gadaalraacaha salaynta magacyada (-is-) uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-ka) oo markaas kaddib, ay luuqdu baddelmayso.

Salka magaca haddana waxaa raaci kara gadaalraacyada (i-s-, -so-), -sad-, -ad). Gadaalraacyadaasi waxay raaci karaan magacyada, markii dib ay ku dhammaadaan shaqallada: (-o-, -so-) sida aad halkaan ku aragtid:

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | -sho- | | -sho- | | -sho- |
| qaado ——> | -is- | raaco ——> | -is- | guro ——> | -is- |
| | -ad- | | -ad- | | -ad- |
| | -sho- | | -sho- | | -sho- |
| qabso ——> | | cabsa ——> | | fuqso ——> | |
| | -sad- | | -sad- | | -sad- |

Ogow, in gadaalraacaha salaynta magacyada (-sho-) uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-DA) iyo gadaalraacaha salaynta magacyada (-is-) uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-TA) iyo kan salaynta magacyada (-ad-) (-san-) uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-KA).

Salka magaca haddana waxaa raaca gadaalraacaha (-ayn- (-eyn-)). Taasina waa markii eraygu ku dhammaado shaqalka

(-ay-)
(-ee-) sida aad halkaan ku aragtid:
(-aa-)

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | -ayn- | | -ayn- | | -ayn- |
| hay, samee ——> | | kexee ——> | | daa ——> | |
| | -ays- | | -ays- | | -ays- |

Ogow, gadaalraacaha salaynta magacyada (-ayn-) uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-TA) iyo gadaalraacaha salaynta magacyada (-ays-) uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-KA-).

Salka magaca haddana waxaa raaca galaadraacyada salaynta (-is- (-in-). Taasina waxay dhacdaa markii eraygu uu ku dhammaado shaqallada (-oo-), sida aad halkaan ku aragtid:

| | | |
|---|---|---|
| goo ——> -in- / -is- | qoo ——> -in- / -is- | oo (h) ——> -ayn- / -is- |

MAGACYADA FALIDAYSAN

Magacyada falidaysani way ku badan yihiin Af Soomaaliga. Iyagu sida magacyada qeexan oo kale waxay leeyihiin gadaalraacyo salka magaca raaca. Gadaalraacyadaasi waxay caan ku yihiin beddelidda macnaha magacyada. Magacyada falidaysani waxay u dhow yihiin falidaha; sidaas daraaddeed, ayaan waxaan ku magacaabay magacyada falidaysan. Gadaalraacyaada magacyada falidaysani waxaa weeye:

(-si-)
(-aal-), (-aysi-), (-aan-)

**Gadaalraacyada magacyada falidaysan (-aal-)**

| | | | |
|---|---|---|---|
| kab-aal- | qab-aal- | tus-aal- | socd-aal- |
| qod-aal- | hub-aal- | kuf-aal- | been-aal- |
| rog-aal- | mud-aal- | shak-aal- | dus-aal- |

Ogow, in gadaalraacaha magacayada falidaysan (-aal-) ay raacdo jaangooyo xaaladleyda (-KA).

**Gadaalraacyada magacyada falidaysan (-aal+aysi-)**

Gadaalraacaha magacyada falidaysan (-aysi-) waxaa horay ka raaca gadaalraacaha falidaysan (-aal), markaas kaddib, ayuu magaca macna hor leh u yeelaa. Magacyo aan aad u yarayn ayaa labadaas gadaalraacyada qaata. Magacyada gadaalraacyada (-aal+aysi-) qaataa waa kuwan:

Tus-aal-aysi-, hub-aal-aysi, qod-aal-aysi,
Mud-aal-aysi-, rog-aal-aysi-, socd-aal-aysi-,
Kab-aa-aysi-, kuf-aal-aysi-, shak-aal-aysi-,
Been-aal-aysi-, tum-aal-aysi-, dir-aal-aysi-,
Googg-aal-aysi-, cad-aal-aysi-, moogg-aal-aysi-,
Bood-aal-aysi-, car-aal-aysi-, wal-aal-aysi-,
Hooy-aal-aysi-, ceeb-aal-aysi-, dur-aal-aysi-,

Ogow, in gadaalraacaha salaynta magacyada (-aysi-) uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-GA).

**Gadaalraacyada magacyada falidaysan**

(-aan) (-an),
(-aysi) (-si).

Gadaalraacyada magacyada falidaysani aalaaba waxay raacaan magacyada falidaysan. Gadaalraacyada magacyada falidaysani (-in-, -aysi-, (-eysi-) waxay siiyaan magacyada macna hor leh. Iyagu waa kuwaan :

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | -aan- | | -aan- | | -aysi- | | -aan- |
| yar ⟶ | | fudud ⟶ | | fur ⟶ | | fog ⟶ | |
| | -aysi- | | -ays- | | -aan- | | eysi- |
| | -aan- | | -aysi- | | -aysi- | | -aan- |
| badan ⟶ | | neceb ⟶ | | weyn ⟶ | | foolxun(m) ⟶ | |
| | -aysi- | | -aan- | | -aan- | | -eysi- |
| | -aysi- | | -aysi- | | -aysi- | | -an- |
| bann ⟶ | | dheer ⟶ | | adak ⟶ | | xun(m) ⟶ | |
| | -aan- | | -aan- | | -aan- | | -aysi- |

Waxa jira magacyo falidaysan oo aan qaadan karin gadaalraacaha magacyada falidaysan (-aan (-an) inkastoo ay yihiin magacyadaasi magacyo sifaysan. Magacyadaas waxaa ka mid ah:

shaq-aysi-, col-aysi-, cadd-aysi-, kulul-aysi-, sheek-aysi-, qabow-si- waanwaan-si-, welim-eysi-, wacad-aysi-, qub-eysi-, gum-eysi-, mir-aysi-,.

Ogow, n gadaalraacaha magacyada falidaysan (-aan-) uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-TA).

**Gadaalraacyada magacyada falidaysan:**

(-sad-)
(-ad-)
(-aysad-)
(-asi-)

Gadaalraacyada magacyada falidaysan (-sad-, (-ad-) -aysad-, (-aysi-) waxay raacaan magacyada tirada ah iyo kuwa ka koobma laba magac ee laysu geeyey. Iyagu waxa weeye kuwan:

lacagtir ——> -sad- / -si-
sagaaljir ——> -sad- / -ad-
geeltir ——> -sad- / -si-

xoolodhac——> -si- / -sad-
feenfeen ——> -si- / -ad-
naax——> -sad- / -aysi-

waxjecl-aysi,
xilnecb-aysi-
xanjecl——> -aysi- / -sad-

halqab ——> -sad- / -si-
shanjir ——> -sad- / -si-

xansheeg-ad-, dansheeg-ad-, xooldhaq-ad-, beertabc-ad-,

doog——> -sad- / -si- dashid-ad, guridhis-ad, gabbaldhac-si-

naflahaar-si-, naylodub-ad-, naagguur-si-, kaydtir-sad,- foolbax-si-, gundhig-ad-, dabshid-ad-, guridhis-ad-, gabbaldhac-si-, iwm.

Ogow, in gadaalraacaha magacyada falidaysan (-sad-), (-ad-) uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-ka) kan (-si-) na uu qaato jaangooyo xaaladleyda (-GA).

## MURTIDA IYO BIBLIYOGRAAFIGA AF SOOMAALIGA ALAABTIISA BUUGAGEED


1. Abraham, R. C. & Warsama, Soleyman. **The Principles of Somali,** 2nd ed. London, Pub. by the author (cyclostyled). 1961 227 correction sheets.

2. **Somali-English Dictionary.** London. Univ. of London Press, Ltd. 1964. pp. 332.

3. Axmed Shire Jaamac & Kozol, Charles, **An Elementary Somali Drill Book.** New York. Teachers College, Columbia Univ. 1966 pp. 165.

4. Axmed Shire Jama, **An Elementary Soomali Phrase Drill Book.** Printed by the author in Mogadishu, Somali Republic of 1964, pp. 131.

5. Andrzejewski. **The Declensions of Somali Nouns.** London. School of Oriental and African Studies, Univ. of London (obtainable solely from Messrs. Luzac & Co., Ltd., 46 Gt. Russel Street, London, W. D. 1.), 1964 pp. 149.

6. Andrzejewski, B. W. (a work on the Somali verb) in preparation.

7. Arpino Ludovico, **Vocabolario dall'Italiano nelle versioni galla, oromo, amara, dancala, somala. Milano.** Hoepli. 1938.

8. Barry, B. **An Elementary Somali Grammar,** Asmara (Ethiopia). Tipografia Raimondi, Cf. 1937, pp. 106.

9. Bell, C.R.V. **The Somali Language.** London. Longmans, Green & Co., 1953, pp. 185.

10. Carcoforo Enrico. **Elementi di Somalo e ki-suahili parlati al Benadir.** Milano. Hoepli. 1912, pp. 154.

11. Costaguti, Marchesa Maria Afan de Rivera. **Manuale Pratico di Lingua Somala ad uso dei viaggiatori nella valle del Giuba.** Roma, Casa editrice Italiana. 1909, pp. 136.

12. Drysdale John G. S. **Notes of the Somali Language for beginners.** Hargeysa, Somalia. The Stationary Office. 1953, pp. 67.

13. Drysdale, John G. S. **Somali Primier,** Part 1. Hargeysa, Somalia, The stationary Office. 1959, pp. 40.
14. Ferrand Gabriel, **Notes de Grammaire Somalie.** Alger. P. Fontana et Cie. 1886, pp. 28.
15. Galaal Muusa Xaaji Ismaciil & Andrzejewiski B. W. **Hikmad Soomaali.** London. School of Oriental and African Studies, Univ. of London, Oxford Univ. Press, (Annotated African Texts IV). 1956, pp. 150.
16. Pia J. Joseph, **«Language in Somalia»** in Linguistic Reporter, Newsletter of the center of applied linguistics. Washington, D.C. Vol. viii, no. 3, June, 1966.
17. Praetorius F. **«Uber die Somalisprache»** in Zeit. Deut. Morgenland Ges. Vol. xxiv 1870, pp. 145.
18. Armstrong, Lilias B. «The Phonetic Structure of Somali». in: **Mittelilunge des Seminars for Orientalischen Sprachen zu Berlin.** Jahragang xxxvii, abteilung iii. Berlin. 1934, pp. 116-61, repub. recently by: Gregg press, inc. 171 East Ridgewood Ave., Ridgwood, New Jersey, U.S.A. 1964, pp. 46.
19. Kirk, G.W.C. **A Grammar of the Somali Language with Exambles in Prose and Verse of different Somali Dialects.** London Cambridge Univ. Press, 1905, pp. 26+16 correction sheets.
20. Cust R. **The modern Languages of Africa.** London. Trubner & Co. 1883.
21. Cerulli Enrico. Somalia III **La tribù Somala,** lingua Somala in caratteri Arabi ed altri segni ibid.
22. **Abwaan urursan Af-Soomaali iyo Ruusha, Ruush Af-Soomaaliya kratkii Somali-ruskii ii ruusko** Somali slovar D. I. Stepanjenko iyo Mohamed Haji Osman. Izdatelstvo (Sovitskaya Ensiklopedia) Mosko 1969.
23. Reinsch Leo, **«Der Dschabartidialekt der Somali-Sprache»** (com**pare entry 35). in:** Sitzungsberichte, Akademie der Wissenschaften in Wien, Philosophisoh-historische klasse. v. cxlviii. Vienna 1858.
24. Pia J. Joseph & Black, Paul and Dillinger, Dale. **Beginning in Somali-Drill Book.** Washington, D.C. Unit. States Dept. of Health, Education and Welfare, Office of Education. 1964 pp. 210.
25. Tucker A, N. & Bryan, M.A. **Linguistic Analyses the non-Bantu Languages of North-Eastern Africa.** Handbook of African Languages. International African Institute. Oxford University Press. London. 1966, pp. 627+large linguistic map.